OHIO DEPARTMENT OF PUBLIC SAFETY
EDUCATION • SERVICE • PROTECTION

QORAALKA SHARCIYADA

GAWAARIDA OHIO

Waxa soo saaray oo diyaariyey:
Waaxda Badbaadada Dadweynaha Ohio
P.O. Box 182081, Columbus, Ohio 43218-2081
An Equal Opportunity Employer
Si aad dalbato nuqulo kale, fadlan wac
(614) 466-4775, ama booq
www.publicsafety.ohio.gov

Si aad u balansato imtixaanka waddada, booqo:
www.ohiodrivingtest.com

TUSMADA

1 - RUQSAD SIINTA DARAWALKA & DIIWAANGELINTA GAADIIDKA 1
Sida loo helayo ruqsada darawalnimada ee ohio 1
Tilmaamaha Codsadayaasha Ruqsadda ugu Horeeya ee Darawalka 5
Dhibco helista 9
Dib u cusboonaysiinta liisankaaga 12
Ruqsad isku midka ah 13
Dadka haysta ruqsad baabuur waddan kale 13
Xeerka isticmaalka ruqsada 14
Macluumaadka xubin deeq-bixiyaha 14
Dhaxalreeb qof nool 15
Gaadhi lahaanshaha 15
Macluumaadka taarikada ruqsada 15
2 - RUQSAD SIINTA DARAWALKA & DIIWAANGELINTA GAADIIDKA 16
Ruqsada darawalnimada dadka degaanka ku cusub 16
Samaynta shahaadada lahaanshaha 17
Beddelashada diiwaangalinta gawaarida ka-baxsan gobolka 18
3 - RUQSADDA DARAWALNIMADA GANACSIGA 19
Heerarka ruqsadda darawalnimada ganacsiga (cdl) 19
Yaa u baahan cdl 19
Oggolaanshaha (ayidaadda) iyo xanibaada cdl-ka 21
Waxyaabaha ka reebban cdl-ka 21
Qaabsocodyada loogu talagalay helitaanka cdl 22
Tijaabinta 22
Kharashka 23
Cusboonaysiinta/jadiidinta 23
4 - XEERKA BAASKIILKA & GAADHI BAASKIILKA 23
Xeerka iyo sharciga baaskiilka 23
Codsashada ruqsada baaskiilka 24
La wadaagista wadada baaskiiladleyda 28
Gaadhi baaskiilka 28
Codsashada ruqsadaada baaskiilka 29
Sharciyada gaarka ah ee wadayaasha gaadhi baaskiilka 30
Su'aalaha & jawaabaha xeerka gaadhi baaskiilka ohio 31
5 - SHARCIGA QALABKA BAABUURTA 33
Walxaha la hubiyo marka baadhista la samaynayo 33
Qalabka kale 36
Shahaadada e-check 37
6 - SHARCIGA TARAAFIGA 37
Haadadka 37
Leexashada 40
Hababka saxda ee bidix u leexashada 41
Joogsashada 42
U banaynta 43
Waydaarashada 44
Xadidaada xawaaraha 45
Is-goysyada tareenka xadiidka 46
Baarkinka 48
Suumanka badbaadada 49
Xakamaynta ilmaha 50
Arag isku gudubka 51
Iska laadlaadinta dhinaca gaadhiga 51
Kaxaynta gaadhi marka aan maankaagu fayoobayn 51
Daroogo 53
Ruqsad baabuur oo been abuur ah 53
Sharciga dhibcaha 53
Tuhun ku wadista baabuurka 55

Masuuliyada maaliyadeed 55
Laalista ruqsada tijaabada ku jirta 57
7 - CALAAMADAHA, SIGNALADA IYO XARIIQYADA WADOOYINKA....58
Calaamadaha macluumaadka gaarka ah 58
Calaamadaha digniinta 59
Ha dhaafin....61
Tallowga ama gudbidda 61
Dugsiyada....62
Wadada isku darsan, qaybsan....62
Gaar ah....63
Dhismaha....63
Calaamadaha tilmaanta....64
Gaadiidka....64
Dadka wadada ka talaabaya 65
Calaamadaha maamulka....65
Calaamadaha madnuuca....66
Xariiqyada wadooyinka....66
8 - SHURUUDAHA WARBIXINTA ISKU DHACA BAABUURTA 67
Waxaad samaynayso haddii isku dhac yimaad 67
Waxaad samaynayso haddii aad jiidho deero 68
9 - XAALADAHA GAARKA AH....68
Wadista baabuurka ee habeenkii....68
Wadista baabuurka jiilaalkii....68
Wadista baabuurka ee barafka....69
Wadista baabuurka waddo banaan 70
Haddii aad daal dareento marka aad gaadhiga waddo 71
Marka aad isticmaalayso laydhka....71
Dhibaatooyinka gaadiidka....71
Wadista baabuurka ee difaaca ah 72
Wadaagista aaga bilaa baabuurta 72
Baabuurta fariimaha qaada 72
Signalada taraafigga ee aan shaqaynayn 72
10 - BAASKIILADAHA 73
Sharciga taraafikada....73
Sharciyada baaskiiladaha....73
La-wadaagga jidka baaskiiladlayda 74
11 - LUGEEYAYAASHA....74
Calaamadaha & signalada....74
Signalada kontoroola lugeeyayaasha....74
Fiiri labada jihaba....74
Isticmaal meelaha laga talaabo 74
Barbar lugaynta jidka 75
Lugeeyayaasha looma oggola jidka weyn 75
Kaabadaha (biiriijyada) laabma & jidka tareenka 75
Gacan haadinta....75
Baabuurta badbaadada dadweynaha....75
Lugeeyayaasha indhaha la' 75
Khamriga iyo daroogada....75
Dharka dhalaala....75
Wax ku tuurista ama ku sii daynta walax jidka weyn dhexdiisa....76
12 - SHARCIYADA QASHINKA....76
Gudaafad ka tuurista baabuurka 76
Rar aan sugnayn....76
Gudaafad qubista & tuurista aan sharciga ahayn....76
Wasakhaynta dhulka gobolka ama biyaha 76
Ku tuuritaanka xashiishka, saliid ama wasakh kale togga ama bulaacadda 77
Walax ka soo qubis dooni dusheed 77
Baabuurta laga tagay....77
Qlaab laga tagay....77

LIFAAQA A - XARUMAHAHA IMTIXAANKA RUQSADDA DARAWALNIMO.....78
LIFAAQA B - MACLUUMAADKA XUBIN DEEQ-BIXIYAHA.....82
LIFAAQA C - SU'AALAHA IMTIXAANKA NAMUUNADDA AH EE LA SOO QAATAY IMTIXAANKA DARAJADA AQOONTA (CLASS D).....83

1 - RUQSAD SIINTA DARAWALKA & DIIWAANGELINTA GAADIIDKA

(Gobolka dhexdiisa)

Nidaamka ruqsad (liisan) siinta darawalada ee Ohio waxaa lagu sheegay Xeerka Dib loo Eegay ee Ohio. Cutubka 4507 wuxuu sheegayaa inaan qofna waddada guud ku kaxayn gaadhi, ama hanti guud ama mid gaar ah oo dadwaynuhu isticmaalo aanu u isticmaalin socodsiinta gaadhiga ama baarkin ilaa iyo qofka gaadhiga kaxaynayaa uu ka soo gudbay imtixaanka la rabo oo uu ruqsad ka qaato Diiwaangeliyaha Gaadiidka (Registrar of Motor Vehicles).

Imtixaanka ruqsadda darawalka waxaa qaada Roonddada Waddooyinka Gobolka Ohio (Ohio State Highway Patrol). Bixinta ruqsada darawalka waxaa maamula diiwaangaliye-ku-xigaha Xafiiska Gaadiidka Ohio ee wakaaladaha ruqsadaha iyo hal xarumood oo u adeegga macmiilka ah.

Inkastoo badanaa gadiidleyda reer Ohio ay haystaan ruqsada darawalnimada caadiga ah------- oo magaca rasmiyan loo yaqaan yahay “ruqsadda darawalka ee kalaas D”----- gobolku wuxuu sidoo kale soo saaraa dhowr nooc ii liisano ah oo kale: liisanka darawalnimada ganacsiga; Ruqsadda wadidda ganacsi ee Ohio (CDL); Ruqsadda mootada (MC) ama ayidaad; iyo liisank baaskiilka motorka leh (moped).

SIDA LOO HELAYO RUQSADA DARAWALNIMADA EE OHIO

Dadka codsanaya ruqsadda gawaarida darawalnimada Ohio marka ugu horraysa waa inay ugu yaraan da’doodu tahay 15 jir iyo lix bilood waana inay keenaan dukumentiyo caddaynaya da’dooda, isirkooda, iyo lambarkooda sooshiyal sikuyuuritiga marka ay soo booqdaan xarunta imtixaanka ruyqsadaha iyo kuxigeenka diiwaangeliyaha. (Waxaad ka fiirisaa bogga 2aad iyo 3aad dokumentiyada la aqbali karo). Haddii da’du ka yar tahay, codsigan waa inay xafiiska ku-xigeenka ku wada saxeexaan codsadaha iyo waalid ama mas’uul xiliga codsiga. Qof la-saxeexe ah waa inuu dhiibaa ruqsadda darawalnimada Ohio oo sharci ah ama aqoonsiga Ohio oo sharci ah ama laba kale oo ah dukumentiyo la aqabali karo oo caddaynaya aqoonta (Ka fiiri Liistada Dukomentiyada La Oggol Yahay, bogagga 3 iyo 4). Dhammaan codsadayaashu waa inay ka gudbaan imtixaan aragga ah iyo imtixaan aqoonta ah si ay u helaan kaadh aqoonsi ku-meel-gaadha ah (TIPIC). Codsadayaasha ka yar 16 jir waa inay wadista ku barbartaan waalid haysta ruqsad ama mas’uul sharci kaas oo fadhiisanaya kursiga ku xiga. Wixii ka wayn 16 jir iyo, waxaa laga yaabaa inay wadista ku tabobartaan wade ka wayn 21 jir isla markaana haysta ruqsad oo fadhiista kursiga iyaga ku xiga.

Shuruudaha hore ee ruqsaddu waxay sidoo kale khuseeyaan darawalada ruqsaddoodu dhacsanayd wax ka badan lix bilood iyo shaqsiyaadka codsanaya ruqsad cusub kadib markii ay ruqsaddoodii hore ku waayeen sababo la xidhiidha laalis ama kala noqosho.

Ruqsadda la siiyo dadka da’doodu ka yar tahay 21 waxay dusha ku yeelan doonaan xariijin cas, sawirkuna wuxuu ku dhegsanaan doonaa dhinaca bidixda.

Intaa waxaa soo raaca iyadoo ereyada “ka yar 21” ama “ka yar 18” ay ka muuqan doonaan ruqsadda darawalnimada ee kor u taagan. Ruqsadda la siiyo kuwa 21 jir ah ama ka wayn wuxuu dusha ku yeelan doonaa xariijin huruud (jaale) ah, sawirkuna wuxuu kaga dhegsanaan doonaan midigta. Waxa jira codsiyo kala duwan oo luugu talagalay deggenayaasha ku cusub Ohio ee hore gobol kale uga haystay ruqsad darawalnimo oo ansax ah (fiiri 2 Ruqsad Siinta Darawallada iyo Diiwaangelinta Gaadiidka- Deggenayaasha Cusub, Cutubka 3), dadka jecel inay codsadaan ruqsad darawalnimo ganacsi (fiiri Ruqsadda Darawalnimada Ganacsiga, Cutubka 4), iyo dadka jecel inay codsadaan ayidaadda mootada ama ruqsadda kaxaystaha baaskiilka motorka leh (fiiri Sharciyada Mootada iyo Baaskiilka Motorka leh Cutubka 4).

WAAXDA BADBAADADA DADWEYNAHA OHIO
XAFIISKA GAADIID WADIDDA

LIISKA DOKUMENTIYADA LA AQBALI KARO

Si loo helo Kaarka Aqoonsiga Fasax Ku-Meelgaar Tababbar ee Ohio(TIPIC), Liisanka Dareewalka Ohio, Liisanka Dareewalka Ganacsi (CDL), Kaarka Aqoonsiga (ID), Mootada ama Liisanka Moobeedh-ka (Moped), codsadahu waa inuu dhiibaa hal dukumenti oo kowaad iyo hal labaad ama 2 dukumenti oo kowaad si loo xaqiijinaya dhammaantood shanta waxyaabood ee soo socda: (1) magaca hore ee sharciga ah, magaca dhexe AMA xarafka hore ee magaca dhexe, iyo magaca dambe ee xaadirkan jira; (2) taariikh dhalasho; (3) lambar sooshal sekuuriti (SSN), haddii waligeed qofka loo sameeyey; (4) muwaaddinimo Mareykan AMA joogitaanka sharci; iyo (5) cinwaanka jidka deggenaansho oo Ohio ku yaal. Haddii dukumentiga kowaad iyo/ama labaad ayna xaqiijin codsadah cinwaankiisa jidka deggenaansho ee Ohio, codsadaha ayaa dhiibi doona dukumentiyada ku jira liiska xaqiijinta deggenaanshaha.

Si loo helo beddelka kaarka TIPIC, DL, CDL, ID, Mootada ama Liisanka Moobeedh-ka, codsaduhu waa inuu saxeexaa caddayn tilmaameysa inuu lumay ama la xaday, u burburay, la laalay iyo lala wareegay kii asalka ahaa, oo u dhiibaa hal dukumenti kowaad ah AMA labaad oo ku aaddan sawirka faylka ku xereysan iyo dhammaan shanta arrimood ee ku jira nidaamka BMV. Haddii shanta arrimood aysan la mid noqon kuwa nidaamka BMV, codsadaha ayey waajib ku tahay inuu dhiibo dukumenti la aqbali karo sidii uu u caddayn lahaa arrimaha aan isku aaddanayn.

Kaarka TIPIC, DL, CDL, ID, Mootada ama Liisanka Moobeedh-ka, oo xaadir ah ama dhacsan wax ka yar lix bilood ayaa ah caddayn qancineysa dhammaan arrimaha laga rabo macaamil kasta oo BMV (oo ay ka midka yihiin la-saxeexayaasha) oo markaa looma baahna caddayn dheeraad ah.

Kaliya dukumentiyada asalka ah ama nuqulka sita caddayn asal ah oo ay leedahay awoodda xafiiskii bixiyey ayaa la aqbali doonaa. Nuqullada aan la soo caddayn ama nuqullada dukumantiyada la soo caddeyey lama aqbali karo. Ka dhicitaanka in la keeni waayo dukumentiyada aqoonsi iyo caddaynta deggenaashaha Ohio ayaa ku dambayn doona u diiditaan codsi.

Magaca codsade ee sharciga oo buuxa ayaa ka koobnaan doona codsadaha magaciisa hore ee xaadirkan (loo yaqaan), magaca dhexe ama xarafka hore ee magaca dhexe, iyo magaca dambe (magaca saddexaad). Haddii dukumentiyada kowaad iyo kuwa labaad ee la dhiibay aysan xaqiijin codsadaha magaciisa buuxa oo sharci ah, ama magacyada dukumentiyada ku yaal ay yihiin kuwo aan islahayn, codsadaha ayaa dhiibi doona dukumentiyo dheeraad ah si loo xaqiijiyo magaciisa buuxa ee sharci, qanciyana diiwaangaliyaha ama diiwaangaliye-ku-xigaha. Dukumentiyada soo socda ayaa loo aqbali karaa ujeddadan: shahaado nikaax; ama liisan guur; nuqul waraaq isfuritaan sharcyeysan, kala-tag, fasqaad guur; ama nuqul sahrciyeysan oo magac beddel maxkamadi amartay.

DUKUMENTIYADA KOWAAD EE LA AQBALI KARO

(Waa inay lahaadaan Taariikh Dhalasho)

- CADDAYN DHALASHO - Waa inay noqotaa asal ama koobi la soo caddeeyay, oo shaabbad leh, ayna soo saartay wakaalad dowlo arrinta ku habboon
- NUQUL SHARCIYEYSAN OO AH AMAR MAXKAMAD - Waa inuu lahaadaa magaca oo buuxa iyo taariikhda dhalashada codsadaha
- FASAXA HUBABKA QARSOON – Fasax sharciyeysan oo Ohio sawirna leh
- LIISAN DAREEWAL - Gobol kasta, dhul dawlad ku tirsan ama Mareykanku iska leeyahay, liisanka oo sawir leh, xaadir ah ama aan dhacsanayn muddo aan ka badnayn lix bilood
- AQOONISGA CIIDAN -Dukumenti aqoonsi sharciyeysan oo ah adeegga ciidamada Mareykanka ama qof ku-tiirsane ah oo sawirna leh
- KAARKA AQOONSIGA SIIDEYNTA DAMBIILAYAASHA- Sharciyeysan oo ay soo saartay Waaxda Dhaqan-Celinta iyo Asluubta Ohio ama DYS Waaxada Adeegyada Dhallinyarada; oo leh sawirka, magaca, taariikh dhalasho iyo lambarka sooshal sekuuritiga ee qofka
- KAAR AQOONSI GOBOL U BIXIYAY - Gobol kasta, dhul dawlad ka tirsan ama Mareykanku iska leeyahay u bixiyay, aqoonsiga oo sawir leh, xaadir ah ama aan dhacsanayn muddo aan ka badnayn lix bilood.
- FASAXYADA BARASHADA WADITAANKA GOBOLKU BIXIYO – Gobol kasta, dhul dawalad ku tirsan ama Mareykanku iska leeyahay u bixiyay, fasaxa oo oo sawir leh, xaadir ah ama aan dhacsanayn muddo aan ka badannayn lix bilood
- DUKUMENTIYADA ADEEGYADA MUWAADDINMADA MAREYKANKA IYO IMIGREESHINKA (USCIS) - Waa inay yihiin asal iyo sharci, ama yihiin dukumentiyo ay soo saartay hay'adda dhaxasha USCIS
- BAASABORT SHARCI AH - Baasabort sharciyeysan ama Kaar Baasabort MAREYKAN (U.S.) oo leh sawir ama baasabort sawir leh oo waddan kale ah oo ay la socdaan dukumentiyada habboon ee USCIS
- Dukumenti kasta oo kale oo dhab ah oo la isku hallayn karo uuna ansixiyay diiwaan-galiyaha BMV (ma aha diiwaan-galiye ku xigeenka)
  FIIRO GAAR AH: Dukumentiyo dheerad ayaa dhici karta in loo baahdo haddii dukumentiyada la dhiibay mugdi galaan. Waa in lagala xiriiraa Diiwaan-Galiye Ku Xigeenka Xafiiska Caawinta Maamulka Liisanka BMV si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

DUKUMENTIYADA LABAAD EE LA AQBALI KARO

(Waa inuu lahaadaa lambarka Sooshiyal Sikiyuuritiga (SSN) haddii uuna ku qoranyn dukumentiga hore)

- KAARKA ARRIMAHA HINDIDA MAREYKANKA ama KAARKA HESHIISKA HINDIDA MAREYKANKA- Kaarka Aqoonsi Qolo lama aqbalayo
- NUQUL AMAR MAXKAMAD OO SHARCIYEYSAN – Taariikhda dhalashada leh ama aan lahayn
- KAARKA DEYNTA
- KAARKA AQOONSIGA SHAQADA - Oo sawir leh
- SHAHAADO DHALASHO DAL-SHISHEEYE - Waa inuu la socdaa turjumaad u sameeyay tarjume la ansixiyay haddii shahaadudu ayna Ingiriisi ku qornayn
- FASAX QORI (BASTOOLAD IWM.) - Oo sawir leh
- KAAR CAYMIS CAAFIMAAD – Xaadirkan ah oo sharciyeysan
- ADEEGGA DAKHLIGA CASHUURTA AMA FOOMKA CASHUURTA GOBOLKA - Oo ay soo-saartay wakaalad dawladeed oo arrinta ku habboon gudahooda 3 sano oo soo dhaaftay. Foomamka W-2 lama aqbalayo
- SHAHAADADA GUURKA (NIKAAXA) – Ama liisanka guurka
- DIIWAANNADA CAAFIMAADKA – Ka socda dhakhtar ama isbitaal
- WARAAQAHA RUQSEYNTA CIIDAMADA – Waraaqaha sii-deynta
- LAHAANSHAHA GAADHIGA – Diiwaangelinta gaadhiga lama ogola
- LIISAN BAYLOOT (PILOT)

BMV 2425 5/10 Bogga 1 ee 2

- KAARKA WAXTARKA CAAWIMADA DAWLADDA –i istaambiyada oo ay bixisay hay'ad dawladeed
- DIIWAANKA DUGSI AMA WARAAQ NATIIJOYINKA CASHARDA TUSAYA (TRANSCRIPT) - Waa inuu noqdaa nuqul sharciyeysan
- DUKUMENTIYADA SOOSAL SEKURITIGA (HAQAB–BEELKA BULSHADA) –Kaar sooshal sekuuriti rasmi ah ama lambarka aqoonsiga (numident) oo ah daabac maamulka sooshal sekuuritigu soo saartay, kaarka birta ahna lama aqbalayo
- KAARKA AQOONSIGA ARDAYGA – Sawir leh oo u soo saaray dugsi ama jaamacad la aqoonsan yahay
- KAARKA ISDIIWAANGALINTA CODBIXIYAHA
- Dukumenti kasta oo kale oo dhab ah oo la isku hallayn karo uuna ansixiyay diiwaan-galiyaha BMV (ma aha diiwaan-galiye ku xigeenka)
  FIIRO GAAR AH: Dukumentiyo dheerad ayaa dhici karta in loo baahdo haddii dukumentiyada la dhiibay mugdi galaan. Waa in lagala xiriiraa Diiwaan-Galiye Ku Xigeenka Xafiiska Caawinta Maamulka Liisanka BMV si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

CADDAYNTA MUWAADDINIMO MARAYKAN AMA JOOGITAAN SHARCI AH

- SHAHAADO DHALASHO - Waa inay noqotaa asal ama koobi la soo caddayey, oo shaabbad leh, ayna soo saartay wakaalad dowlo oo arrinta ku habboon oo ka tirsan gobol kasta, dhul dawaladda ka tirsan, ama Mareykanku iska leeyahay
- BAASABORT MAREYKAN
- BAASABORT MAREYKAN OO KAAR AH.
- DUKUMENTI MUWAADDIN NOQOSHO – oo ay soo saartay dawladda Mareykanku
- Dukumentiyada Adeegyada Muwaaddinmada Mareykanka iyo Imigreeshinka (USCIS) oo habboon oo ah asal iyo sharci, ama ah dukumentiyada ay soo saarto hay'adda dhaxasha USCIS oo muujinaya taariikhaha joogitaanka sharciga ah

CADDAYNTA DEGGENAANSHAHA OHIO

Haddii dukumentiyada kowaad iyo kuwa labaad ee la dhiibay ayna xaqiijin codsadaha cinwaankiisa waddada xaadirka ah ee degganaasho Ohio, codsadaha ayaa ku xaqiijin doona dukumentiyo dheeraad ah oo wata magaca codsadaha iyo cinwaankiisa waddada xaadirka ah sidii loo xaqiijin lahaa cinwaankaas oo u qanciyo diiwaangaliyaha ama diiwaangaliye-ku-xigaha. Sanduuq xafiis boosto ama cinwaan sanduuq waraaqaha lagu dirsado oo kale lama aqbalyo. Dukumentiyada soo socda ayaa la aqbali doonaa haddii u codsadaha cinwaankiisa waddada xaadirka ah ee degganaasho Ohio la soo raaciyo dukumentiga:

- Caddayn sharci ah oo deggenaansho guryaha xannaanada dadka (nursing home) ama gabaad guri-laawe oo ku yaal foomka Kelmado Deggenaansho Sharciyeysan (BMV 2336)
- Kaarka beddelasho cinwaan – Oo ay soo saartay Xafiiska Gaadhi Wadidda Ohio
- Akoonnada jeegga iyo keydiska iyo waraaqaha tafaasiisha bangiga onalaynka oo ah gudaheeda lixdanka maalmood ee soo dhaafay.
- Waraqda jeegga laga reebo ee taageerada ilmaha ee laga helo Waaxada Adeegyada Shaqada iyo Qoyska Ohio
- Nuqulka xereynta celinta cashuurta dakhliga federaalka ama Ohio oo aan ka badnayn siddeed iyo toban bilood, oo ay la socoto caddaynta xereynta
- Amar maxkamad tijaabo dambiile ah (probation), amar ah sii-deyn shuruudeed, ama amar siideyn waajib ah
- Xil-caymis agagagaare (premises liability) xaadir iyo sharci ah, heshiis caymis nololeed, heshiis AMA kaar xil-xaymis baabuur leh cinwaan.
- Markay noqoto ilmaha ku tiirsan codsadaha, BMV ayaa laga yabaa inay ka aqbasho waalidka ama mas'uulka ilmaha Kelmado Sharciyeysan oo Deggenaansho (form BMV 2336), iyada oo lagu saxeexo hortiisa sarkaal BMV
- Markay noqoto qofka reerka leh (is-qabaan qof kale), BMV ayaa laga yaabaa inay ka aqbasho seyga ama afada codsadaha Kelmado Sharciyeysan oo Deggenaansho (foomka BMV 2336) iyada oo lagu saxeeo hortiisa sarkaal BMV. Caddayn wadajirka guurka ayaa la rabaa
- Amaah lagu bixiyo hafto heshiis lala galey bangi ama hay'ad kale oo lacageed
- Tafaasilka kaaraka deynta ee shirkadaha waaweyn ama dukaammada tafaariqda ee waaweyn oo leh cinwaan waddada Ohio oo la bixiyay godahoodii 60ka maalmood ee soo dhaaftay
- Akoon deyn guri ama dhisme ama caddayn lahaansho guri
- Ogeysiis Dib-u-Cusbooneysiin Boosto-Ku-Soo-Dir Diiwaangalin Gaadhi BMV
- Xujad wax lahaansho Ohio ah
- Liisanka kalluumeysiga ama ugaarsiga qofka deggenaha Ohio ah, oo xaadir ah ama sannadkii hore ah
- Waraaqda ka reebanta jeegga shaqada (Paycheck stub) oo la soo saaray lixdii bilood ee la soo dhaafay
- Liisan (shati) xirfad-yaqaan oo ay soo saartay Hay'ad dawladeed Ohio
- Biilka cashuurta lagu soo dallaco milkiyadda ama risiidka
- Waraaqda laga reebo jeegga taakuleynta dawladda ama kaarka fuudh istaambiyada oo ay bixisay hay'ad dawladeed, ama waraaq wadata ciwaan waraaq hay'ad dawladeed, godaheedii 12kii bilood ee soo dhaaftay
- Cashuurta wax iibsiga ama liisanka meheradda
- Xogta diiwaanka dugsiga
- Kaarka qiritaanka diiwaan-galinta adeegga xulashada ciidamada
- Dukumenti Maamulka Haqab-beelka Beesha (Social Security Administration) oo leh cinwaan waddada Ohio
- Waraaqda Maamulka Amniga Gaadiidka (TSA)
- Biilasha isticmaalka guriga (laga bilaabo korantada, taleefanka, biyaha, bullaacadda, keebalka, saatalaytka, saliidda kuleyllinta, ama bixiye buroobeyn) oo la soo saaray lixdankii maalmood ee la soo dhaafay
- Fasaxa hubabka qarsoon ee sharciyeysan
- Kaarka isdiiwaangalinta codbixiyaha Ohio oo sharciyeysan
- Dukumenti kasta oo kale, dhabna ah oo la isku hallayn karo uuna ansixiyay diiwaan-galiyaha BMV (ma aha diiwaan-galiye ku xigeenka).
  FIIRO GAAR AH: Dukumentiyo dheerad ayaa dhici karta in loo baahdo haddii dukumentiyada la dhiibay mugdi galaan. Waa in lagala xiriiraa Diiwaan-Galiye Ku Xigeenka Xafiiska Caawinta Maamulka Liisanka BMV si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

Tilmaamaha Codsadayaasha Ruqsadda ugu Horeeya ee Darawalka

- oAkhri oo xafid dhammaan macluumaadka halkan ku qoran
- Booqo xarun imtixaan ruqsadda darawalnimo oo kasta oo ay leeyihiin Roonddada Waddooyinka Ohio (fiiri Lifaaqa A - XARUMAha Imtixaanka Ruqsadda Darawalnimo). Wax balan ah oo daruur ah o ka horeeya imtixaanka aqoonta dirawalka iyo baadhista aragu ma jirto, laakiin hubso inaad cadayso maalmaha iyo saacadaha shaqada ee xarun kasta.
- Si loo helo Kaarka Aqoonsiga Fasax Ku-Meelgaar Tababbar ee Ohio (TIPIC), ruqsadda waditaanka Ohio, CDL, kaarka aqoonsiga Ohio, ama liisanka moped-ka, qofka codsadahu waa inuu dhiibaa dukumentiyo xaqiijinaya dhammaantood waxyaabood ee soo socda: Magaca hore ee sharciga ah, magaca dhexe, magaca dambe ee xaadirkan jira, taariikh dhalasho, Lambarka Sooshal Sekuuritiga (haddii waligii qofka loo sameeyey)
- Fadlan ogsoonow in ka gaabinta dhiibitaanka dukumentiyada loo baahan yahay loo baahan yahay sida ku cad bogaga 3 iyo 4 ee qoraalkan in laguu diido karo kaadhkaaga aqoonsiga meel ku gaadhka ah ee aan rasmiga ahayn (TIPIC) marka warbixinta loo dirayo xafiiska ku xigeenka diwaangaliyaha.
- Marka aad joogto xarunta imtixaanka, waxaa la tijaabin doonaa indhahaaga bal inay buuxiniyaan shuruudaha ugu yar ee la sharcigu rabo. Haddii aad u baahan tahay muraayada indhaha si aad u buuxiso shuruudahan, liisankaaga waxaa laga yaabaa in lagu xadido wadista gaadhiga marka aad muraayadan xidhan tahay oo kaliya. Xaaladaha qaarkood, dadka aragoodu liito waxaa laga yaabaa inay xaq u yeeshaan helista liisan u oggolaanaya inay gaadhiga kaxeeyaan maalintii oo keliya.
- Codsigu wuxu ka koobnaan doonaa dhowr su'aalood oo ku sahabsan caafimaadkaaga oo la xidhiidha xaalad caafimaad oo kasta. Su'aalahan waan in loog jawaabaa si run ah oo dhamaystiran. Been ka sheegista codsigaagu waxay loo cuskan karaa inay tahay dambi keenaya kala noqosho liisan. Haddii

  aad qabto caafimaad xumo saamayn ku leh awoodaada wadida gaadhi, imtixaan qaadaha ayaa kuu sharaxi doona talaabooyinka aad u baahan tahay inaad qaado iyo foomamka caafimaadka ee lagama maarmaanka ah ee uu so buuxinayo dhakhtarkaagu.
- Waxaa laga yaabaa in imtixaan qaaduhu uu qaado sawirkaaga. Waa inaad ka gudubtaa imtixaanka aqoonta darawalka ee ku sahabsan xeerka gaadiidhka Ohio iyo calaamadaha taraafiga. Su'aaluhu waa kala doorasho waxaanay ku salaysan yihiin macluumaadka ku qoran halkan. Waa inaad boqolkiiba 75 su'aalaha si sax ah uga jawaabtaa.
- Kadib marka aad ku guulaysato imtixaanadaada araga iyo aqoonta, waxaad heli doontaa risiidh uu ku qoran yahay lambar xaqiijin ah oo aad geyso xafiiska ku xigeenka diwaangeliyaha si aad 60 maalmood gudahood ugu hesho kaadhka aqoonsiga ee ku meelgaadhka ah (TIPIC). Waa inaad keentaa dukumentiyo xaqiijinaya magaca hore ee sharciga ah, magaca dhexe, magaca dambe ee xaadirkan jira, taariikh dhalasho, Lambarka Sooshal Sekuuritiga (haddii waligii qofka loo sameeyey) muwaaddinimo Mareykan ama

joogitaanka sharci; iyo cinwaanka jidka deggenaansho oo Ohio ku yaal (Ka fiiri Liistada Dukomentiyada La Oggol Yahay, bogagga 3 iyo 4). Kadib marka la cadeeyo dokumentiyadaada iyo sawirkaaga, ku xigeenku wuxuu uga gudbi doonaa inuu kuu soo saaro kaadhka aqoonsiga ku meelgaadhka ah ee loo yaqaan TIPIC. Kaadhkan TIPIC waa in la haystaa mar walba oo aad marayso nidaamka liisanka. Haddii kaadhkani kaa lumo, fadlan booqo hay'adaada ku xigeenka diiwaangeliyaha oo iibso TIPIC kale oo kuu bedela kii hore.

- MUHIIM: Haddii aad ka yar tahay 18 jir, waa in codsigaaga uu kula soo saxeexaa waalid ama masuul sharci ah xiliga aad codsanayso. La saxeexuhu waa inoo sidoo kale keenaa laba foom oo dokumentiyada la aqbali karo ah oo cadaynaya aqoonsigaaga (Waxaad ka fiirisaa bogga 3aad iyo 4aad liiska dokumentiyada la aqbali karo). Waalid ama masuul waa inuu u soo raacaa codsade kasta oo da'diisu/teedu ka yar tahay 18 jir wakiilka ku xigeenka diiwaangeliyaha.
- Kaadhka loo yaqaan TIPIC wuxuu kuu oggolaanayaa inaad wadada marto si aad u barbarato- laakiin waa kaliy haddii uu kula socdo 21 jir ama ka wayn oo

  liisan haysta isla markaana fadhiya kursiga kugu xiga. Haddii aad ka yar tahay

  da'da 16 jirka, waa inaad kaxaysaa gaadhiga iyadoo waalid, masuul ama macalin darawalnimo oo shahaado haystaa fadhiyo kursiga kugu xiga.
- Kaadhkaaga ku meelgaadhka ah ee TIPIC wuxuu ku dhici doonaa mudo hal sano ah oo ka bilaabmaysa maalinta soo saarista. Sharciga Ohio wuxuu qof kasta oo wayn oo fadhiya kursi ku xiga qofka gaadhiga wada ka madnuucayaa inuu maandooriye ku jiro dhiigiisa, siiramta ama balaasmada, neefta ama kaadida. Haddii qofku ka yar yahay 18 jir, kaadhka TIPIC waa inuu

  haystaa ugu yaraan lix bilood ka hor inta aanad samayn tijaabada xirfadaada. Haddii u kaa dhaco Kaarkaaga Aqoonsiga Fasax Ku-Meelgaar Tababbar ee Ohio (TIPIC) kahor intaadan qaadan oo aadan ku gudbiin imtixaanka xirfadaha waa inaad ku soo noqotaa goobta imtixaanka liisanka darawalnimadaq oo aad dib u qaadataa oo aad ka gudubtaa imtixaanka araga iyo aqoonta.

  XANIBAADAHA:

  - Suunka badbaadadu waa inuu diyaar u yahay dhammaan rakaabka qof kastaana waa inuu xidhaa dhammaan xajiyayaasha
  - Dirawalada liisanka haysta ee 16 jirka ahi waxaa laga yaabaa in aanay gaadhi ku kaxayn karin wax aan ka badan qof aan qoyska ka tirsanayn.
  - Haddii aad haysato TIPIC oo aad ka yar tahay 18 ji, waxaa laga yaabaa inaadan kaxayn inta u dhaxaysa habeen badhka iyo 6:00 subaxnimo haddii aanu la socon waalid, masuul ama ilaaliye sita liisan ansax ah.
  - Haddii aad sidato liisan oo aad tahay 16 jir, waxaa laga yaabaa inaad gaadhi kaxayn inta u dhaxaysa habeen badhka iyo 6:00 subaxnimo haddii

aanu kula socon waalid ama masuul kale, marka laga reebo xaaladahan soo socda: qofka liisanka haystaa wuxuu ku socdaa ama ka yimid hawl dugsi, xaalad degdeg ah, ama aanu ku socon ama ka iman shaqo uu u sito qoraal cadayn ah.

- Haddii aad liisan haysato oo aad 17 jir tahay, waxaa laga yaabaa inaadan gaadhiga kaxayn inta u dhaxaysa 1:00 subaxnimo iyo 5:00 subaxnimo haddii aanu kula socon waalid ama masuul kale, marka laga reebo xaaladahan soo socda: qofka liisanka haystaa wuxuu ku socdaa ama ka yimid hawl dugsi, xaalad degdeg ah, ama aanu ku socon ama ka iman shaqo uu u sito qoraal cadayn ah
- Haddii qof liisan haysta oo ka yar 16 jir uu qirto dambi, lagu helo dambi, ama maxkamada caruurtu ku xukunto samayn meel ka dhac dhaqaajin lixda bilood ee u horeeya ee ay qaateen liisanka, darawalka waa inuu la socdaa waalid ama masuul kale mar kasta oo uu kaxaynayo gaadhi mudo lix bilood ah ama ilaa qofka liisanka haystaa noqonayo jir, haddii aan maxkamada caruurtu aanay ku soo rogin xanibaadahan qofka liisanka sita.
- Marka aad horumariso xirfadaada wadista, la xidhiidh goob kasta oo imtixaan si aad jadwal ugu samaysato imtixaanka xirfada. Haddii aanad awoodin inad balanta ilaaliso, goobt imtixaanka ku ogaysii sida ugu dhakhsaha badan si qof kale loola balamo. Dhammaan macaamiisha qaadanaysa imtixaanka xirfada waa inay fahmaan tilmaamaha lagu bixinayo luuqada Ingiriisiga.
- Marka aad tagto goobta imtixaanka si aad u qaadato imtixaanka tijaabada, waa inaad la timaad kaadhkaaga TIPIC ee ansaxa ah. Macaamiisha da'doodu ka yar tahay 18 jir waa inay sidoo kale keenaan shahaadada waxbarashada dirawalnimda (Ka fiiri cutubkan "Shuruudaha Waxbarashada Dirawalnimada") 50 saacadood ee dhaarta nootaayada. Waa inaad keentaa gaadhiga wadada lagugu imtixaamo wadada oo xaaladiisu fiican tahay.
  Kahor intaan imtixaanka lagaa qaadin, imtixaan qaadaha ayaa fiirin doonaa baabuurkaaga. Haddi gaadhigu ka gudbiyo baadhista (fiiri "Halbeega Baadhista" Cutubka 5 aad), imtixaan qaaduhu wuu diidi karaa inuu qaado imtixaanka. Inta lagu gudo jiro qaybta wadista, imtixaan qaaduhu wuxuu ku waydiisan doonaa inaad qabato dhowr hawlood oo gaadhi wadista ah. Waxaa hawlahan ka mid noqon kara joojinta iyo istaadhka, leexinta, dib u bixida, midig iyo bidix u leexinta, samaynta signalo gacanta ah ama isticmaalka signalada leexinta, marista haadka saxda ah, iyo ka dambaynta gaadhiga kaa horeeya ee haboon. Ujeeddada imtixaanka xirfadu waa in go'aan laga gaadho bal inaad si fiican u yeelatay awoodii loo baahnaa ee u kaxaynta gaadhiga si haboon. Si aad u balansato imtixaan wado, waxaad booqaataa www.ohiodrivingtest.com
- Imtixaanka xirfadu wuxuu ka kooban yahay laba qaybood: kaxaynta iyo dhaqaaqa. Inta lagu gudo jiro imtixaanka, waa inaad adkaysataa suunkaaga gaadhiga oo aad ku wadaa labadaada gacmoodba si aad si buuxdo ugu kaantaroosho shookaanta.

- Imtixaanka dhaqaajintu waxaa loo qaadayaa laba talaabo. Talaabo kasta waa in loo dhamaystiraa si socod is daba joog ah. Tilmaanta kaliya ee imtixaan qaaduhu ku siinayaa waa inaad u leexato bidixda ama midigta falaadha tilmaanta.

  TALAABADA KOOWAD : waa inaad hore u dhexmarisaa sanduuq (9 fuudh baay 20 fuudh ah) oo lagu sameeyay afar calaamadood.

  Ogow : dhammaan cabirka waxaa laga soo qaadayaa badhtanka toobinta. U leexo midigta ama bidixda falaadha calaamada (20 fuudh ka horee sanduuqa dabcan ee dabcan badhtanka) sida uu tilmaamayo imtixaan qaaduhu. Hore tooska u soco oo joogso meesha raarka gaadhigaagu uu la siman yahay falaadha calaamada ee guud ahaana u barbar yaal wadada. (fiiri khariidada)

  TALAABADA LABAAD:. Laga soo bilaabo halka aad joogsatay ee dhamaadka TALAABADA KOOWAAD, waa inaad awoodaa inaad dib u dhaafto falaadha calaamada. Toosi gaadhigaaga oo dib uga bax sanduuqa oo ku joogso bambarka hore ee gaadhigaaga ee la siman labada calaamadood ee raarka ee guud ahaan barbar taal wadada. Inta aad ku gudo jirto talaabadan, haddii aad joojiso gaadhigaaga calaamada aad jiidhay darteed, waa inaad ku noqotaa bilowgii oo aad bilowdaa talaabada labaad. Ka hor intaa aanu dhammaan imtixaanku, gaadhigaaaga waa in laga saaraa goobta imtixaanka adiga oo aan jiidhayn calaamad ama aan samaynayn ficil kale oo halis badan
- Marka aad si guul leh u dhammayso tijaabada imtixaankaaga, waxaa laga yaabaa in imtixaan qaadahaagu u ku siiyo risiidh cadaynaya dhamaystirkaaga imtixaanka xirfada.
- Laguuma oggola inaad kaxayso gaadhi iyadoo aanu dirawal liisan haystaa agtaada fadhiyin. Liisanka Wadaha ee Ohio waa in la helaa ka taariikhda uu dhacayo kaadhka ku meelgaadhka ah ee loo yaqaan TIPIC.
- Waa inaad u gudubtaa Ku xigeenka Diiwaangeliyaha oo aad u dhiibtaa TIPIC. Waxaa sidoo kale lagaaga baahan doonaa inaad keento dokumentiyo la aqbali karo(Waxaad ka fiirisaa boga 2aad iyo 3aad liiska dokumentiyada la aqbali karo), oo bixi dhammaan lacagaha waajibka ah (si aad u ogaato ajuurada xaadirkan la qaado, booqo www.ohiobmv.com).



- Codsadayaasha ka yar 18 jir waa inuu la socdaa waalid ama masuul sharci ah oo la saxeexa, kaas oo sidoo kale keena laba foom oo dokumentiyo cadaynaya aqoonsiga, (Waxaad ka fiirisaa boga 2aad iyo 3aad liiska dokumentiyada la aqbali karo).

DHIBCO HELISTA

- Joogsiga lagu hubsanayo horumarka
- Calaamadiyayaasha jugaynta
- Garan waaga fogaanta joogsiga
- La gudboonaan la'aanta goobta imtixaanka
- Fashilka degdega ah = dul marista ama jiidhista calaamad, ka kaxaynta calaamad meeshii loogu talo galay ama fal kale oo halis ah.

OGOW: Waalidka ama masuulka la saxeexa ilmaha codsiga liisanka waxay si wadajir ah uga masuul yahay waxyeelo kasta oo dayac keenay ama wax xun samayn marka la wado gaadhiga ilaa ilmuhu ka gudbayo sanadguuradiisa 18 jirka. Haddii ilmuhu galo shil ku dhac baabuur, masuuliyada la saxeexaha waxaa meesha laga saari karaa haddii la iyadoo la metelayo ilmaha Xafiiska Gadiidka laga faylgareeyo faylgareeyo cadayn masuuliyada maaliyadeed (fiiri "Masuuliyada Maaliyadeed," cutubka 6).

Shuruuda Waxbarashada Wadaha

Haddii aad codsanayso ruqsad darawalnimo maalinta dhalashadaada 18 jirka wax aka horreeya, waa inaad heshaa waxbarasho darawalnimo ganacsi ama dugsi sare oo ka kooban 24 saacadood oo ah waxbarasho fasal iyo siddeed saacadood oo barasho waditaan ah. Sidoo kale waa inaad keentaa dhaarta nootaayada uu saxeexay waalid ama masuul taas oo cadaynaysa dhamaystirkaaga 50 saacadood ee waayo aragnimadaad ka hor inta aanad qaadan imtixaanka xirfadaha. Ugu yaraan 10 ka mid ah saacadahani waa inay ahaadaan habeenimo. Shahaadada aqoonta dirawalka waa in la keenaa marka la qaadanayo imtixaanka xirfada. Si aad u hesho liiska imika ee dugsiyada tabobarka, fiiri www.drivertraining.ohio.gov kadibna guji " dugsiyada la ansixiyey". Si aad u balansato tijaabo wado, booqo www.ohiodrivingtest.com.

Ku guul daraysashada ka Gudbidda Imtixaanka

Haddii aad ku guul daraysato imtixaanka aqoonta, waa inaad sugtaa ugu yaraan 24 saacadood ka hor inta aanad dib u qaadan imtixaanka.

Marka aad qaadanayso imtixaanka xirfadaha, had iyo goor waxaad qaadan doontaa imtixaanka dhaqaajinta marka hore. Marka aad si guul leh u dhamayso imtixaanka dhaqaajinta, waxaa lagaa qaadi doonaa imtixaanka wadista ee wadada. Haddii aad ku guulaysato mid ka mid ah labada imtixaan, waa inaad sugtaa ugu yaraan todoba maalmood ka hor inta aan dib laguu imtixaamin. Kaliya qaybta aad ku dhacday ayaa lagugu celinayaa. Haddii aad afar goor ku dhacdo imtixaanka xirfadaha, waa inaad lix bilood sugtaa ka hor inta aan dib lagaaga qaadin.

Imtixaanka Afka Qalaad/Imtixaanka Afka/ Imtixaanka Maqalka Dhantaalan

Macaamiishu waxaa laga yaabaa inay aqoonta ku qaataan Isbaanish, Carabi, Shiine, Ruush, Faransiis, Soomaali, Soomaali iyo Jabaaniis. Si aad u gudubto; si kastaba ha ahaatee, dhammaan macaamiishu waa inay awoodaan inay tilmaamaha ku fahmaan oo ay calaamadaha taraafiga ku akhriyaan luuqada Ingiriisiga. Macluumaadka ku sahabsan sida loo qaadanayo imtixaanka aqoonta ee af walba, la xidhiidh goob kasta oo lagu qaado imtixaan liisan.

Sida uu imtixaan qaaduhu daruuri u arko, kuwa aan si fiican wax u qori karin ama u akhriyi karin oo aan mari karin imtixaank aqoonta waxaa laga yaabaa in loo oggolaado in imtixaanka ku maraan dhagaysi Ingiriisi ah. Dhammaan codsadayaashani waa inay ugu yaraan awoodaan inay akhriyaan oo fahmaan calaamadaha taraafiga.

Kuwa maqalkoodu dhantaalan yahay ee aan waxba akhriyi karin ama qori karin oo aan mari karin imtixaanka aqoonta waxaa laga yaabaa in lagaga qaado turjumaan ama fiidiyoow.

Liisan Darawal oo aan la Cusboonaysiin Karin/ La Beddeli Kairn

Dadka degaanka ku meelgaadhka ku ah ee ah ajaanib Ohio u degan si ku meelgaadh ah waxaa laga yaabaa inay helaan liisan darawal aan la cusboonaysiin karin/la bedeli karin, oo aan dhaafayn afar sano, kaas oo dhacaya taariikhda lagu qoray dokumentiga haboon ee ay soo saareen Xafiiska Muwaaddinimada iyo Adeega Muhaajirnimada. Liisan darawal aan la cusboonaysiin karin/la bedeli karin wuxuu u oggolaanayaa ashkhaasta in ay gaadhi ku kaxaysan karaan Ohio iyo gobolada kale. Ereyada " cusboonaysiin karo/ lama bedeli karo" ayaa ka muuqan doona kaadhka liisanka darawalka ee saxeexa dushiisa.

Muwaadiniinta aan u dhalan U.S ee codsanaya kaadhka TIPIC waa inay raacaan tilmaamaha boga 4aad ee qoraalkan. Kadib marka aad si guul leh uga gudubto imtixaankaaga aqoonta iyo araga, booqo xafiiska ku xigeenka diiwaangeliyaha oo ah meesha laga bixiyo liisanada (oo ku qoran hoosta Adeegga Ruqsadda ee Bogagga Huruudda ah ama halkan www.bmv.ohio.gov/county_lst.stm). Waa inaad keentaa risiidhka oo ay la socdaan dokumentiyadani:

1. Baasaaboor ansax ah oo aan dhicin
2. Fiise Maraykan ah (U.S)
3. Foomka I-94 ee ay soo saartay Hay'ada Jinsiyada iyo Socdaalka ee Maraykana loona yaqaan (USCIS)
4. Iyo MID ka mid ah kuwan soo socda:

- Foomka USCIS ee I-20, Arday ama Arday ku tiirsane; ama
- Foomka USCIS ee IAP-66 ama DS2019, Soo booqde; ama
- USCIS, Cadaynta Shaqaalenimada ee USCIS (oo aan dhicin wax ka badan 60 maalmood;)ama
- Dokumenti kasta oo kale oo ay soo saartay BCIS oo uu ansixiyey Xafiiska Gaadiidku.

Waxaa lagaaga baahan doonaa inaad keento dokumentiyo aan dhicin oo cadaynaya sharcinimada joogistaada Maraykanka waqtiga cusboonaysiinta ama liisan kale oo kasta oo aad codsatay intii aad joogtay. Xeerkani wuxuu sidoo kale qabanayaa dadka da'doodu ka hoosayso 21 jir.

Ayaan Heli Karin Liisan Darawalnimo

Sida ku qoran xeerka Ohio, liisan darawal ama kaadhka ku meelgaadhka ah ee TIPIC looma samayn karo qof:

1. Aragtida Diiwaangeliyaha la il daran curyaanimo maskaxeed ama jidheed ama xanuun u diidaya qofka inuu fuliyo kontorool macquul ah oo la kaantarooli karo baabur saran jidka weyn. (Faahfaahinta qodobkan, hoos ka fiiri "Liisanka Xaniban".)
2. Aan awoodi karin inuu af Ingiriisi ku fahmo calaamadaha iyo tilmaamaha.
3. Sakhraan ah ama qabatimay isticmaalka daroogada ama maadooyinka la kaantaroolo ilaa heer isticmaalkoodu waxyeelay awooda kaxaynta gaadhiga.
4. La xukumay inu maskixiyan u xanuusanayo ama karti daran oo aan dikreeto sharci loogu soo celin kartida.
5. Uu qabo ama qabay xaalad kasta sida (suuxdin) ka timid waxyeelo garashada ah ama halaw kantaroolka muruqyada haddii aan dhakhtar aqoon u lihi caddayn in xaalada noocan ah lagu xukumi karo daawayn ama la saamixi karo. (Faahfaahinta qodobkan, hoos ka fiiri "Liisanka Xaniban".)
6. Uu ku jiro laalis ama kala noqosho ay ku samaysay Ohio ama meel kale
7. Aan ahayn muwaadin Maraykan ah (ay keentay joogitaan sifo sharci oo aan lahayn waraaqo sharci.)

Liisanka Xaniban

Qof kasta oo ku jira waajibaad, iyo lix bilood kadib ka bixista waajibaadka, xubin kasta oo ka tirsan Xoogaga Hubaysan ee Maraykanka, Booliiska Nabadda ama V.I.S.T.A, wuu ka reeban yahay shuraadaha dirawalnimada ee Ohio- waa haddii ruuxu sito liisan darawalnimo Ohio oo ansaxa ah markii isagu ama iyadu ay galaysay shaqada milatariga.

Qof kasta oo reer Ohio ah oo ku soo noqonaya Ohio kadib markii laga soo saaray milatariga, Booliiska Nabada, ama V.I.S.T.A. (oo aan qabin curyaanimo jidheed iyo mid maskaxeed oo saamaynaysa darawalnimadiisa) ayaa laga yaabaa inuu cusboonaysiisto liisankiisa ama liisankeed baabuurka dhacay iyadoo aanu/aanay marayn imtixaan, waa haddii : (a) qofkau haystay liisanka darawalnimada Ohio markii u galayay milatariga; iyo (b) codsiga cusboonaysiinta la soo gudbiyey lix bilood kadib ka bixistii. Qodobadani sidoo kale waxay khuseeyaan xaasaska iyo caruurta milatariga.

Shaqaalaha Ciidanka

Qof kasta oo ku jira waajibaad, iyo lix bilood kadib ka bixista waajibaadka, xubin kasta oo ka tirsan Xoogaga Hubaysan ee Maraykanka, Booliiska Nabadda ama V.I.S.T.A, wuu ka reeban yahay shuraadaha dirawalnimada ee Ohio- waa haddii ruuxu sito liisan darawalnimo Ohio oo ansaxa ah markii isagu ama iyadu ay galaysay shaqada milatariga.

Qof kasta oo reer Ohio ah oo ku soo noqonaya Ohio kadib markii laga soo saaray milatariga, Booliiska Nabada, ama V.I.S.T.A. (oo aan qabin curyaanimo jidheed iyo mid maskaxeed oo saamaynaysa darawalnimadiisa) ayaa laga yaabaa inuu cusboonaysiisto liisankiisa ama liisankeed baabuurka dhacay iyadoo aanu/aanay marayn imtixaan, waa haddii : (a) qofkau haystay liisanka darawalnimada Ohio markii u galayay milatariga; iyo (b) codsiga cusboonaysiinta la soo gudbiyey lix bilood kadib ka bixistii. Qodobadani sidoo kale waxay khuseeyaan xaasaska iyo caruurta milatariga.

Wadayaasha Gadiidka Beerta

Sida ku cad xeerka Ohio, qofna lagama rabo inuu liisan u qaato wadista waddo salaxe, mishiin kale oo wado, cagaf beereed ama qalab beereed ee laga soo walanwaalay wado. Qof kasta oo kaxeeya gaadhi rakaab ama baabuur wayn oo u diiwaangashan gaadiid beer waxaa laga rabaa inuu haysto liisan ansax ah.

DIB U CUSBOONAYSIINTA LIISANKAAGA

Adigoo hela liisan caafimaad ahaan u xaniban oo muddo gaaban ah mooyaane, liisankaaga darawalnimada Ohio wuxuu ku dhici doonaa dhalashada afraad ee kadib markii lagu sameeyay. Haddii la cusboonayso 90 maalmood ka hor dhicista, wuxuu dhici doonaa saddex sano kadib soo saaristiisa. Haddii liisanka lagu siiyey ka hor sanadguuradii dhalashada ee 21 aad, liisankaagu wuxuu dhici doonaa sanadguurada dhalashada 21aad. Haddii aad ka yar tahay 21, xaq uma lihid dib u cusboonaysiin haddii aanad 30 maalmood ka soo wareegin 21 jirkaagii. Waa masuuliyadaada inaad ogaato goorta uu dhacayo liisankaagu. Taariikhda dhicista waxay wajiga ka qoran tahay liisan kasta. Si aad u hesho dib u cusboonaysiin:

1. Waxaad tagtaa goobta xarun liisan ee kuugu dhow xili walba ka hor inta aanu liisankaagu dhicin. Waxaad u baahan doontaa inaad keento liisankaaga darawalnimada Ohio iyo dokumenti kasta oo kale oo dheeraad ah haddii lagaa codsado (Ka fiiri Liistada Dukumentiyada La Aqbali Karo, bogga 2 iyo 3). Haddii aad cusboonaysiiso 90 maalmood ka hor taariikhda dhicista, waa inaad cusboonaysiisaa mar kale sadex sano sadex sano gudahood halkii ay ka ahaan lahayd afar sano.
2. Haddii aad xaq u leedahay inaad cusboonaysiiso oo aad si fiican u dhamaystirto baadhista aragtida, ku xigeenka diiwaangeliyaha ayaa casriyeyn doona macluumaadkaaga liisanka, qaban doona kharashka (si aad u ogaato ajuurada xaadirkan la qaado, booqo www.ohiobmv.com), kaa qaadi sawirkaaga, oo ku siin ruqsad cusub oo afar-sanno ah isla markiiba.

OGOW: Ma jiro " waqti dheeri ah" oo dib loogu cusboonaysiinayo liisanka. Haddii aad sii wadato isticmaalka liisankaaga kadib marka uu dhaco, waxaad halis u tahay taraafig. Haddii aad ku fashilanto inaad muddo 45 maalmood ah dib ugu cusboonaysiisato, Xafiiska Gaadiidka ayaa ciwaankaagii u dambeey ku soo diri doona ogeysiis dhicis. Iyada oo aan la eegin ogaysiiskan, waxaad wali istaahisahaa dacwad maxkamadeed oo ku sahabsan isticmaalka liisan dhacay. Haddii aad ku guulaysato inaad lix bilood ku cusboonaysiisato, dib dambe dib u cusboonaysiin u heli maysid. Si aad u hesho liisan cusub, Waxaad bixin doontaa ujro ganaax ah (si aad u ogaato ajuurada xaadirkan la qaado, booqo www.ohiobmv.com) waana inaad dhamaystirtaa dhammaan imitaxaanka liisanka darawalnimada.

RUQSAD ISKU MIDKA AH

Haddii liisankaaga darawalnimadu halaabo, la xado ama la jeexjeexo, waxaad liisan la mid ah ka helaysaa ku xigeenka hay'ada diiwaangaliyaha iyo taariikhda dhalashada. Waxaad u baahan doontaa caddaynta aqoonsigaaga adiga oo dhiiba dukumenti la aqbali karo (Ka fiiri Liistada Dukumentiyada La Aqbali Karo, bogga 3 iyo 4.) Haddii diiwaangeliyuhu aqoonsigaaga ka cadeeyo Xogta Xafiiska Gaadiidka, waxaa laguu samayn doonaa liisankaaga cusub.

Ujro ayaa la isku dallacaa in la helo ruqso beddel ah, oo dhacaysa taariikhda dhicitaanka ee ruqsadaadii hore. (Si aad u ogaato ajuurada xaadirkan la qaado, booqo www.ohiobmv.com).

DADKA HAYSTA RUQSAD BAABUUR WADDAN KALE

Gadiidleyda degan wadan kale ee ah dalxiisayaal soo booqday Maraykanka waxaa laga yaabaa inay hal sano ku wataan lambar gaadhiga wadankooda (balayt lambarka) iyo liisanka waddankooda. (Gadiidleyda Maraykanu sidaas oo kale ayay ugu wadan karaan wadamada kale.) . Xuquuqahan is leh waxaa suurtogaliyey Heshiiskii Qaramada Midoobay ee Taraafiga Wadooyinka (Geneva 1949). Haddii magaca wadanka gaadiidkaha qalaad la garan waayo, dalxiisuhu waa inuu iibsadaa balayt gaadhi oo markuu yimaad Maraykan qaataa liisanka darawalniamda.

Soo booqde kasta oo ka yimid wadan saxeexay heshiiska waa inuu sidoo kale qaataa Oggolaanshaha Darawalnimada Caalamiga ah, laakiin tani khasab maaha. Oggolaanshahani, oo lagu qoray afafka rasmiga ah ee Qaramada Midoobay, wuxuu waxtar leeyahay marka booliiska maxaliga ahi ay ku hadlaan hal luuqad ee ay muhiim tahay marka xaaladaha degdega ah. Xataa Oggolaanshaha Dirwalnimada Caalamiga ah, waa in gaadiidleydu haysataa liisan ansax ah oo waddankooda ah

Haddii aad sidato liisan darawalnimo wadan kale oo aad jeceshahay inaad ku beddelato liisanka darawalnimada Ohio, waa inaa gashaa oo aad ka gudubtaa dhammaan imtixaanada la rabo (araga, aqoonta, wadista iyo dhaqaajinta).

Haddii dalkaagu uuna la lahayn Maraykanka mudnaanaha isweydaarisga, waa inaad booqataa xarun Imtixaanka Ruqsadda Darawalnimo (fiiri Lifaaqa A - xarumaha Imtixaanka Ruqsadda Darawalnimo).

XEERKA ISTICMAALKA RUQSADA

1. Ku guul daraysi tusida liisanka- qofku wuu inuu tusaa liisan darawalnimo ama uu keenaa cadayn inuu haysto liisan marka booliisku ugu baahdo ama qof ku waxyeeloobo isku dhac
2. Tuugo - Qofna maaha inuu keeno ama haysto liisan darawalnimod isagoo og in liisanku been abuur yahay ama la kansalgareeyay, lala noqday, la laalay ama la beddelay.
3. Qofna kuma isticmaali karo magac ama cinwaan been ah codsiga ruqsada.
4. Ergiso liisan - Ma jirayo dirawal liisan haysta oo ergisaya liisankiisa ama qaadanayan liisan qof kale.
5. Ku guul daraysiga dhiibista liisanka - Qofna waa in aanu ku fashilmin u dhiibista Diiwaangeliyaha Gaadiidka, marka uu dalbado , liisan ama kaadhka TIPIC kaas oo la laalay, la kansalgareeyay, ama lala noqday.
6. Qofna waa in aanu oggolaan ama si badheedh ah u fasixin in gaadhi isagu ama iyadu leedahay ama uu masuul ka yahay ama ka tahay uu kaxeeyo qof aan sharciyan fasax u haysan inuu kaxeeyo.
7. Qofna waa in aanu sababin ama si badheedh ah ugu oggolaan qof kasta inuu kaxeeyo gaadhi kaadhka TIPIC la'aantii ama liisan darawalnimo la'aantii.
8. Qofna waa in aanu oggolaan in liisankiisa ama liisankeeda uu isticmaalo qof kale oo ka yar da'da sharciga inuu ku iibsado maandooriye

MACLUUMAADKA XUBIN DEEQ-BIXIYAHA

Sharciga Ohio wuxuu suurtogal uuga dhigayaa dhammaan dirwalada inay deeqaan xubnahooda jidhka. Ku xigeenka diiwaangeliyaha ayaa marka aad codsanayso ku waydiin doona haddii aad danaynayso inaad deeqdo xubnaha jidhkaaga marka aad dhimato. Haddii aad ku raacdo inaad sidaa yeelaysid, calaamada xubin deeq-bixiyaha ayaa lagu samayn doonaa xagga hore ee liisankaaga. Xafiiska Gaadiidka ayaa sameeyay diiwaan xubin deeqbixiyayaasha ah kaas oo aqoonsanaya qof walba oo oggolaaday inuu jidhkiisa hadyad u bixiyo taa oo ku suntan liisanka darawalnimda ganacsiga, ama liisanka baaskiilka. Xafiisku wuxuu 24-ka saac, todobada maalmood ee usbucii hayaa diwaanka. Xaalada deeq-bixiyaha waa in la cusboonaysiiyaa mar kasta oo la cusboonaysiinayo liisanka waxaana dhici karta inaad iska badasho deeq-bixiye oo aad isku bedesho deeq-ma-bixiye. Kuwa da'doodu ka yar tahay 18 jir waxay sidoo kale deeqi karaan xubnahooda. Booqo ku xigeenkaaga diiwaangaliyahaaga wixii macluumaad ah ee dheeraad ah ama la xidhiidh hay'adaada qaadista xubnaha ee deegaankaaga (Fiiri Lifaaqa B - Macluumaadka Xubin Deeqbixiyaha). Waxaa soo raaca, ku xigeenka wuxuu sidoo kale ku waydiin doonaa haddii aad jeclaan lahayd inaad $1.00 ku deeqdo kor u qaadista ku-deeqista xubnaha iyo indhaha. Waxaa sidoo kale laga yaabaa inaad ku biirto diiwaanka adigoo sii maraya boga internetka ee BMW. Sharcigan oo la yidhaa "Sanduuqa Fursada Labaad", wuxuu dhaqan galay 1997 waxaana maamula Waaxda caafimaadka ee Ohio.

DHAXALREEB QOF NOOL

Marka aad codsato liisan ama kaadhka aqoonsiga, sharciga Ohio wuxuu ku siinayaa fursada aad ku cadayn lahayd inaad fulisay awood gorsoore ee daryeel caafimaad ama aad fulisay cadayn ku sahabsan isticmaalka qalabka nolosha taageera ama daawayn. Haddii aad fulisay baaqyadan, waxaa laga yaabaa inaad doorato sidaaa iyadoo calaamada la isla yaqaan laguugu samaynayo liisankaaga ama aqoonsigaaga.

GAADHI LAHAANSHAHA

Ganacsadaha baabuurta Ohio waxaa laga rabaa inuu keeno lahaanshaha cusub ee magacaagu ku qoran yahay 30 maalmood gudahood markaad iibsatid gaadhiga cusub. Waxaad hubsataa in ganacsaduhu hayo magacaaaga sharciga ah iyo ciwaankaaga madaama ay khasab tahay inuu ka muuqdo lahaanshaha.

Haddii gaadhi aad ka iibsato shaqsi, waxaad masuul ka tahay wareejinta lahaanshaha gaadhiga. Waxaad hubsataa in mulkiiluhu si fiican kuugu sameeyay oo lahaanshaha nootaayo kuu geeyay iyadoo la dhamaystirayo dhammaan qaybaha sixirka, socodka iyo iibsadaha magaciisa iyo ciwaankiisa oo dhamaystiran. Lahaanshaha cusub waxaa laga heli karaa Karaaniga Maxkamada Dacwadaga Guud ee degmo walba. Ha buuxin qayb kaliya oo ka mid ah codsiga ee dhinaca kale ee lahaanshaha, ilaa iyo lagu hor sameeyo nootaayo.Codsiga waa in nootaayo la soo mariyaa. Waxaad kharashka iyo qadar cashuurta kala xidhiidhaa Karaanigaaga maxaliga ah ee Maxkamada Dacwadaha Guud.

Soo wareejinta Baabuurta Leh Lahaanshaha

Xaddidaad gaar ah ayaa saaran dadka jecel inay baabuur ay ku qoran yihiin kala soo wareegaan meel ka baxsan Maraykanka si kumeelgaadh ah. Wixii faahfaahin ah la xidhiidh Maamulka Lahaanshaha iyo Adeega Macaamiisha ee Xafiiska Gaadiidka oo laga wici karo (614) 752-7671.

MACLUUMAADKA TAARIKADA RUQSADA

Dadka degan Ohio waxaa u furan afar hab oo ay u cusboonaysiin karan taariikada gaadiidkooda. Xafiiska Gaadiidka ayaa codsiga dib u cusboonaysiinta u dira mulkiilayaasha gaadiidka ugu yaraan 45 maalmood gudahood ka hor inta aanay gaadhin wakhtigeedii. Mulkiilayaasha gaadiidka waxaa u furan inay in boos codsiga iyo lacagta ugu diraan isla marka ay helaan, inay tagaan wakiil ku xigeenka diiwaangaliyahay xili walba oo ay dhamaystiraan codsiga xili kasta oo ka horaysa intaa aanu liisan koodu dhicin, inay galaan mareegta www.oplates.com ama wacaan tilifoonka 1-866-OPLATES (1-866-675-2837). Diiwaangelintu waxay dhacaysaa sanadguurada dhalashada. Isbedelka ciwaanka waxaa laga bedeli karaa www.oplates.com ama waraaq boosta lagu soo diro.

Wixii su'aal ah ee ku sahabsan taarikada liisanka baabuurta Ohio waxaa lagu soo hagaajinayaa 1-800-589-TAGS (1-800-589-8247),ama www.oplates.com.

2 - RUQSAD SIINTA DARAWALKA & DIIWAANGELINTA GAADIIDKA

(Dadka Degaanka Ku Cusub)

RUQSADA DARAWALNIMADA DADKA DEGAANKA KU CUSUB

Dadka ku cusub Ohio ee ruqsad darawalnimo baabuur oo ansax ah ka sita gobol kale waa inay raacaan talaabooyinkan si ay ruqsad u helaan:

1. Booqo xarun kasta oo imtixaanka ruqsadda darawalnimo oo ay leeyihiin Roonddada Waddooyinka Ohio (fiiri Lifaaqa A - Xarumaha Imtixaanka Ruqsadda Darawalnimo), oo tus ruqsadaada darawalnimo ee gobolka kale, oo u gudub baadhista indhaha iyo imtixaanka aqoonta ee ku sahabsan xeerka taraafiga iyo calaamadaha. Haddii ruqsadaad darawalnimada ee meel gobolka ka baxsan aanay lahayn lambarka Sooshiyal Sekiyuuritiga, waa inaad keento kaadhka Sooshiyal Sekiyuuritiga si ad u caddayso lambarka ((ka fiiri Liistada Dukumentiyada La Aqbali Karo, bogga 3 iyo 4).
2. Inkastoo imtixaanka laga dhaafo dadka cusub, imtixaan qaadayaashu way u baahan karaan imtixaan xirfadeed oo ku sahabsan wadista iyo dhaqaajinta siday doonaan. Imtixaanada xirfadaha waxaa lagu qaadaa ballan oo kaliya. Dadka degaanka ku cusub ee ka yar 18 jirka waa inay keenaan caddayn waxbarashadooda wadista gaadiidka (fiiri "Shuruudaha Waxbarashada Wadista," Cutubka 1). Haddii tabobar dirawalnimo lagu soo dhamaystay gobol kale, shahaadadaada waxbarashada dirawalnimada ee gobolka kale waa in lagu tusaa imtixaan qaadaha goobta (fiiri Lifaaqa C). Shahadaada gobolka kale waa inay muujisaa tirada saacadaha tababarka fasalka iyo tirada tabobarka saacadaha wadista gaadhiga. OGOW: Haddii tababarka lagu qaatay meesha ka baxsan Ohio aan buuxin shuruudaha, kooras waxbarasho tabobar darawalnimo waa in lag dhameeyaa Ohio.
3. Imtixaan qaaduhu wuxuu hubin doonaa Nidaamka Tilmaamidda Mushkilada Darawalka oo loo gaabsado PDPS si uu go'aan uga gaadho haddii lagu tuhusan yahay ama lagaa xayiray gobol kale. Haddii lagaa laalay ama lagaa xayiray gobol kale, xaq u yeelan maysid in gobolkani liisan ku siiyo ilaa iyo aad keento waraaq caddayn ah.
4. Haddii aad curyaan tahay ama aad qabto dhibaato caafimaad taas oo saamaynaysa ruqsadaada, waxaa laguula dhaqmi doona sida qofka Ohio deggan ee xaaladahaas oo kale ku jira.
5. Muddo 60 maalmood ah gudahood marka aad ka gudubta imtixaanka aragga iyo aqoonta, waa in aad tagtaa xafiiska diiwaangeliyaha si laguugu sameeyo ruqsad darawalnimo (oo ku qoran hoosta Adeegga Ruqsadda ee Bogaagga Huruudda ah) ama halkan www.bmv.ohio.gov/county_lst.stm).)
6. Waxaa lagaaga baahan doonaa inaad dhiibto ruqsadda darawalnimo ee aad ka sidato gobolka kale. Sida ku cad sharciga Ohio, qofna loo oggolaan mayo inuu isku waqti haysto hal ruqsad wax ka badan.

Waxaad sidoo kale u baahan doontaa inaad keento dokumentiyo la aqbalayo (ka fiiri Liistada Dukumentiyada La Aqbali Karo, bogga 3 iyo 4). Hay'ada ruqsad samaynta ayaa ka shaqayn doonta codsigaaga, kaa qaadi doonta kharashka loo baahan yahay, sawirkaaga qaadi doonta oo ku saari doonta ruqsadda.

OGOW: XUSUUSIN: Sharciga Ohio ma bixiyo "waqti dheerad ah" oo ruqsadaha gobolka ka baxsan loogu rogayo ruqsad Ohio marka laga reebo Ruqsadda Darawalnimada Ganacsiga. Marka aad degaan ku noqoto Ohio (aad ka shaqo gasho, aad saxeexdo heshiis kiro, aad guri ka iibsato, aad isku diiwaangeliso inaad cod ka dhiibato, caruurtaada aad dugsiga qorto, iwm), Adiga waxa kugu waajib ah inaad hesho ruqsad darawalnimo Ohio sida suurtagalka ah ee ugu dhakhsaha badan. Taariikh ahaan, maxkamadaha iyo saldhigyada booliiska Ohio waxay waqti ugu badan u tixgeliyaan 30 maalmood.

SAMAYNTA SHAHAADADA LAHAANSHAHA

Si shahaadada gobolka ka baxsan loogu rogo Ohio (waxaa lagama maarmaan ah caddayn mulkiyadeed si Ohio looga diiwaangeliyo), dadka degaanka ku cusubi waa inay:

1. La xidhiidh Xafiiska Mulkiyada ee Karaaniyada Maxkamada Dacwadaha Guud si aad go'aan uga gaadho saacadahooda iyo goobta isla markaana aad u waydiiso wixii su'aal ah. Dhammaan mulkiyadaha Ohio waxay Karaaniyada Maxkamada Dacwadaha Guud ku sameeyaan heer degmo.
2. Hel dokumentiyadan soo socda ee loo baahan yahay si mulkiyada laguugu wareejiyo ama gobol kale lagaaga bedelo: mulkiyadii hore ee asalka ahayd ee gobolka kale, oo haddii aad ku qancid la'aan ku qoran tahay mulkiyadii hore, koobi ka mid ah heshiiskii hore waa inuu la socdaa codsiga. Marka xigta, waa inaad leedahay baadhis gobolka ka baxsan (cadaynta aqoonsiga lambarka gaadhiga). Foomka baadhsita waa in lagu buuxiyaa xafiiska diiwagaliyaha iyo in sidoo kale gaadhiga ugu cusub/duugsan Ohio lagu sameeyo kharash dhan $5.00. Gaadhiga waa in loo qaadaa goobta baadhista si loogu sameeyo adeegan. Fadlan la xidhiidh adeega iibinta kahor inta aanad iman.

Wixii kale ee faahfaahin ah waa in laga codsadaa Karaaniyada Degmada ee Maxkamada Dacwadaha Guud Xafiiska Mulkiyadaha ama Laanta Adeega Macaamiisha iyo Maamulka Mulkiyadaha Xafiiska Gaadiidka oo ciwaankoodu yahay, P.O. Box 16520, Columbus, Ohio 43216-6520, (614) 752-7671. Fadlan ka fiiri liiska karaaniyada maxkamada dacwadaha guud ee degmadaada , Waaxda Maamulka, , ee xafiiskaaga mulkiyada.

Haddii gaadhigu uu ka imanayo gobol kale oo ay leedahay shirkada gaadiidka kiraysaa, qofka mulkiyada helayaa wuxuu u baahan yahay awoodda nootaayada ee garyaqaan ka socda shirkada si mulkiyada loogu soo saaro.

Dhammaan ganacsatada baabuurta ee Ohio wuxuu sharcigu ka rabaa inay waraaqda lahaanshaha ku soo gudbiyaan muddo 30 maalmood gudaheed ka dib wareejinta gaadhiga.

Gaadhi laga iibsaday shaqsi kale wuxuu u baahan donaa in lagu magacaabo degmo kasta, waa haddii labada dhinac buuxiyaan shuruudaha saacada ee federaalka iyo igmashada iibiyaha.

Sharciga Ohio ayaa go'aan ka gaadhaya in mulkiyada lagu qoro wax ka badan hal magac loo tixgeliyo wada lahaansho iyo in dhammaan saxeexyada mulkiilayaasha codsigu u baahan yahay.

BEDDELASHADA DIIWAANGALINTA GAWAARIDA KA-BAX-SAN GOBOLKA

Si taarikooyinka ka baxsan gobolka loogu badalo sumada Ohio, dadka degaanka ku cusubi waa inay raacaan talaabooyinkan:

1. Waa inay booqdaan Xarun baadhis baabuur ta ugu dhow (wakaaladaha ruqsadda, inta badan iibiyayaasha baabuurta cusub iyo kuwa iibiya baabuurta la isticmaalay way bixiyaan adeegan). Waxaad heli doontaa baadhis rasmi ah.
2. U qaado shahaadadan iyo mulkiyadaada gobolka ka baxan gobolka (ama dokumentiyada mulkiyadaha kale ee rasmiga ah) Karaaniga Maxkamadaha Dacwada Guud ee degmadaada Ohio. Haddii ay jirto dayn lagu leeyahay gaadhiga, waxaad sidoo kale u baahan tahay inaad qaadato koobi qoraalka daynta ah (tafaasiisha wac Karaaniga). Marka la keeno dhammaan dokumentiyada lagama maarmaanka ah, Karaaniga Maxkamada Dacwadaha Guud Xafiiska Mulkiyadaha ayaa gaadhigaaga u samayn doona waraaqda lahaanshaha Ohio
3. Lahaanshahaaga cusub ee Ohio u qaado wakaalada ku- xigeenka ruqsadda, adigoo sii qaadanaya cadayn lambarkaaga Sooshiyal Sikuyuuritiga. Ku xigeenka diiwaangaliyaha ayaa ururin doonta cashuurta ee cashuur sanadeedka ruqsadda isla markaana kuu samayn doonta dhowr taarikooyinka oo ay la socdaan istiikarada ansaxsanaanta ee lama huraanka ah iyo islibka diiwaangelinta.

OGOW: Sharciyan, qofka sida gaarka u leh gaadhigu waa inuu si shaqsi ah u codsadaa waraaqdiisa/waraaqdeeda lahaanshaha iyo taarikooyinka ruqsada. Ilaa la buuxiyo foom awood garyaqaan oo uu buuxiyo mulkiile sharci, qof kale ma dhamaystiri karo hawshaa

OGOW: Laga soo bilaabo Ogoosto 29, 2007, macaamiisha looga baahanmaayo inay keenaan caddayn lambarkooda Sooshiyal Sekuuritiga ama diiwaangelin gaadiid oo hore haddii ruqsad darawalnimo Ohio sharci ah ama kaar aqoonsi Ohio la keeno. Macaamiisha aan keenin ruqsad darawalnimo Ohio sharci ah ama kaarka aqoonsi ee Ohio la keeno marka ugu horreysa aa ah diiwaangalinta ayaa looga baahn doonaa inay soo caddeeyaan lambarkooda ryqsadda darawalnimada Ohio, kaar aqoonsi ee Ohio ama Lamabarka Sooshaal Sekuuritiga.

3 - RUQSADDA DARAWALNIMADA GANACSIGA

HEERARKA RUQSADDA DARAWALNIMADA GANACSIGA (CDL)

Dhammaan wadayaasha gaadiidka ganacsiga ee noocyadan soo socda waxaa laga rabaa inay haystaan liisan darawal gaadiid ganacsi haddii wadaha aan laga reebin (fiiri boga 19aad ee kuwa ka reeban CDL).

Heerarka liisanada gaadiidka darawalnimada iyo noocyada gaadiidka ay u oggol yihiin liisan sitaha inuu kaxeeyo waa sidan hoos ku qoran:

1. Nooca A - isku dhaf gaadiid oo isku darka culayskoodu yahay 26,001 bownd amaka badan haddii miisaanka gaadhiga ama gaawaadhiga la jiidayaa ay ka badan yihiin 10,000 oo bownd.
2. Nooca B - gaadhi kasta oo kali ah oo culayskiisu yahay 26,001 bownd ama ka badan oo gaadhi noocan ah oo jiidaya gaadhi aanu culayskiisu ka badnayn 10,000 bownd.
3. Nooca C - gaadhi kasta oo kelidii ah, ama isku dhafka dhowr gaadhi, oo aan ahayn Nooca A ama Nooca B, laakiin loogu talo galay inuu qaado 16 rakaab ah ama wax ka badan, oo uu ku jiro darawalku, ama uu ku qoran yahay boodh sheegaya waxyaabo halis ah iyo bas iskuul oo culayskiisa guud ka yar yahay 26,001 bownd kaas oo loogu talogalay inuu qaado wax ka yar 16 rakaab ah oo uu ku jiro darawalku.

Nooca sare CDl wuxuu kuu oggolanayaa inaad kaxayso gaadiid ka mid noocyada hoose, taas oo ku xidhan haddii aad qabtid oggolaanshaha saxda ah. Oggolaansho ayaa laga rabaa:

- Gadiidka loogu talogalay inay qaadaan 16 rakaab ah ama ka badan
- Is-jiid laboole ama saddexle ah
- Booyadaha
- Lagu qoray walxaha halista ah
- Basaska iskuulka

YAA U BAAHAN CDL

Waxaad u baahan tahay CDL haddii aad kaxayso mid ka mid ah gawaadhidan soo socota:

1. Isku dhaf gaadiid oo isku darka culayskoodu yahay 26,001 bownd ama ka badan haddii miisaanka gaadhiga ama gaawaadhiga la jiidayaa ay ka badan yihiin 10,000 oo bownd.
2. Gaadhi kasta oo kali ah oo culayskiisu yahay 26,001 bownd ama ka badan ama gaadhi noocan ah oo jiidaya gaadhi aanu culayskiisu ka badnayn 10,000 bownd.
3. Gaadhi kasta oo kelidii ah, ama isku dhafka dhowr gaadhi, oo aan ahayn Nooca A ama Nooca B, laakiin loogu talo galay inuu qaado 16 rakaab ah ama wax ka badan, oo uu ku jiro darawalku , ama uu ku qoran yahay boodh sheegaya waxyaabo halis ah.

4. Bas iskuul kasta oo culayskiisu ka yar yahay 26,001 bownd kaas oo loogu talogalay inuu qaado wax ka yar 16 rakaab ah oo uu ku jiro darawalku.
5. Bas iskuul kasta oo culayskiisu ka yar yahay 26,001 bownd kaas oo loogu talogalay inuu qaado wax ka yar 16 rakaab ah oo uu ku jiro darawalku.

Waa kee ruqsada CDL ee loo rabaa?

Waxa jira saddex nooc Ruqsada Baabuurta Ganacsiga: DERAJADA "A", DERAJADA "B", iyo DERAJADA "C". Si aad u ogaato haddii la rabo Ruqsadda Baabuurta Ganacsiga, raac fariimahan oo ka jawaab su'aalaha hoose.

1. Akhri su'aasha koowaad. Dooro jawaabta haboon (HAA ama MAYA).
2. Raac falaadha jawaabtaad dooratay HAA ama MAYA ilaa sanduuqa ku xiga.
3. Akhri su'aasha oo dooro jawaabta haboon(HAA ama MAYA).
4. Sii wad nidaamka ilaa aad gaadhayso sanduuqa sheegaya nooca CDL ee la rabo.

HALKAN KA BILAAB



GVWR - macnaheedu waa qiimaha uu sheegay sameeyuhu ee miisaanka ugu sareeya ee baabuur raran oo keliya ama mid isjiidaya. Isugaynta guud ee baabuur iswata waa qaybta quwadda (jiidaha) iyo miisaanka guud ee isjiidka (dib loo eegay 6/18/02)

OGGOLAANSHAHA (AYIDAADDA) IYO XANIBAADA CDL-KA

Ayidaadahan iyo xanibaadan soo socda ayaa khuseeya Liisanka Darawalnimada Ganacsiga:

- **H** - waxay u oggolaanaysaa dirawalka inuu kaxeeyo gaadhi sida walxo halis oo qadarkoodu u baahan yahay boodh.
- **K** - Waxay ku xanibaysaa darawalka ka shaqaynta gobolka gudihiisa oo kaliya.
- **L** - Waxay ku xanibaysaa dirawalka inuu kaxeeyo gaadhi aan lahayn biriiga hawada.
- **T** - Waxay u ogoshahay dirawalka inuu kaxeeyo isjiid laboole iyo saddexle ah.
- **P** - Waxay u ogoshahay dirawalka inuu kaxeeyo gaadhi loogu talogalay inuu qaado 16 ama ka badan oo rakaab ah.
- **P1** - waxaa lala isticmaalaa ayidaad rakaabka, waxay dirawalka u ogoshahay inuu kaxeeyo Nooca A ee loogu talogalay wax ka yar 15 rakaab ah iyo dhammaan noocyada ka hooseeya iyadoo aan la xadidayn tirada rakaabka.
- **P2** - waxaa lala isticmaalaa ayidaada oggolaanshaha, waxay dirawalka u oggolaanaysaa inuu kaxeeyo Nooca A ama B ee loogu talogalay wax ka yar 15 rakaab ah iyo dhammaan Noocyada ka yaryar iyadoo aan la xaddidayn tirada rakaabka.
- **P4** - waxay ku xadidaysaa dirawalku inu kaxeeyo Nooca C ee basaska dugsiga ee loogu talogalay in lagu qaado wax ka yar 16 rakaab ah oo uu ku jiro dirawalku.
- **N** - Waxay dirawalka u oggolaanaysaa inuu kaxeeyo booyadaha.
- **S** - Waxay u oggolaanaysaa dirawalka inuu kaxeeyo baska iskuulka.
- **X** - Waxay u oggolaanaysaa dirawalka inuu kaxeeyo booyadaha qaada waxyaabaha halista ah oo door ah una baahan boodh.
- **W** - waxay ku xanibaysaa dirawalka kaxaynta baabuurta ganacsiga iyadoo raacayo lagand dhaafayo adeegyada beeraha la xidhiidha ee lagu soo saaray ORC 4506.24.

WAXYAABAHA KA REEBBAN CDL-KA

Sharcigu wuxuu noocyadan ka reebayaa CDL-ka:

1. Baabuur Beereed (gaadhi uu maamulo isla markaana kaxeeyo beeroole oo u isticmaalo qaadista iyo ka keenista wax soo saarka beerta, sahayd beerta, ujeedooyin la xidhiidha hawsha beerta fogaan aan ka badnayn 150 mayl. Gaadhiga waa in la wadaa iyadoo la raacayo ORC 4506.03(B) waana in aan loo isticmaalin hawlaha shirkad gaadiid oo madax bannaan ama gaadiid gaar loo leeyahay).
2. Qalabka dabka ee waaxda dabka, shirkad dab oo taburuc ah iyo mid aan tabaruc ahayn, damdamiska degmada ama wadajirka damdamiska degmada.

3. Gaadhi badbaado dadwayne oo loo isticmaalo in adeeg caafimaad degdeg ah lagu siiyo dadka xanuusanaya ama dhaawacan. (" gaadhi badbaado dadwayne" waxaa ka mid ah gaadhi kasta oo leh macno kasta oo ku xusan ORC 4511.01 (E)(1) & (3)).
4. Gaadhi tamashle (gaadhi tamashle waxaa ka mid ah oo lagu qeexay gaadhi jimicsi ORC 4511.01, oo si khaas ah loogu isticmaalo ujeedooyin aan ahayn ganacsi ama macaash).
5. Gaadhi loo isticmaalo ujeedooyin aan ganacsi ahayn
6. Gaadhi uu ujeedooyin milatari u isticmaalo xubin kasata ama shaqaale dirays xidhan oo ka tirsan Xooga Ciidanka Maraykaynka.

QAABSOCODYADA LOOGU TALAGALAY HELITAANKA CDL

Si aad u hesho CDL ama kaadh ku meelgaadh ah oo ah TIPIC, waxaa lagaaga aahan yahay inaad ugu yaraan ahaataa 18 jir oo aad haysataa liisan darawalnimo o ansax ah. Buugaagta barashada ayaa diyaar ku ah dhammaan xafiisyada wakiilada liisanada iyo xarumaha imtixaanka. Waxaad u baahan tahay inaad codsato TIPIC. U qaado ruqsaddaada darawalnimada Ohio iyo/ama Ohio TIPIC xarun kasta oo imtixaan (eeg Xarumaha Imtixaanka Ruqsadda Darawalnimo) marka aad marayso imtixaanka ku haboon jadiidinta liisankaaga darawalnimo ama aad ayidid ku darayso.

- Liisankaaga darawalnimada Ohio ama/iyo kaadhka ku meelgaadhka ah ee TIPIC.

Marka aad si guul leh uga gudubto imtixaanka, warbixin u gudbi xafiiska ku xigeenka diiwaangeliyaha lagu samaynayo liisanka dirawlnimada warbixin (oo u qoran hoosta Adeegga Ruqsadda" ee bogagga huruudda ah ama halkan www.bmv.ohio.gov/county_lst.stm). Waa inaad keentaa liisan ansax ah iyo dokumentiyo a aqbali karo. Ku xigeenka ayaa kuu soo saari doona kaarka TIPIC si aad u kaxayso gaadhi ganacsi kaliya marka uu kula socdo qof sita CDL ansax ah kaas oo sidoo kale waafaqsan nooca gaadhiga la wato. Qofku waa inuu fadhiistaa kursiga ku xiga qofka haysta TIPIC-ca. Kaadhka TIPIC wuxuu ansax yahay lix bilood oo ka bilaabanta maalinta la sameeyay. Kaadhka TIPIC ee CDL-ku waxaa la iibsan karaa oo kaliya laba goor labadii sanaba.

TIJAABINTA

Imtixaanka aqoonta iyo xirfadaba caadi ahaan waa loo baahan yahay si loo helo CDL. Imtixaanka Xirfadu wuxuu ka kooban yahay baadhis ka horaysa socdaalka, tijaabinta xirfada aasaasiga ah ee wadada iyo xirfada. Tan waxay qaadataa ku dhawaad laba saacadood in la dhameeyo. Waxaa lagaaga baahan doonaa inaad keento gaadhi ku haboon nooca liisanka aad codsaynayso, oo uu ka mid yahay gaadhi rakaab ama bas iskuul (oo loogu talogalay inuu qaado 16 ama ka badan oo qof oo u ku jiro dirawalku) haddii aad codsanayso bas iskuul ama gaadhi rakaab.

Haddii aad jeceshahay inaad jidiidiso nooca, aad ku darto rakaab ama bas iskuul ama aad ka saarto meesha xanibaada biriiga hawada kadib markii lagu siiyey CDL, waxaa loo baahan yahay imtixaanka xirfada iyo aqoonta.

KHARASHKA

Si aad u hesho risiidhka imtixaanka xirfada CDL, waxaad u baahan doontaa inaad booqato ku xigeen diiwaangeliye (oo ku qoran hoosta Adeegga Ruqsadda ee bogagga Huruudda ah ama halkan www.bmv.ohio. Risiidka ayaa ka kooban ajuurada soo socda:

- Baadhista ka horaysa socdaalka ($10 gobolka , $20 dhinaca sadexaad);
- Qaybta dhaqaajinta wadada ka baxsan ($10 gobolka , $20 dhinaca sadexaad); iyo
- Dhinaca waddada ee imtixaanka ($30 gobolka, $45 dhinaca saddexaad).

CUSBOONAYSIINTA/JADIIDINTA SARE U-QAADKA AH

Marka aad codsanayso cusboonaysiin ama jidiidin sare u qaad CDL, dhammaan codsadayaashu waxay:

- Bixin doonaan macluumaad kasta oo casriyaysan.
- Si loo cusbooneysiisto CDL leh ayidaad walaxda halista ah ama sare loogu qaato CDL leh ayidaad walaxda halista ah, ka gudub imtixaan aqoonta oo ay buuxiyaan codsi cusub oo loogu talagalay Qiimaynta Halista Amniga (TSA 877-429- 7746). Si aad liisan uga dhigto CDL leh oggolaanshaha walxaha halista ah ama cusboonaysiinta CDL hore u jiray oo lahaa oggolaanshaha walxaha halista ah.

4 - XEERKA BAASKIILKA & GAADHI BAASKIILKA

XEERKA IYO SHARCIGA BAASKIILKA

Marka aad marayso waddo, baaskiilayda waxaa laga rabaa inay raacaan dhammaan sharciyada kale ee taraafiga (jidadka) ee khuseeya baabuurta afarta taayir leh. (Faahfaahin ku sahabsan sharciga baaskiilka iyo habdhaqanka badbaadsan ee kaxaynta baaskiilka waxaad ka akhridaa “Buugga Baaskiil Wadaha Ohio.”)

Qeexida Baaskiilka

Qaybta 4511.01(C) “ Baaskiil” macnihiisu waxa weeyi gaadhi, aan ahayn cagaf oo leh kursi uu ku fadhiisto waduhu oo loogu talogalay inuu ku socdo waxaan ka badnayn saddex taayir, oo uu ka mid yahay, balse aan ku dhammayn, baabuurta la yidhaa “ Dhugdhuglayda” “ iskuutarka” ama “ baaskiilka” iyadoo aan loo eegayn culayska ama awoodda biriiga.

Diiwaangelinta Baaskiilka

Qof kasta oo baaskiil ku kaxaynaya waddada waa inuu si sannadle ah uga diiwaangeliyaa Xafiiska Gadiidka isla markaana uu sitaa ruqsad baabuur ansax ah ama oggolaansho.

Shrciyada Gaarka ah ee Baaskiil Wadayaasha

1. Is-ag-fadhiisiga: ORC 4511.55B wuxuu dadka kaxeeya baaskiiladaha ka mamnuucayaa in wax ka badan laba qof is-ag fadhiistaan (dhinac dhinac)

waddo baaskiil kaliya, marka laga reebo wadiiqooyinka ama jidadka gaarka ah ee loogu talogalay isticmaalka gaarka ah ee baaskiiladaha.

2. Koofiyadaha iyo gaashaanka indhaha: Sharciga gobolku wuxuu u baahan yahay in dhammaan wadayaasha baaskiiladuha iyo rakaabku inay xidhaan muraayadaha ilaaliya indhaha ama qalab kale oo loogu talogalay ilaalinta indhaha mar walba marka ay marayaan jidadka. Sharcigu wuxuu sidoo kale u baahan yahay in dadkan hoos ku qorani xidhaan koofiyad loogu talogalay badbaadsanaanta taas oo buuxinaysa shuruudaha Waaxda Gaadiidka ee Federaalka (U.S. DOT) markasta oo ay marayaan jidadka :
   - Dhammaan wadayaasha baaskiilka iyo rakaabka ka yar 18 jir.
   - Dhammaan wadayaasha barbaradka ah, da'da ay doonaan ha ahaadeene. Barbarad waxaa lagu qeexaa qof kasta oo wade ahaan leh wax ka yar hal sano oo waayo-aragnimo ah.
   - Dhammaan rakaabka, da' kastaba, marka ay la socdaan dirawal sharci ahaan la doonayo inuu xidho koofiyad.
3. Xeerka Qalabka : Sharciga gobolku wuxuu u baahan yahay in baaskiil kasta oo wadada marayaa uu ku leeyahay qalabkan hoos ku qoran:
   - Ugu yaraan hal, laakiin waxaan ka badnayn laba laydh oo dusha ah
   - Ugu yaran hal laydh oo dambe/laydhka biriiga
   - Laydhka cad ee taarikada
   - Hoon laga maqli karo ugu yaraan 200 fuudh
   - Ugu yaraan muraayad haadka raarka ku taal oo dirawalku ka arki karo waxa ka dambeeya oo dhan
   - Giftino iyo meelo la qabsado oo soo taagan isla markaana aan kursiga ka dheerayn 15 hiish.
   - Bidhbidhaha leexashada waa inay yeeshaan dhammaan baaskiiladihii la sameeyay wixii ka dambeeyay 1968.
4. Rakaabka Baaskiilka: Kuraas fidsan oo rakaabka ah lama oggola. Dadka fuushani waa inay is garabgalaan baaskiilka, iyagoo lugaha ka kala ridaya. Rakaabku waxaa laga yaaba in lagu qaado kursi si adag ugu dhegsan.

CODSASHADA RUQSADA BAASKIILKA

1. "Wade baaskiil oo kaliya" waa ruqsad darawal oo ku eg in qofku kaxeeyo baaskiiladaha oo kaliya.
2. "Oggolaanshaha Baaskiilka" waa oggolaanshaha dheeraad ah oo loo sameeyo qofka hore u haystay ruqsaddarawalnimo Ohio ah oo aan dhacsanayn. Qofka liisankaa haysta waxaa loo oggol yahay in kaxeeyo baaskiiladah iyo gaadiidka kaleba.

Qofka sita oggolaanshaha baaskiil laba taayirka ee motorka leh ama ruqsadwaxaa laga yaabaa in kaxeeyo baaskiil laba ama saddex-shaag mooto ah. Qofka sita oggolaanshaha baaskiil mootada saddex taayir leh ama ruqsadku eg wadista mootada baaskiil saddex taayir leh.

Si Aad U Hesho Ruqsad Baaskiil keliya

1. Waa inaad tahay 15 jir iyo lix bilood ama waa inaad ka waynaataa si aad u hesho kaadhka ku meelgaadhka ah ee TIPIC. Si aad u hesho ruqsadbaaskiil, waa inaad sidataa ruqsadxiligii la sameeyay ay ka sooo wareegtay lix bilood. Qof da'diisu ka yar tahay 18 jir waa inuu dhamaystiray 50 saacadood oo tabobar ah, kooraska waxbarashada dirawalnimada oo la ansixiyey, iyo barnaamijka badbaadsanaata iyo waxbarashada dirawalka, iyo sidoo kale shuruudaha liisanka darawalnimada. Motorcycle Ohio waa u diyaar dhammaan baaskiiladleyda oo dhan. (U wac 1-800-83-RIDER ama booqo www. motorcycle.ohio.gov).
2. Marka hore dadka ruqsadcodsashadu ugu horaysaa waa inay buuxiyaan shanta talaabo ee hore ee boga 4aad
3. Waa inaad ka gudubtaa imtixaan aqoonta baaskiiladaha ah. Waa inaad akhridaa qaybta afraad ee qoraalkan iyo " Buuga Baaskiil wadaha Ohio". Dhammaan su'aalaha aqoonta ahi waxay ku salaysan yihiin macluumaad ka yimid labadan buug. Kadib marka aad si guul leh uga gudubtid imtixaankaaga araga iyo aqoonta, imtixaan qaaduhu waxaa laga yaabaa inuu qaado sawirkaaga oo uu ku siiyo risiidh aad la tagto xafiiska ku xigeen diiwaangeliyaha.
4. Waa inaad ku xigeenka diiwaangeliyaha u warisaa (oo ku qoran hoosta Adeegga Ruqsadda ee bogagga huruudda ah ama halkan www.bmv.ohio.gov/county_lst. stm) oo aad 60 maalmood gudahood ku heshaan kaadhkaaga ku meelgaadhka ah oo ka bilaabmaysa maalinta aad ka gudubto imtixaanka aqoonta. Waa inaad keentaa laba dokumenti oo cadaynaya magacaaga, taariikhda dhalashada iyo Sooshiyal sikiyuuritigaaga, haddiiba laguu sameeyay (Ka fiiri Liistada Dukumentiyada La Aqbali Karo, bogga 3 iyo 4). Kadib marka la cadeeyo dokumentiyadaada iyo sawirkaaga, ku xigeenku wuxuu uga gudbi doonaa inuu kuu soo saaro kaadhka aqoonsiga ku meelgaadhka ah ee loo yaqaan TIPIC. Kaadhkan TIPIC waa in la haystaa mar walba oo aad marayso nidaamka liisanka. Kaarka baaskiilka mootada leh ee ku meelgaadhka ahi (TIPIC) wuxuu kuu oggolaan doonaa inaad sii barbarato imtixaanka xirfadaha baaskiilka adiga oo kaxayn doonaa baaskiilka oo aan rakaab saarnayn maalintii. Kaadhka TIPIC ansax kuma aha meelaha cidhiidhiga ah iyo wadooyinka gobolada u kala baxa, waan inaad xidhataa koofiyad iyo gaashaanka indhaha. Kaarkani TIPIC wuxuu ku dhacayaa hal sano oo ka bilaabanta maalinta la sameeyay.
5. Marka xirfadahaaga wadista baaskiilku ay kobcaan, la hadal goob imtixaaneed kasta si aad u samaysato balan imtixaan. Marka aad timaad goobta imtixaanka, waxaad keentaa kaadhka TIPIC ee baaskiiladaha oo ansax ah. (Wixii macluumaad ah ee ku sahabsan imtixaanka xirfadaha, fiiri " Galista Imtixaanka Xirfadha" ee cutubkan.)
6. Imtixaanka xirfada ee awoodaada kaxaynta baaskiilka waxaa qaada imtixaanqaade oo ku qaade meel jidka ka baxsan. Waa inaad keentaa baaskiil jidka sharci ku ah oo xaaladiisu fiican tahay oo imtixaanka lagu qaado.

7. Marka aad ka gudubto imtixaankaaga xirfada, waa inaad ku soo noqotaa ku xigeenka diiwaangeliyaha oo aad u dhiibtaa kaadhkaaga TIPIC si aad u hesho liisankaaga baaskiilka kaliya ka hor dhicista kaadhkaaga TIPIC. Waxaa sidoo kale lagaaga baahan doonaa inaad keento dokumenti lambarkaaga sooshiyal sikiyuuritiga, haddiiba laguu sameeyay. Ku xigaha ayaa kaa qaadi doona ujro (si aad u ogaato ajuurada xaadirkan la qaado, booqo www.ohiobmv.com) oo kuu saari doonta ruqsaddaaada baaskiilka mootada ah.

MUHIIM: Haddii aad ka yar tahay 18 jir, waa in codsigaaga uu kula soo saxeexaa waalid ama masuul sharci ah xiliga aad codsanayso. La saxeexuhu waa inoo sidoo kale keenaa laba foom oo dokumentiyada la aqbali karo ah oo cadaynaya aqoonsigaaga (Waxaad ka fiirisaa boga 3aad iyo 4aad liiska dokumentiyada la aqbali karo). Waalid ama masuul waa inuu u soo raacaa codsade kasta oo da'diisu ka yar tahay 18 jir wakiilka ku xigeenka diiwaangeliyaha.

Si Aad U Hesho Oggolaanshaha Baaskiilka

1. Waa inaad sidataa ruqsaddarawalnimada Ohio oo ansax ah marka aad booqanayso goobta imtixaanka (fiiri Lifaaqa A - Xarumaha Imtixaanka Ruqsadda Darawalnimo). Balantu muhiim maaha si aad u qaadato imtixaanka aqoonta iyo baadhista araga, laakiin hubi inaad ogaato saacadaha iyo maalmaha imtixaan walba. Wadayaasha da'doodu ka yar tahay 18 jir waa inay dhameeyaan Barnaamijka Tabobarka Baaskiiladaha Ohio, iyo sidoo kale shuruudaha liisanka darawalka qalin jabiyey. Wac 1-800-83-WADAHA (1-800-837-4337). Motorcycle Ohio waa u diyaar dhammaan kaxaystayaasha baaskiiladleyda mootorka leh oo dhan (www.motorcycle.ohio.gov).
2. Raac tallabooyinka 3 illaa 6 Si Aad u Hesho Ruqsad kaliya-Mootada ah.
3. Marka aad ka gudubto imitixaankaaga xirfada, waa inaad ku noqotaa ku xigeen diiwaangeliye oo kasta oo aad u dhiibtaa liisankaaga darawalnimada Ohio. Liisankaaga dirawalnimada Ohio waa inaad heshaa ka hor dhicista kaadhkaaga TIPIC. Ku xigeenka ayaa dib kuugu soo saari doona TIPIC-kaaga oo kuugu dari doona oggolaanshaha baaskiilka. Haddii aad tahay 21 jir ama ka wayn oo aanad ku jirin mudadii dib u cusboonaysiinta , mudada dhicista ee liisankaagu waxay ahaan doontaa sideedii. Waxaa sidoo kale lagaaga baahan doonaa inaad keento dokumentiyo la aqbali karo (ka fiiri Liistada Dukumentiyada La Aqbali Karo, bogga 3 iyo 4). Waxa jira ujro ah in lagu daro ayidaadda (si aad u ogaato ajuurada xaadirkan la qaado, booqo www. ohiobmv. com). Marka oggolaanshao lagu darayo liisankaaga Ohio marka aad ku jirto dib u cusboonaysiinta, oggolaanshaha waa laga darayaa lacag la'aanteed.
4. Imtixaanka xirfada ee awoodaada kaxaynta baaskiilka waxaa qaada imtixaanqaade oo ku qaade meel jidka ka baxsan. Waa inaad keentaa baaskiil jidka sharci ku ah oo xaaladiisu fiican tahay oo imtixaanka lagu qaado.

5. Kadib marka aad ku guulaysato imtixaanadaada araga iyo aqoonta, waxaad heli doontaa risiidh uu ku qoran yahay lambar xaqiijin ah oo aad geyso xafiiska ku xigeenka diwaangeliyaha si aad 60 maalmood gudahood ugu hesho kaadhka aqoonsiga ee ku meelgaadhka ah (TIPIC). Waa inaad keentaa laba dokumenti oo cadaynaya magacaaga, taariikhda dhalashada iyo sooshiyal sikiyuuritigaaga, haddiiba laguu sameeyay. (Waxaad ka fiirisaa bogga 3 iyo 4 Liistada Dukumentiyada La Aqbali Karo.) Kadib marka la cadeeyo dokumentiyadaada iyo sawirkaaga, ku xigeenku wuxuu uga gudbi doonaa inuu kuu soo saaro kaadhka aqoonsiga ku meelgaadhka ah ee loo yaqaan TIPIC. Kaadhkan TIPIC waa in la haystaa mar walba oo aad marayso nidaamka liisanka. Haddii kaadhkani kaa lumo, fadlan booqo hay'adaada ku xigeenka diiwaangeliyaha oo iibso TIPIC kale oo kuu bedela kii hore.

MUHIIM: Haddii aad ka yar tahay 18 jir, waa in codsigaaga uu kula soo saxeexaa waalid ama masuul sharci ah xiliga aad codsanayso. La saxeexuhu waa inoo sidoo kale keenaa laba foom oo dokumentiyada la aqbali karo ah oo cadaynaya aqoonsigaaga (Waxaad ka fiirisaa boga 3aad iyo 4aad liiska dokumentiyada la aqbali karo). Waalid ama masuul waa inuu u soo raacaa codsade kasta oo da'diisu ka yar tahay 18 jir wakiilka ku xigeenka diiwaangeliyaha.

Gelista Imtixaanka Xirfada

Baaskiilka oo kaliya Codsadayaasha

Waa inaad keentaa kaadhka TIPIC oo ansax ah iyo gaadhi haboon. Waa inaad keentaa koofiyad la ansixiyay iyo gaashaanka indhaha waan inaad keentaa baaskiil jidka sharci ku ah oo xaaladiisu fiican tahay oo imtixaanka lagu qaado. Baaskiilku waa inuu yeeshaa kursi si adag ugu dhegsan oo leh giftino iyo meelo la qabsado oo aan wax ka badan 15 fuudh ka waynayn kursiga. Waa in uu ku qalabaysnaadaa dhammaan qalabka badbaadada. Haddii gaadiidku ku fashilmo waxyaabaha kor ku xusan markaa taas waa loogu diidi karaa imtixaanka xirfada.

Codsadayaash Oggolaansha Baaskiilka

Keen liisanka darawalnimada Ohio oo ansax ah, kaadhka TIPIC oo la ansixiyey iyo gaadhi haboon. Waa inaad keentaa koofiyad la ansixiyay iyo gaashaanka indhaha waan inaad keentaa baaskiil jidka sharci ku ah oo xaaladiisu fiican tahay oo imtixaanka lagu qaado. Baaskiilku waa inuu yeeshaa kursi si adag ugu dhegsan oo leh giftino iyo meelo la qabsado oo aan wax ka badan 15 fuudh ka waynayn kursiga. Waa in uu ku qalabaysnaadaa dhammaan qalabka badbaadada. Haddii gaadiidku ku fashilmo waxyaabaha kor ku xusan markaa taas waa loogu diidi karaa imtixaanka xirfada.

Dadka ku Cusub Ohio

Dadka ku cusub Ohio ee sita ruqsadbaaskiil darawalnimo baaskiil kaliya oo ka baxsan gobolka ama ruqsaddarawalnimo wata oggolaanshaha baaskiilka oo ka baxsan gobolka waxaa laga yaabaa inuu helo ruqsadla nooc ah haddii uu dhamaystiro imtixaanka araga iyo aqoonta. Imtixaan xirfadeed looma baahna. Haddii aad ka yar tahay 18 jir waa inaad buuxisaa shuruudaha Ohio.

Barnaamijka Baaskiiladaha ee Ohio

Barnaamijka Baaskiilaha ee Ohio waa barnaamij bixiya kooras badbaadsanaanta baaskiiladaha iyo aqoontooda ah kana baxa goobo badan oo ka tirsan gobolka. Koorsadan ayay ka bixiyaan ujro yar oo aan celin-lahayn dhammaan dadka oo idil. Barnaamijka Baaskiiladaha ee Ohio waxaa looga baahan yahay dadka da'doodu tahay 18 jir ka hor inta aanay codsan oggolaanshaha wadaha baaskiilka ama/iyo liisan. Wixii macluumaad dheeraad ah booqo www.motorcycle.ohio.gov.

Inkastoo uu ku waajahan yahay dadka cusub, koorasku wuxuu qiimo u leeyahay dhammaan heerarka kala duwan ee xirfadaha. Baaskiilado, koofiyado iyo buugaag ayaa la bixiyaa. Wixii faahfaahin ah, wac 1-800-83-WADAHA. Wadayaasha baaskiiladaha ee si guul leh u dhameeya Barnaamijka Baaskiiladaha Ohio loogama baahna imtixaan xirfadeed oo uu ka qaado imtixaan qaade gobolka ahi.

LA WADAAGISTA WADADA BAASKIILADLEYDA

Waduhu waa inuu:

- Waddada la wadaag baaskiiladaha (dhugdhuglayda). Baaskiiladluhu wuxuu leeyahay xaq isticmaalka wadada sida darawalada kale.
- Waa inuu inuu joogteeyaa " aaga badbaadada" oo ku dhow sadex ilbidhiqsi oo u dhaxeeya gaadhiga iyo wadaha baaskiilada.
- Ka gudbaa baaskiilad marka in sidaa la sameeyaa ay badbaadsan tahay.
- Aad meel fiican u banaysaa marka aad ka daba laabayso wada baaskiil si waduhu aanu u gu'in marka wadaha baaskiilku luudiyo si uu u laabo.
- Yaan la isku dayin in isla wadiiqo baaskiil oo isku mid ah lala wadaago baaskiil kale.
- Iska ilaali masiibooyinka baaskiiladaha sida godadka, jayga, qoyaanka, silbadka ama dilaaca wadada iyo ka gudbidda wadada tareenka taas oo oo baaskiiladlaha ku keeni karta inuu si lama filaah ah u badalo xawaaraha ama jihada.

GAADHI BAASKIILKA

Qofna ma kaxayn karo gaadhi baaskiil wado guud ama mid gaar ah haddii qofku aanu:

- Ahayn 14 jir ama ka wayn oo aanu helin liisanka kaxaynta gaadhi baaskiilka Ohio.
- Waa inuu sitaa liisanka darawalnimada Ohio oo ansax ah ama ruqsadbaaskiil.

Qof liisankiisa uu tuhun ku jiro sharci uma laha inuu codsado liisanka kaxaynta gaadhi baaskiilka.

Qeexdinta Gaadhi Baaskiilka

Qaybta 4511.01H ee Xeerka Dib Loo Eegay ee Ohio wuxuu gaadhi baaskiil ku qeexayaa gaadhi kasta oo laba taayir leh ama mid hore iyo laba raarka ah kaas

la awoodi karo in la baydaliyo isla markaana leh matoor caawiye ah. Matoorkaa caawiyaha ahi:

- Waa inuu lahaadaa bistoon aan ka badnayn 50 sentimitir kuyuubik.
- Aanu soo saarin wax ka badan biriig awoodiisu tahay hal hooras baawar (horsepower).
- Gaadhiga ku kaxeeyaa ugu badnaan xawaare aan ka badnayn 20 mph meel siman.

Baaskiil kasta oo matoor caawiyo kaas oo dhaafa xuduudahan waa gaadhi baaskiil waxaana qabanay dhammaan shuruudaha diiwaangelinta iyo ruqsadsiinta wadayaasha ee baaskiiladaha.

Shuruudaha kor ku xusan, dhammaan baaskiiladaha matoorka lihi waa in agaasimaha Waaxda Badbaadsanaanta Dadwaynaha ee Ohio u ansixiyaa inay buuxiyeen shuruudaha aasaasiga ah ee qalabka (fiiri "Qalabka," cutubkan). Gaadhina ma noqdo gaadhi baaskiil ilaa Waaxda Badbaadsanaanta Dadwaynuhu ay ku darto liiska ay ansixisay. Si aad u hesho koobi liiska dhammaan noocyada iyo moodeelada loo ansixiyey iibka Ohio, waxaad waraaq u dirtaa : La Talinta Sharciga, Waaxda Ohio ee Badbaadsanaanta Dadwaynaha, P.O. Box 182081, Columbus, Ohio 43218-2081.

Ruqsada Gaadhi Baaskiilka

Ruqsada wadaha gaadhi baaskiilku wuxuu qofka sita u oggolaanayaa in kaxeeyo gaadhi baaskiilka oo kaliya. Uma oggolaanayo sitaha inuu kaxeeyo baaskiil, gaadhi rakaab ama nooc kasta oo kale oo baabuur ah. Ma badali karo kaadhka ku meelgaadhka ah ee TIPIC ama nooc kasta oo kale oo ah liisanka darawalnimada Ohio.

Liisanka gaadhi baaskiilka waxaa lagu sameeyaa Xafiiska Diiwaangeliye marka tijaabinta loo baahan yahay dhamaato. Waxaa jira kharash, liisankuna wuxuu dhacayaa sanadguurada dhalashada liisan-haystaha ee sanadka afraad ee samayntiisa. Haddii liisankii asalkii la lumiyo, xado ama la burburiyo, mid la mid ah ayaa lagu heli karaa lacag dheeri ah. Kan dambe wuxuu ku dhacayaa taariikhdii dhicista ee kii hore (fiiri Lifaaqa B wixii lacag ah).

CODSASHADA RUQSADAADA BAASKIILKA

Haddii aad tahay mid degan Ohio oo ah 14 jir iyo wax ka wayn, oo aanad haysan ruqsadkale oo ansax ah, waxaa laga yaabaa inaad codsato ruqsadgaadhi baaskiil adigoo raacay talaabooyinkan:

1. Waa inaad akridaa oo barataa dhaman macluumaadka halkan ku qoran.
2. Aad tagtaa goob kasta oo imtixaan (fiiri Lifaaqa A - Xarumaha Imtixaanka Ruqsadda Darawalnimo).
   Wax balan ah oo lagama maarmaan ahi ma jiro si aad u gasho imtixaanka aqoonta iyo baadhista indhaha, laakiin hubso saacadaha shaqada ee goob imtixaaneed kasta.
3. Raac talaabooyinka 3 ilaa 5 si aad u hesho ruqsadbaaskiil.
4. Marka aad ka gudubto imtixaanka xirfada, waa inaad ku noqotaa ku xigeenka diiwaangeliyaha oo aad u dhiibtaa kaadhka TIPIC ee gaadhi

baaskiilka. Waxaa sidoo kale lagaaga baahan doonaa inaad keento dokumentiyo la aqbali karo (ka fiiri Liistada Dukumentiyada La Aqbali Karo, bogga 3 iyo 4). Ku xigeenka ayaa qaadi doona sawirkaaga, qaban doona lacagta oo kuu samayn doona ruqsadbaaskiil.

5. Marka xirfadahaaga wadista baaskiilku ay kobcaan, la hadal goob imtixaaneed kasta si aad u samaysato balan imtixaan. Marka aad timaad goobta imtixaanka, waxaad keentaa kaadhka TIPIC ee baaskiiladaha oo ansax ahe
6. Imtixaanka xirfada ee awoodaada kaxaynta baaskiilka waxaa qaada imtixaanqaade oo ku qaade meel jidka ka baxsan. Waa inaad keentaa baaskiil jidka sharci ku ah, koofiyad iyo gaashaanka indhaha si loo xidho inta imtixaanka lagu jiro.
7. Kaadhka TIPIC u qaado ku xigeen diiwaangeliye kasta oo codso ruqsadbaaskiil. Liisankani wuxuu ansax noqon doonaa afar sanadguuro dhalasho. Ruqsaddan ujor ayaa la sika qaadaa (si aad u ogaato ajuurada xaadirkan la qaado, booqo www.ohiobmv.com).

SHARCIYADA GAARKA AH EE WADAYAASHA GAADHI BAASKIILKA

- Wadayaasha gaadhi baaskiilka ee ka yar 18 jir waxaa laga rabaa inay xidhaan koofiyada mar kasta oo ay kaxaynayaan gaadiidkan. Koofiyaduhu waa inay buuxiyaan shuruudaha Waaxda Gaadiika ee Federaalka (U.S. DOT).
- Rakaabka waa laga madnuucay gaadhi baaskiilka.
- Gaadhi baaskiilka waa in la mariyaa meel saddex fuudh dhinac midiga ka xigta wadada marka ay macquul tahay.
- Haddii dirawal uu ka yar yahay 16 oo lagu helo inuu galay dambi taraafig, waxay keeni doontaa waayista xuquuqda wadista ilaa uu ama ay gaadho 16.
- Gaadhi baaskiilka waa in si sanadle ah loo diiwaangeliyaa oo ay yeeshaan taariko ruqsadoo gaar ah oo uu soo saaray Diiwaangeliyaha Gaadiidku. Kaliya Gaadiidka uu ansixiyey agaasimaha Waaxda Badbaadada Dadwaynaha ayaa la diiwaangelin karaa.
- Sharciga gobolku wuxuu sheeg in dhammaan codsadayaasha liisanka wadista gaadhi baaskiilku uu sheego haddii ay qabaan curyaanimo jidheed ama maskaxeed marka ay codsanayaan liisanka. Codsadayaasha aan qabin wax caafimaad darro ahi waxay laga yaabaa inay dhamaystaan imtixaanada. Natiijooyinka imtixaanka iyo qoraalka curyaanimadooda waxaa marka dambe loo gudin doonaa Diiwaangeliyaha Xafiiska Gaadiidka, kaas oo u baahan doona warbixino caafimaad oo la mid ah kuwa laga rabo codsadayaasha curyaamiinta ah.
- Sida ay dhigayso awooda laga haysto Golaha Guud, agaasimaha Waaxda Badbaadada Dadwaynaha ee Ohio ayaa sameeyay shuruudaha qalabka e ugu yar ee laga rabo gaadhi baaskiilka. Shuruudahan waxaa ka mid ah:

a. Iskamiinto iyo egsaas shaqaynaya, oo aan lahayn goo'go ama daloolo.
b. Kursi wadaha ah oo aad ugu dhegsan meesha. Oogada kursigu waa in ay ugu yaraan 25 hiish ka saraysaa dhulka.
c. Ugu yaraan hal iyo waxaan ka badnayn laba laydhka dusha ah
d. Laydhka xaga dambe oo leh bikaaco
e. Laydhka biriiga
f. Dhowr giftin oo leh meelo la qabsado kuna yaal waxaan kursiga ka sarayn 15 hiish.
g. Hoon ama qalab kale oo signal la maqli karo leh oo laga maqli karo ugu yaraan meel 100 fuudh ka fog. Siidhi iyo foodhi toona lama oggola.

Si aad u hesho koobiga liis dhamaystiran oo sharciga iyo xeerka gaadhi baaskiilka iyo liiska dhammaan noocyada iyo moodeelada loo ansixiyey iibka Ohio, waxaad waraaq u dirtaa : La Talinta Sharciga, Waaxda Ohio ee Badbaadsanaanta Dadwaynaha, P.O. Box 182081, Columbus, Ohio 43218-2081.

SU'AALAHA & JAWAABAHA XEERKA GAADHI BAASKIILKA OHIO

S: Miyaan u baahan nahay waraaqda lahaanshaha si aan ruqsadtaariko ugu iibsado gaadhi baaskiilkayga?
J: Iyadoo aan la rabin wax waraaq lahaansho ah marka aad taariko u iibinayso gaadhi baaskiilkaaga, waa inaad iibsataa saxanka gaadhiga baaskiilka. Waxaa loo baahan yahay cadayn lahaansho, saxanka liisankana waa in loo cusboonaysiiyaa sanadle.

S: Waxaan ka yarahay 18. Ma khasab baa inaan dhamaysto kooraska waxbarashada dirawalka ka hor inta aanan codsan ruqsadgaadhi baaskiil?
J: Maya. Shuruuda waxbarashada dirawalku ma khusayso codsadayaasha gaadhi baaskiilka.

S: Ma waxaa la iiga baahan yahay inaan xidho koofiyada iyo muraayad ilaalinta indhaha markaan aan fuushan nahay gaadhi baaskiilkayga?
J: Wadayaasha ka yar 18 jir waxaa laga rabaa inay xidhaan koofiyada buuxisa ama kor marta halbeega U.S. DOT iyo gaashaan indhood marka la wada gaadhi baaskiilka.

S: Ma sharci baa in gaadhi baaskiil rakaab lagu qaado?
J: Maya. Sida uu sheegayo sharciga gobolku, ku darista "kursi saaxiib" iyo .... kama dhigto hal gaadhi baaskiil oo ku haboon qaadista laba qof.

S: Wadayaasha gaadhi baaskiilka miyaa looga baahan yahay inay ku istaagaan laydhka cas oo ay adeecaan calaamadaha kale ee wadayaasha?

J: Haa. Wade kasta oo gaadhi baaskiil oo ku guul daraysta inuu adeeco calaamadaha taraafiga ama signalada waxaa dacwayn kara booliska waxaana takhsiiri kara maxkamada---- sida dirawal kasta oo kale.

S: Ma sharci baa in wado banaan lagu fuulo gaadhi baaskiil?
J: Maya. Sharciga gobolku wuxuu madnuucaya kaxaynta gaadhi baaskiilka wado banaan. Waaxda Badbaadada Dadwaynaha waxay si xoogan u doodaysaa in wadayaasha gaadhi baaskiilku ay iska ilaaliyaan dhammaan wadooyinka baabuurta kale inta badan ku maraan xawaare ka badan 36 mph. Madaama xawaaraha ugu badan ee gaadhi baaskiilka Ohio yahay 20 mph, waxaa jira halis dhab ah oo ah inuu dhici karo isku dhac marka xawaaraha gaadhigu dhaafo 35 mph.

S: Ma sharcibaa in qof ka yar 14 jir uu fuulo gaadhi baaskiil taagan meel baarkin ah?
J: Maya. Sharcigu qof kasta oo 14 jir ka yar inuu fuulo gaadhi baaskiil taagan jid wayne ama dhisme gaar ah oo ay isticmaalaan dadwaynuhu ama loo isticmaalo baarkinka baabuurta. Madnuucidaas oo kale waxay qabanaysaa dadka da'doodu ka yar tahay 14 ee aan haysan ruqsad.

S: Wadayaasha gaadhi baaskiilka miyaa laga rabaa in siiyaan xaqa wado marista dadka socda meelaha dadku iskaga gudbo ee wadada?
J: Haa. Qof kasta oo fuushan gaadhi baaskiil waxaa looga baahan yahay in xaqa wado marista siiyo qof kasta oo ka talaabaya cidhif loo tixgalinayo inuu socdo tallow sharci ah--------- xataa haddii aanay jirin xariiqyo tallow oo jidhka lagu sameeyay.

S: Ruqsadayda gaadhi baaskiilka ma loo laali karaa sababo la xidhiidha ku xadgudub sharciga taraafiga?
J: Haa. Maxkamada Ohio waxay leeyihiin awooda ay ku laalayaan ruqsada wade gaadhi baaskiil kasta oo lagu helo xadgudub waddo oo halis ah ama soo noqnoqday. Diiwaangeliyaha baabuurta wuxuu sidoo kale leeyahay awooda uu ku laalayo ama kula noqonayo liisanka qof kasta oo been ka sheegay codsiga ruqsada, si badheedh ah u beddalay ama u buburiyey uqsada, hab khiyaano ah ku helay ruqsada, ama helay ruqsadisagoo jabinaya shuruucda iyo xeerka gobolka iyo qawaaniinta ruqsada gaadhi baaskiilka. Wadayaasha ka yar 16 jir waxay waayi doonaan xuquuqdooda wadiseed ilaa inta ay gaadhayaan da'da 16 haddii lagu helo xataa hal xadgudub oo gaadhi baaskiil ah.

S: Ruqsadayda gaadhi baaskiilka ma u isticmaali karaa inaan ku kaxeeyo mooto iskuutar?
J: Maya. Sharciga Ohio wuxuu mooto iskuutarta ku daraaa baaskiiladaha. Waa in darawalku haystaa ruqsada saxda ah si uu kaxeeyo gaadhiga (oggolaansho baaskiil ama ruqsada baaskiil) waana inuu buuxiyaa shuruudaha sharci ee Masuuliyada Maaliyadeed ee Ohio.

5 - SHARCIGA QALABKA BAABUURTA

Sharciga Ohio wuxuu sheegaya, “Qofna ma kaxayn doono ama ma dhaqaajin doona, ama si badheedha uma oggolaan doono in la wado ama la mariyo, waddo kasta, gaadhi kasta ama dhowr gaadhi oo isku xidhan oo ku jira xaalad aan badbaadsanayn taas oo khatar ku ah qof walba”. (ORC 4513.02) Ilaalada Waddooyinka Gobolka Ohio ayaa fuliya baadhsita baabuurta iyagoo isticmaalaya nidaamka si ay u baadhaan baabuurta aan badbaadsanayn. Haddii cilado farsamo laga helo, wadaha gaadhiga waxaa laga yaabaa in la siiyo ogeysiis isla markaana la siiyo waqti dib uu ugu soo dayactiro, haddii kale wadaha waxaa la gaynayaa maxkamad. Istiikar ama waraaq in la baadhay ah ayaa lagu dhajnayaa gaadhiga ka gudba baadhista.

WALXAHA LA HUBIYO MARKA BAADHISTA LA SAMAYNAYO

Shookaanta

Waa la baadhi doona si loo hubiyo:

- In isku fadhiga shookaantu si caadi ah u shaqaynayo;
- In aan shookaantu si aad ah u ciyaarayn;
- In birta wareejisa quwada mishiinka ee duubani tahay mid badbaadsan; iyo
- In aanay shokaantu tigtignayn ama qaloocsanyn.

Taayirada

Taayiradu waa inay ugu yaraan qotodoodu tahay 1/16 ee oogada waddada. Waa inay xor ka ahaadaan kurtimaha waawayn iyo taagaga, dhaawaca biriiga ama xanafta taayirka.

Wareeega iyo Geesaska

Geesuhu waa in aanay si xun u qaloocin ama u laabnayn. Boolasha luguhu waa inay si adag u xidhan yihiin.

Biriiga

Biriiga seerfiska: Biriiga asalka ah ee qunyarinta, joojinta iyo xukumida baabuurka.

Biriiga Degdeg ah: Nidaamka Biriigu wuu ka madax banaan yahay biriiga seerfiska ee loo isticmaalo joojinta ama qabashada gaadhiga ee xaaldaha degdega ah ama markaa baabuurku baarkin yaalo.

Kaydka Baydalka: Inta baydalka ku hadha kaydka marka baydalka lagu qabto meesha “ marka biriiga la qabto”.

Biriigyada waa la baadhi doonaa si go'aan looga gaadho:

1. Inuu jiro baydal biriig oo ku filan. Haydarooliga biriiga waxaa la hubsan doonaa gaadhiga oo taagan. Dirawalka wuxuu awoodi doonaa inuu joogteeyo biriiga baydalka ee xooga xagta ee caadiga ah (40-60 bownd) ee hal daqiiqo.
2. Inuu jiro biriig gaadhi oo ku filan. Gaadhiga oo taagan iyo baydalka biriiga oo lagu celiyey xooga cagta ee dhexdhexaadka ah (40-60 bownd ee nidaamka aan awooda lahayn iyo 15-20 bownd oo ah nidaamka awoodu taageerto), waa inuu jiraa ugu yaraan 1/3 ee guud ahaan baydalka socodka (faahfaahinta warshada) ee nidaamka aan awood lahayn ku hadhsan. Nidaamyada awooda leh, ee la tijaabiyey baabuurka oo socda, waa inuu jiraa 1/5 ama ka badan oo ah baydalka socodka ee nidaamka awood leh ku hadhsan marka baydalka ku cadaadsan yahay awooda cagta ee caadiga ah.
3. Biriiga seerfisku wuxuu qaban doonaa baabuurka heer walba iyo rar kasta, waa haddii jidku aanu lahayn baraf ama walax jilicsan. Biriiga degdega ah waa inuu gaadhiga ku qabtaa meesha uu joogsado marka 2/3 leewarka la isticmaalo, waana inuu joojiyo gaadhiga marka biriiga seerfiska shaqayn waayo. Saliidaha biriiga iyo geerka waxyaabaha la sameeyay si loogu iibiyo Ohio waa inuu buuxiyaa shuruudaha uu dajiyey agaasimaha Waaxda Badbaadsanaanta Dadwaynaha.

Laydhka hore

Gaadhi kasta oo aan ahayn baaskiil wuu inuu ku qalabaysan yahay ugu yaraan laba laydh oo kuwa hore ah oo shaqayna, oo mid walba u dhow yahay cidhifyada gaadhiga. Baaskiilku waa inuu ku qalabaysan yahay ugu yaraan hal ama wax ka badan oo laydhka hore oo shaqaynaya.

Laydhka dambe

Gaadhi kastaa waa inuu soo bandhigaa ugu yaraan laydh dambe, oo bixinaya laydh cas oo ka muuqda 500 fuudh meel u jirta raarka. Gaadhi kastaa waa inuu ku qalabaysan yahay mid ama wax ka badan oo laydhka joogsada ah oo bixinaya laydh cas, oo ka muuqanay 500 fuudh meel u jirta raarka markasta oo biriiga la qabto.

Laydhka Iftiimiya taarikada

Baabuur kastaa waa inuu ku qalabaysan yahay laydh cad oo shaqaynaya oo lagu xidhay raarka taarikada gaadhiga.

Casaan soo celiyayaasha

Baabuur walba oo aan ahayn cagafta ganacsiga, kaas oo uu ku dhegsan yahay is-jiid, wuxuu raarka ku lahaan doonaa laydhka dambe ama si gaar ah u lahaan doona, laba laydh cas celiyayaal ah.

Midabka laydhka

Baabuurna waa in aanu yeelan laydh aan midabkiisu ahayn caddaan ama cambar ku yaala xaga hore marka laga reebo kuwa ku shaqaynaya

oggolaanshaha gaarka ah, baabuurta badbaadsanaanta, gaadiidka degdega ah, baabuurta fadhiga, baabuurta aasaska iyo qalabka dayactirka.

Signalka Leexashada

Dhammaan baabuurta la sameeyay wixii ka dambeeyay Jeenawari 1-deeda, 1954 waa inay ku qalabaysan yihiin laydhka leexashada oo shaqaynaya kana muuqda xagga hore iyo xagga dambe. Signalka leexashadu waa inuu ka muuqdaa fogaan aan ka yaran 300 oo fuudh dharaarta caadiga ah. Signalka leexashada waa in la isticmaalaa marka loo leexanayo bidix ama midig, si aad u beddasho jihada waddada, ama si aad u badasho haadka marka aad marayso waddo dhowr haad ah. Waa in laydhka leexashada loogu leexdo bidix ama midiga, si loo badalo jihada wadada, ama si loo badalo haadka wado dhowr haad ah. Waa in hore loo shidaa dhinaca ama jihada loo leexanayo (ugu yaraan 100 fuudh).

Muraayada Badbaadsanaanta

Dhammaan muraayahada baabuurtu waa inay ahaadaan kuwo aan lahayn midab ama fasaq, dilaac iyo xanibaado aan la ogalayn.

Egsaaska

Baabuur kastaa oo qarxiye mishiin lihi waa inuu mar walba leeyahay egsaas kaas oo xaaladiisu fiican tahay isla markaana shaqaynaya. Baabuurna waana in aanu lahaan dalool iskamiinto, dhaafiye ama qalab la mid ah oo soo saaray qaac fara badan ama gaas, ama aanu oggolaan in kimiko u gudubto egsaaska qasabada ama iskamiintada. Baabuurna waana in aanay jirin si kale oo uu qiiq u soo saaraa ama gaas kale oo khatar ah, oo aan ka ahayn gaasaska caadiga ah ee uu soo saaro egsaaska dab qarxiyaha mishiinka hagaagsan. Baabuurna, xataat baaskiiladaha, waana in aanu lahaan egsaas soo saaraya qiiq badan ama qaylo aan caadi ahayn. Dhammaan baaskiiladuhu waa inay ku qalabaysnaadaan iskamiitooyin leh suxuun sida sharcigu sheegayo. Every motor vehicle shall at all times be equipped with a standard muffler for that type of vehicle or one that meets all the requirements above.

Muraayada Raarka

Baabuur walba waa inuu ku qalabaysnaadaa muraayad ku taal oo tusta wadaha muuqaal waadix ah oo waddada ilaa raarka ah.

Masaxaadaha Muraayada hore

Gaadhi walba waa inuu ku qalabaysnaadaa qalab ka nadiifiya roobka, barafka ama qoyaanka kale ee muraayada hore. Waa inay ahaataa mid si fiican u shaqaynaysa, loona sameeyay qaab dirawalka ka shaqaysiin karo. Gaadhi kasta oo la soo saaray Jeenawari 1, 1968 waa inuu , lahaadaa masaxaada muraayda.

Hoonka iyo Qalabka Digniinta

Baabuur walba waa inuu lahaadaa hoon si fiican u shaqaynaya, oo awood u leh inuu soo saaro dhawaq iyo maqal marka uu caadi yahay, fogaan ugu yaraan ah 200 fuudh. Baabuurna marka laga reebo, badbaadada dadwayanay iyo baabuurta gargaarka degdega ahh, waa in aanu yeela siidhi, foodhi ama jalas. Hoonka waa in si loogu aqoonsan karaa inuu yahay hoon gaadhi.

Qaybaha Jabay

Baabuurna waana in aanu yeelan ama loo oggolaan inuu yeesho wax ka soo jeeda, wax jaban oo af fiiqan ama qayb gaadhiga ah oo khatar ku qofka gaadhiga u soo dhawaada.

QALABKA KALE

Sharciga Bambarrka - Sharciga Ohio wuxuu u baahan yahay in dhammaan baabuurtu ku qalabaysan tahay bambarro, haddii ay lahaayeen markii la sameeyay. Dhererka la rabo ee sharciga ahi wuxuu ku xidhan yahay nooca gaadhiga iyo culayska guud. Xadka bambarrada baabuurta rakaabku ee la beddelay waa 22 inji oo ah laga bilaabo bambarka hoose illaa dhulka, bambarka hore iyo ka dambeba. Gaadiidka culayskoodu yahay 10,000 oo bownd ama wax ka badan waa in ay la xidhiidhaan Ilaalada Waddooyinka Gobolka Ohio oo laga wici karo (614) 466-4993 si macluumaad dheeraad ah loo helo.

Bilig Bixiyayaash - Bilig bixiyayaasha waxaa laga yaabaa in la isticmaalo marka gaadhi lagaga tago meel wadada agteeda ah.

Suunka Badbaada - Dhammaan baabuurta la sameeyay Jeenawari 1, 1966, aa inay ku qalabaysan yihiin ugu yaraan laba suun badbaado oo xaga hore ah. Waxaa loo baahan yahay in macmiilku iyo imtixaanqaaduhu ay xidhaan suunka badbaadada, iyo hawl galinaya dhammaan waaxaha, inta lagu jiro wadada iyo imtixaanka dhaqaajinta. Xeerkan waxaa ka reeban dhammaan moodeelkii sanadkii 1962 iyo baabuurta ka sii horaysay ee aan lahayn suunka badbaadada, baaskiiladaha, iyo gaadhi baaskiilka.

Xajiyayaasha Caruurta - Fiiri " Xajiyayaasha Caruurta" Cutubka 6, boga 40aad.

Taayirada Kurtinta leh - Taayirrada kurtinta lehi waa sharci Ohio laga bilaabo Noofambar 1 illaa Abriil 15.

Hadhka daaqada - Qadarka gudbinta iftiinka ee baabuurta loo oggol yaha waa :

- Muraayada hore : Hadhku waa inuu oggolaadaa boqolkiiba inuu gubiyo boqolkiiba 70. Heerkani wuxuu u dhigmaa qadarka caadi ahaan ay muraayaduhu gudbiyaan marka gaadhigu cusub yahay.
- Dariishadaha dhica ee kursiga hore darwalka/rakaabka - Qallinka hadhka muraayadda waa inuu gudbiyaa 50 boqolkiiba, oo lagu daray

ama laga gooyay boqolkiiba 3. Wadayaash-u waa inay wacaan Ilaalada Wadooyinka meesha ugu dhow ee ay joogaan koox baadhiseed si ay u eegaan haddii daaqadahoodu ay waafaqsan yihiin sharciga. Xadgudubka sharciga waxaa loo tixgelinayaa inuu yahay dambi sahlan, oo takhsiirtiisuu tahay ilaa $100.

SHAHAADADA E-CHECK

E-Check waa magaca tijaabada qaac sii-daynta Ohio. Barnaamijkan baadhista diikhowgu waxaa loogu talogalay inuu kordhiyo tayada hawada ee degmooyinka Ohio. Degmooyinkani waa: Cuyahoga, Geauga, Lake, Lorain, Medina, Portage iyo Summit.

Shahaadada E-Check ayaa laga yaabaa in loo baahdo kahor inta aan gaadhi laga diiwaangelin degmooyinka. Guud ahaan, inta badan baabuurta aad diiwaangelinaysaa marka u horaysa waa in la baadhaa. Marka la cusboonaysiiyo, baabuurta moodeelka sanadkoodu kinsi yahay iyo moodeelada lambarkoodu dhaban yahay waxaa la baadhaa marka taariikhda dhicistu tahay sannad kinsi ah. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku sahabsan Barnaamijka E-Check, kala xidhiidh 1-800-CAR-TEST.

6 - SHARCIGA TARAAFIGA

Aqoonta sharciga Ohio ayaa kaa caawin doona inaad ka gudubto imtixaanka oo aad noqoto dirawal wanaagsan.

HAADADKA

Dhinaca midigta mar

Mar dhinaca midigta ee wadada marka laga reebo:

1. Marka aad dhaafayso ee aad waydaaranayso baabuurta kale oo kaa horeeya.
2. Marka aad marayso wado u qaybsan saddex haad ama wax ka badan.
3. Marka aad marayso wado loogu talo galay oo lagu dhajiyey calaamadaha hal-wado oo kaliya.
4. Marka uu kaa leexiyo sarkaal booliis ah ama qalab kaantaroolka taraafigu.
5. Marka xanibaadi ay daruuri ka dhigto inaad marto badhtanka bidixda. Sii midigta dhammaan baabuurta u soconaysa jihada saxda ah ee qaybta wadada ee aan la xanibin.

Wadada haadadka badan leh

Marka wado u qaybsan tahay afar haad iyo wax ka badan oo calaamadsan, ama meesha taraafiga dawlada hoose uu si sharci ah ugu socdo laba layn ama wax ka badan oo isku jiho ah, waxaa qabanaya sharcigan soo socda:

- Baabuurka waxa la marin doonaa meel inta suurtogalka ah u dhow hal haad taraafig; waa inaan laga dhaqaajin haadka ilaa darawalku marka hore go'aan ka gaadho in dhaqaaqaasi uu badbaadsan yahay. Waa in

bidhbidha leexadka la ridaa ka hor inta aan haadka la badalin.

- Wado u qaybsan saddex haad, gaadhina waa in aan la wadin haadka dhexda marka laga reebo in haadka dhexda loogu si khaas ah loogu talogalay baabuurta u socota jihada darawalka u soconayo.

Taraafiga Gaabinaya

Baabuurta u socota si qumaatisan baabuurta kale waa inuu isticmaalaa haadka midigta ee la heli karo ama uu aad ugu dhawaadaa dhinaca midigta ama cidhifka wadada.

Baabuurta Gargaarka Degdeg ah

Marka uu ku soo gaadho gaadhi gargaarka degdeg ah oo shidaya laydka biligta ah iyo signal la maqli karo, darawalku waa inuu si dhakhso ah ugu dhaqaaqaa dhinaca midigta ee wadada ama jidka oo uu istaagaa. Darawaladu waa inay ka taxadiraan inay xanibaan isgoysyada. Dhammaan baabuurtu waa inay baaqi ku ahaadaan halkan ilaa iyo inta gaadhiga gargaarka degdegi ahi dhaafayo ama marka sarkaal sharci fulin ahi dhinac kale kuu leexiyo.

Marka baabuurka gargaarka degdeg ahi uu istaago wadada agteed isagoo laydhkiisa biligtu baxayo, darawalada baabuurta dhaafaysaa waa inay yareeyaan xawaarahooda. Intaa waxaa sii dheer, mar kasta oo ay suurtogal tahay, waa in darawalku badalaa haadka si uu uga dhaafo gaadhiga gargaarka degdega haad aan ku dhegsanayn gaadhiga meesha gargaarka degdega ahi taagan yahay (ORC 4511.213).

Wadada Qaybsan

Baabuurna waa in aan la dul marin, laga gudbi ama la dhex marin meel kasta oo kala qaybinaysa, caqabada kasta ama qay wadada ah marka laga reebo meel banaan ama iska talaab ay maamulku sameeyeen. Meelahan kala qaybinaya, xanibaadahan ama qaybahan waxaa laga yaabaa in loo buuxiyo gargaar degdeg ahaan ama iyadoo la raacayo amar booliiska ka soo baxay.



LEEXASHADA

U leexashada dhinaca midigta

Midig u leexo adigoo inta suurtogalka ah u haysanaya cidhifka wadada.

Midig u leexashada casaanka

Halkan Ohio, waa sharci in midigta loo leexdo kadib marka ishaarada casaanka ah ee taraafiga aad ku istaagto, laakiin waa keliya waa marka:

1. Aanay jirin calaamad lagu dhajiyey isgoyska taas oo ka madnuucaysa midig u leexashada casaanka;
2. Aad wada joogsatay ee aad u oggolaatay gaadiidka iyo lugeeyayaasha inay ku sii socdaan isgoyska;
3. Aad si fiican u arkayso in leexadka la dhamaystiri karo.

Midig u leexo

Dirawalka baabuur doonay inuu bidix uga leexdo:

- Is goys halkaas oo baabuurtu ay u socoto labada dhincba ee wado kasta oo galaysa is goysku ay ka dhigayso habka kala badhka midigta u dhow laynka dhexda. Waxaa loo leexan doonaa haadka midigta ee jidka u dhow laynka dhexda.
- Isgoys baabuurtu ku xaniban tahay hal jiho oo mid ama laba wadooyinka ayaa habka ka dhigays haadka bidixda fog. Waxaad u leexataa haadka bidixda u koorneeya ee baabuurta jihaadaasi loo oggol yahay.
- Waxaa looga baahan yahay inuu dhinaca midigta u baneeyo baabuur kasta oo kaga imanaya jihada kale. Ka hor intaa aanu u leexan dhinaca bidix, dirawalku waa inuu sugaa baabuurta soo socota si isgoysku u banaanaado. Waxaa laga yaabaa inaad isgoyska hore ugu socoto si aad u muujiso rabitaan leexasho, waa haddii aan qalab taraafig arintan mamnuucayn.

SAWIRKA BOGGA XIGA

HABABKA SAXDA EE BIDIX U LEEXASHADA



Jid afar-khad ah oo leh khad
ku leexanaya jid laba-khad ah

Ka imanaya jid laba-khad
ah ilaa mid afar-khad ah



Ka imanaya jid afar-khad
ah ilaa mid laba-khad ah

Ka imanaya jid afar-khad
ah ilaa jid dhan keliya u socda

Ka imanaya jid dhan keliya u
socda ilaa mid dhan keliya u socda

Ka imanaya jid dhan keliya u
socda ilaa mid afar-khad ah

Bidix u leexashada casaanka

Xaalado kooban mooyaane, waa sharci in bidix loo leexdo kadib marka lagu joogsado laydhka cas ee ishaarada. Casaan ku leexasho bidix waxaa laga yaabaa in laga sameeyo haadka bidixda fog ee wadada jihada kaliya ah ilaa bidixda fog ee wado jiho kaliya ah, waa haddii aanay jirin calaamad talaabadan madnuucaysa. Sharciga ayay ka soo horjeeda in casaan bidix loogu leexdo marka laga reebo u leexashada waddo jiho kaliya ah ilaa mid kale. Marka aad samaynayso leexadka noocan ah, waa inaad marka hore istaagtaa oo aad u oggolaataa baabuurta ku dhaafaysa iyo dadka inay isgoyska baneeyaan ka hor inta aanad hore u socon.

Bidh-bidhe (Signal)

Bidhbidhe leexasho waa in la ridaa ugu yaran 100 fuudh ka hor leexashada. Tan waxaa lagu guulaysan karaa iyadoo la isticmaalayo bidh-bidhaha gaadhiga ama bidh bidhe gacanta ah.



JOOGSASHADA

Dirawal waa inuu joogsadaa:

1. Halka ka dambaysa layn kasta oo joogsi ama socod kaga gudubka ee meel kasta oo calaamad joogsi ku taal ama ishaaro taraafig oo cas.
2. Halka ka dambaysa xariiqa joogsiga ama socod kaga gudubka ee ishaaro taraafig kasta oo casaan ku leexashada ama bidixda ama midigta la oggol yahay. Dirawalka waxaa laga yaabaa inuu sii wato casaan ku leexasho sharci ah kadib marka uu istaago ee dhinaca midigta uu u baneeyo dhammaan baabuurta dhaafaysa iyo dhammaan dadka ka gudbaya wadada.
3. Laydh cas oo ishaaro oo baxaya, kaas oo u oggolaanay gaadiidku in aanay joogsan.
4. Wado ag socodka, ama haddii aanu jirin ag socod, meesha wadada laga galayo, marka aad ka soo baxayso surin, wadada gaarka ah ee ganacsiga ama meel la degan yahay. Darawaladu waa inay dhinaca midigta siiyaan dadka wadada dhinaceeda socda.
5. Ka hor inta aanad gelin isgoys haddii aanay jirin meel ku haboon oo wadada dhinaceeda kale ahi oo gaadhi la dhigo. Sharcigu wuu qabanayaa haddii ishaaradu sii dayso iyo haddii kaleba.
6. Marka uu soo gaadho baabuur badbaado dadwayne (sida gaadhi booliis, dab-damis ama ambilaans) shidanay laydhka oo bixinaya dhawaaq digniin ah, haddii aan u socon jihada kaa soo horjeeda ee wado kala qaybsan. Dirawaladu waa inay u dhaqaaqaan inta ugu fog ee suurtogalka ah ee dhinaca midigta ee wadada oo ay halkaas baaqi ku ahaadaan ilaa gaadhiga gargaarka degdega ahi dhaafayo.

Ka Joogsiga Baska Iskuulka

Marka baska iskuulku joogsado waddo si uu u qaado rakaab ama u dhigo, xeerkan soo socdaya ayaa qabanayna dirawalada kale ee wadada ku jira:

1. Marka dirawalka bas iskuul joogsanayo, wuxuu ama waxay shidaa afar laydh oo cambar ah --- laba xaga hore ah iyo laba raarka ah. Laydhkani wuu soconayaa ilaa gaadhiga joogsanayo. Baabuurta kale xiliga hordhaca ah loogama baahna inay istaagaan ee digniinta sideeda laydh laakiin waa inay isu diyaariyaan joogsiga isla marka basku istaago. Marka basku wada istaago, afarta laydh ee cambarka ahi way damaan oo afar laydh oo cas - laba xaga hore ah iyo laba xaga dambe ah --- ayaa bilaaba inay in bidhaamaan inta caruurtu korayso ma ka dagayso gaadhiga. Intaa waxaa soo raaca, gacan joojin ah oo leh laydh cas oo iftiimaya ayaa si iskeed ah uga soo baxda daaqada dhinaca bidix ee gaadhiga.
2. Haddii gaadhigu istaago jid ama wado leh haadad ka yar afar haad, dhammaan baabuurta baska kaga soo beegan labada dhinac waa inay istaagaan ugu yaraan 10 fuudh meel u jirta raarka hore ee baska oo ay halkaa joogaan ilaa basku ka dhaqaaqayo ama dirawalka baska uu signal u bixiyo baabuurta kale si ay u dhaqaaqaan.
3. Haddii basku la jooyi wado ama jid wado leh afar ama ka badan haad, kaliya baabuurta la jihada ah baska waa inay istaagaan.

Wadayaasha basaska iskuulku haddii ay rumaysan yihiin in dirawal si sharci daro ah u dhaafay baska taagan waxay, haddii ay suurtogal tahay, u sheegi doonaan liisanka iyo taarikada gaadhiga hay'ada sharci fulineed ee maamusha meesha xadgudubku ka dhacay. Hay'adda sharci dajintu waxay isku dayi doontaa ina go'aamiso aqoonsashada dirawalka, haddii la aqoonsadana, soo sheegista lambarka taarikada ee dirawalka baska ayaa noqon karta sabab maxkamad loola tiigsado. Haddii la aqoonsan waayo dirawalka waxay keeni doontaa in hay'adda sharci fulintu u dirto waraaq digniin oo sheegaysa in gaadhi u diiwaangashani la soo sheegay inuu si sharci daro ah ku waydaartay bas iskuul oo taagan.

Inta laga fogaanayo

Fogaanta aad u jirsanayso inaad gaadhigaga joojiso waxay ku xidhan tahay waqtigaaga jawaabta, xawaaraha aad ku socoto, xaalada biriigaaga iyo xaalada waddada (qoyaan, qalayl, baraf). Dirawalku waa inuu u jirsadaa fogaan ku filan isaga ama iyada iyo gaadhiga ka horeeya. Qaar ka mid ah culimada waxay kula talinayaan dirawalada inay u jirsadaan in gaadhi istaago karo xawaarihii kasta ee 10mph ahba Kuwa kale waxay ku talinayaa "xeerka saddexda il-bidhiqsi". Daawo gaadhiga kaa horeeya oo dhaafaya waxyaabo taagan, sida birta laydhka, adigoo tirinaya " kun iyo kow, kun iyo labo, kun iyo saddex." Haddii aad birta laydhka dhaafto ka hor inta aanad odhan "saddex," aad ayaad ugu dhowdahay waana inaad hoos u dhigtaa xawaarahaaga. Cimilada xun, inta aad u jirsanayso ka dhig afar ama shan daqiiqo.

U BANAYNTA

Dirawalka waa inuu siiyaa dhinaca midigta:

1. Marka ay ku hagayso calaamada siintu.
2. Marka aad ka gudbayso ama wado wayn ka soo galayso mid yar oo aan inta badan la isticmaalin.

3. Gaadhi kaga imanaya dhinaca midigta isgoyska laba wado oo isku mid ah qalab kaantarool taraafig la'aantii.
4. Qof maraya meesha lug kaga gudubka oo calaamadan, ama aan calaamadsanayn ee isgoyska.
5. Marka uu ku soo gaadho gaadhi badbado dad wayne (fiiri "joogsashada" 6".
6. Dhammaan baabuurta ka tirsan kuyuuga baabuur aas. Baabuur kasta oo ka tirsan kuyuuuga aaska waa inay shitaan laydhkooda hore oo ay sitaan calan basali iyo cadaan ah.
7. Baabuurta soo socota marka ay bidix u leexanayaan.
8. Baabuurta soo gaadhaysa meel isgoys ah ka hor inta aanay u casaan uguleexan dhinaca midigta.

WAYDAARASHADA

Maraykan oo dhan baabuurtu waxay maraan dhinaca midig ee wadada. Sharciga Ohio oggol yahay wadada hal layn oo taraafig ku leh jiho kasta, darawaladu waa inay isticmaalaan kala badhka dhinaca midig ee wadada lagu socdo. Xaalada mucayin ah qaarkood, si kastaba ha ahaatee, wadyaasha baabuurta waxaa loo oggol yahay inay dhaafaan baabuurta aayarka u socota ee la jihada ah. Inta badan way ka badbaadsan tahay waanay ka waafaqsan tahay sharciga in bidixda laga waydaarto baabuurta gaabinaysa. Duruuf kasta, sharcigu wuxuu u baahan yahay in dirawalku rido signal ah inuu waydaaranayo isagoo isticmaalaya bidh bidhaha leexashada ka hor inta aanu dhaafin.

Bidix ka waydaarashada ama dhaafida

Marka aad dhaafaysa baabuur u socota dhinaca aad u jeedo, baabuurna la marin maayo dhinaca bidixda badhtamaha wadada haddii aan dhinaca bidix la wada arkayn oo aanu soo socon wax baabuur ahi. Waa in dhaafista la dhamaystiraa iyadoo aan la dhexgalayn hawlsamida fayow ee baabuurta kaa hor imanaysa ama aan gaadhi meesha laga saarayn.

Dhaafista lama oggola xaaladahan soo socda:

1. Markaa aad soo gaadho laab wadada ama meel wadudu ka qaloocan tahay taas oo aragii dirawalka ee baabuurta soo socota ay xaniban tahy oo dirawalku aanu arki gaadhi ku soo jira xagii uu ka waydaaran lahaa.
2. 100 fuudh oo biriish ah gudahood, ama god marka araga dirawalka la dhexgalo.
3. Markaad isgoys u jirto 100 fuudh.
4. Markaad 100 fuudh u jirto meel wadadu mid tareen kaga dhacdo.

Xadidaada kor ku qorani ma khusayso baabuurta soconaysa jid hal jiho ah ama wado leh laba ama wax ka badan oo haad ah oo u jeedo jiho keliya.

Marka aad ka dhaafayso dhinaca midigta, sharcigu wuxuu u baahan yahay in dirawalka dhaafaya gaadhiga kale sameeyo arimahan:

1. Qabto hoonka si uu ugu digo baabuurka uu dhaafi rabo.
2. Uu shido bidh bidhe dhaafid ah.
3. Uu dhinaca bidixda ka dhaafo baabuurka uu dhaafayo fogaan badbaadsan oo uu ku soo noqdo dhinaca midig kaliya marka gaadhiga waydaaranayaa uu si fiican uga dhamaada gaadhiga la waydaaranayo.
4. Ku noqoshada haadka midig sida ugu dhakhsaha badan isla marka waydaarashada la dhamaystiro iyo ka hor inta aanu 200 mitir u jirsan gaadhi kasta oo soo gaadhaya.

Marka dirawal uu dhaafayo gaadhi kale, sharcigu wuxuu rabaa in dirawalka baabuurka aayar socdaa uu sugo xawaare joogto ah oo uu ku ekaado dhinaca midig ee wadada ilaa dirawalka kale si fiican u dhaafo.

Ka dhaafida dhinaca midigta

Gaadhi wuxuu mid kale ka dhaafi karaa midigta xaaladahan soo socda oo kaliya:

1. Marka gaadhiga uu dhaafayaa uu rabo inuu bidix u leexdo.
2. Marka wadadu balaadhan tahay ee ku filan tahay in laba ama ka badan oo layn oo baabuur gaadhiga wax dhaafaya jihaddiisa ay jiraan.

Labadaa xaaladood midkood, waxaa muhiim ah in dirawalka gaadhga wax dhaafayaa marka hore go'aansado in gaadhiga aayarka si socda si nabadqab ah lagu waydaaran karo, waana in aan dirawalku ka bixin wadada si uu u dhaafo gaadhiga aayarka socda.

XADIDAADA XAWAARAHA

Baabuurta laguma wadi karo xawaare ka badan ama ka yar inta macquulka ah, taas oo ku xidhan baabuurta, wadada iyo cimilada. Dirawalku waxaa laga yaabaa inuu gaadhiga xukumi karo si uu awoodo inuu joojiyo fogaan la hubo.

Waa sharci daro in lagu dhaqaajiyo xawaare ka badan:

- 15 mph dhammaan surindada.
- 20 mph marka la dhaafayo dhisme iskuul ama garoon (aaga iskuulka) xiliyada biririfta iyo marka caruurtu tagayso ama imanayso dugsiga ee saacadaha furista iyo xidhista, iyo marka calaamadaha iskuulka ee 20 mph la taago.
- 25 mph dhammaan qaybaha kale ee shirkada xaafadaha, marka laga reebo wadooyinka gobolka iyo wadooyinka ka baxa ganacsiga degaamada.
- 35 mph dhammaan wadooyin gobolka ama jidadka marka laga reebo wadooyinka galistooda la xukumo ee shirkada dawlada hoose ama ka baxsan meheradaha degmooyinka.
- 50 mph ee wadooyinka gobolka ee shirkadaha dawlada hoose ee ka baxsan degmooyinka magaalda, haddii aan calaamad xawaare ka hooseeya 50 lagu qorin.
- 55 mph (xawaaraha mar walba ugu sareeya) ee baabuurta culayskoodu ka badan yahay 8,00 oo bownd iyo basaska aan ganacsiga ahayn.

- 55 mph (xawaaraha ugu sareeya) ee dhammaan wadooyinka waawayn.
- 60 iyo 65 ee wadooyinka waawayn ee baabuurta culayskoodu yahay 8,000 ama ka yar iyo basaska ganacsiga.
- 65 mph mar walba wadooyin baaan ee dhinacyadu sabadaysan yihiin shirkadaha dawlada hoose haddii xawaare ka yar si muuqata aan loogu qorin calaamad.

Xawaaraha Ugu Yar

Qofna kuma kaxayn karo gaadhi xawaare aad u hooseeya oo xanibaya socodkii caadiga ama macquulka ahaa baabuurta, marka laga reebo in xawaare hoose lagama maarmaan u yahay hawl galka badbaadsan ama lagama maarmaan u yahay ku dhaqanka sharciga. Calaamadaha xawaaraha xaddidan waxa lagu dhejiyaa jidadka waawyn ee gelitaankooda la kontoroolo.

Ku Borotanka Wadooyinka Dadwaynaha

Dirawalna kama qayb qaadan karo ku boroton waddo guud. Tartanku wuxuu noqonayaa laba gaadhi ama ka badan, oo meel ka wada bilaaba oo u dhaqaajiya si tartan ah oo midba kan kale ka badinayo; mid ama ka badan oo wado caadi ah; min meel ilaa meel kale, marka baabuurta loo qabto waqti xawaare. Dadka si uun u caawinaya u isticmaalka baabuurta boroton noocan ah waxay lagu qaadayaa dambi la mid ah kan kuwa ku jira tartanka.

IS-GOYSYADA TAREENKA XADIIDKA

Waaxda Waddooyinka (jidadka) iyo sharikadaha tareenada ayaa si cad ugu calaamadeeyey is-goysyada tareenka calaamado dadweyne oo digniin ah. Calaamadahaas digniinta ahi waxay uga sii gigaan darawaliinta inay iska fiiriyaan, dhagaystaan oo qaboojiyaan baaburta.

Qalabka Digniinta

Calaamadaha Jidka, Calaamad, ka kooban “X” iyo xarfaha “ RR” ayaa laga yaabaa in lagu qoro wadada ugu dhaw meelaha talowga.

Talowga wadada tareenka Calaamado ayaa laga helayaa meelo badan oo dadwaynuhu ka talaabo. Calaamadahan waa in loo adeecaa sida calaamadaha siinta. Darawalku waa inuu qaboojiyaa oo uu u diyaar garoobaa inuu joogsado markuu arki ama maqlo tareen. Haddii uu jiro hal gaadhi wax ka badan, calaamad iskatalaabta ka hoosaysa ayaa sheegaysa tirade baabuurta gudbaysa.

Shidista singnalada laydhka cas Waxaa loo isticmaalaa calaamada talowga ee meelo badan oo ay isku dhaafaan wadooyin gaadiidka iyo tareenadu. Dirawaladu waa in aanay joogsan meel aan ka dhawayn 15 fuudh isla markaana aan ka dheerayn 50 fuudh talowga marka laydhka casi baxayo. Laydhka baxaya macnihiisu waxaa weeyi in tareen soo socdo. Haddii uu jiro hal gaadhi wax ka badani, hubso inay dhamadeen baabuurta oo dhani ka hor int aanad talaabin.

Albaabka Waxaa loo isticmaalaa signalada laydhka cas ee meelo tallow ah. Joogso marka laydhka cas bilaabo inuu baxo iyo ka hor intaa aan albaabku yarayn haadka baabuura, ha uga dhawaan 15 fuudh hana ka fogaan 50 fuudh talowga. Ha isku dayin inaad albaabka ka talowdo ilaa albaabka la dalaco oo laydkhuna joojiyo bixista.

Calaamadaha joogsashada Waxay sheegayaan in baabuurtu dhammaan joogsato oo isku banayso.

Baabuurta ay tahay in joogsadaan ka hor inta aanay ka gudbin waddo tareen oo ka baxsan dawlada hoose

1. Gaadhi baaskiilada sida rakaab soo kiraystay
2. Dhammaan basask dugsiga
3. Gaadiidka sida ashyaada ama walxaha looga baahan yahay in lagu dhajiyo boodh halis sheegaya sida ku cad 49 C.F.R. Parts 100-185

Sharcigan ma khuseeyo ka gudbidda ka gudbidda iska talowga jidka iyo wadda tareenka ee dawlad hoose ama baabuur laga tagay, wadooyinka talowga tareenka, talowga dhinac iyo talowga baabuurta warshadaha marka Gudida Ma Huraanka Ohio ay oggolaatay oo ay ansixisay gudbidda baabuurta nooan ah iyagoo aan samaynayn joogsigii loo baahnaa.

Marka la joojiyo, wadaha mid kasta oo ka mid ah baabuurta kor ku xusan waa inuu ka dhagayaysta daaqad furan oo uu eegaa labda jihaba bal inuu jiro tareen ku so dhow iyo calaamado tilmaamaya tareen soo socda, waana inuu u socdaa si taxadar leh.

Siyaabaha Badbaadada Talowga Wadooyinka Tareenka

1. Mar walba tareen filo. Tareenadu ku ma socdaan jawdal joogto ah.
2. Ha ku xanibmin tallow. Waligaa meesha laga gudbo ilaa aad hubto inaad ka dhammaan karto baabuurta oo dhan. Marka aad gudbayso, hore u soco, khaasatan haddii aad aragto tareen kugu soo socda.
3. Waligaa ha isku dayin inaad marto albaab la soo dajiyey, waa sharci daro waana halis.
4. Fiiri tareen labaad. Marka aad joogto meel khadad badani isku dhaafayso, hore ha u socon ilaa aad hubto in tareen kale aanu soo socon khad kale, gaar ahaan mid ka imanaya jihada kale.
5. Haddii gaadhigaagu ku xumaado inta aad ku jirto wadad talowga oo tareen ku soo gaadhayo iska fur suunka gaadhiga, ka deg baabuurka, oo aad uga uga fagow inta aad ka carari karto. Ku carar xaga tareenka ka soo socdo. Haddii tareenka aad ka cararto, waxaa laga yabaa in falidhku ku soo gaadho marka tareenku duqeeyo gaadhiga.
6. Ha badalin geerka marka aad talowga tareenka ka gudbayso. Haddii gaadhigaaga geerkiisu yahay maanuwal, beddel ka hor inta aanad gaadhin xariiqa.
7. Waliga tareen ha la tartamin.
8. Fiiri baabuurta ay tahay inay joogsadaan meelaha wadada baabuurta iyo tareenadu is gooyaan.

9. Ha yaraysan tareenka xawaarihiisa iyo fogaantiisa. Sababtoo ah tareenka waynidiisa awgeed, wuxuu u muuqdaa inuu socdo si gaabis ah sida uu runtii yahay. Tareenadu si dhakhso ah uma istaagaan.
10. Ka feejignow, gaar ahaan habeenkii, calaamadaha talowga tareenka. Hubso inaad joogsan karto fogaanta laydhkaagu hayo.
11. Taxadar oo yaree xawaarahaaga marka wax isku gudbaan aragaaga.

BAARKINKA

Baabuurka waa in la baarkin gareeyaa isagoo u jeeda jihada baabuurta dhinacaa ka maraysa jidka, barbaryaal wax aan ka badnayn 12 hiish ee dhinaca midigta. Jidadka dhinaca kaliya ahi, baabuurta waa in lagu baarkin gareeyaa meel la siman oo aan 12 hiish ka fogayn cidhifka wadada. Sharciyada maxaliga ahi way oggol yihiin xagal u baarkin garaynta.

Joogsiga, Baarkinka, ama Joogsiga la Madnuucay

Baabuurka waa in la baarkin gareeyaa isagoo u jeeda jihada baabuurta dhinacaa ka maraysa jidka, barbaryaal wax aan ka badnayn 12 hiish ee dhinaca midigta. Jidadka dhinaca kaliya ahi, baabuurta waa in lagu baarkin gareeyaa meel la siman oo aan 12 hiish ka fogayn cidhifka wadada. Sharciyada maxaliga ahi way oggol yihiin xagal u baarkin garaynta:

1. Wadada dhinaceeda (marka laga reebo baaskiil)
2. Wadada meel dawladeed ama meel gaar ah horteeda
3. Isgoys dhexdiisa
4. Meel 10 fuudh ka durugsan dab
5. Meelaha lugta lagaga tallaabo
6. Meel u jirta isgoys ama meelaha lugta lagaga tallaabo 20 fuudh.
7. Meel 30 fuudh u jirta dab ama laydh baxaya, calaamad joogsi ama signal kaantaroola taraafig
8. Meel u dhaxaysa aaga badbaadsanaanta iyo cidhifka ku xiga ama meel 30 fuudh u jirta cidhifka ka soo hor jeeda dhamaadka aaga badbaadsanaanta, haddii masuuliyiinta taraafigu aanay sheegin dherer intaa ka dheer iyagoo isticmaalay calaamado
9. Meel u jirta 50 fuudh waddada tareenka ee ugu dhow
10. Meel ku xigta ama ka soo horjeeda god ama xanibaad marka baarkin garayntaasi xanibayso baabuurta.
11. Meel ku xigta gaadhi la joojiyey ama lagu baarkin gareeyay cidhifka wadada
12. Biriish dushii ama kanaal dhexdiisa
13. Meel kasta oo calaamaduhu madnuuceen in lagu baarkin gareeyo
14. Meel hal fuudh u jirta gaadhi kale oo baarkin garaysan
15. Qaybta wadada ee wado banana, waddo degdeg ah ama wada dhexmar ah.

Wadayaasha Curyaamiinta ah

Qofna waa in aanu meelaha gaarka ah ee leh calaamadaha curyaamiinta ku baarkin garayn haddii aanu baabuurku lahayn kaadhka gobolka ee baarkin garaynta ama taarriko gaar ah oo ay leeyihiin kuwa curyaamiinta ahi.

Taarikada waxaa laga yaabaa in loo sameeyo dadka curyaamiinta ah eel eh baabuurta ama shaqsiyaadka baabuurtoodu leeyihiin qalabka curyaamiinta.

Kaadh baarkin ayaa laga yaabaa in loo sameeyo qof kasta oo reer Ohio ah oo curyaan ah sida uu sheegayo sharciga Ohio. Kaarka weyn waa lagu dhajin karaa baabuur kasta oo sida qof naafonimo leh ah.

Taarikada gaarka ah iyo kaararka weyn ee baarkin garayntu waxay booliiska u oggolaanayaan inay gartaan baabuurta sida sharci darrada ah u isticmaalaysa goobaha baarkinka dadka curyaamiinta ah. Xad gudbayaashu waxaa lala tiigsan karaa sharciga waxaana lagu takhsiiri kara hanti gaara iyo mid guud xadgudubkeeda.

Codsiyada kaararka weyn ama taargooyinka ruqsad ayaa laga heli karaa Xafiiska Gaadiidka Ohio, 1970 W. Broad St., Columbus, 43223; internetka goobta ah www.bmv.ohio.gov/disability_placards.stm; ama mid kasta oo ah diiwaan galiye ku-xigeenka ruqsad hay'ad. Taarikooyinka waa in loo cusboonaysiiyaa si sanadle ah iyadoo laga jidiidinayo xafiiska gaadiidk. Kaarka weyn ayaa ah ansax ah illaa shan sano. Mujaahidiinta naafanimadoodu la xiriirto hawl qaran waxaa laga yaabaa inay lacag la'aan ku helaan kaarka weyn. Si aad u heshid macluumaad, uga wac BMV taleefanka 1-800- 589-8247.

SUUMANKA BADBAADADA

Sharciga isticmaalka suunka badbaadada ee Ohio wuxuu ka rabaa dirawalada iyo dadka fadhiya xaga hore ee inay xidhaan suunka badbaadada mar kasta oo ay gaadhiga wadaan ama ay fuushan yihiin gaadhi wadooyinka Ohio. Haddii aad tahay dirwal ka yar 18 jir, tirada dadka ku raaci karaa waxay ku eg tahay tirade suumanka badbaadada ee marka hore ku samaysan. Dhammaan rakaabku waa inay xidhaan suunka badbaadada marka gaadhiga uu wado qof sita ruqsada tijaabo ah.

Sharcigu wuxuu ka qaadayaa $30 oo cashuur ah dirawalada iyo $ 20 cashuur ah rakaabka xaga hore fadhiya ee la ogaadho in aanay xidhnayn suunka badbaadada marka loo joojiyo xadgudub kale.

Sharcigani waxaa ka reeban : (1) caruurta marka hore uu ka hadlayo sharciga xajinta; (2) dadka wada baabuurta si ay u gudbiyaann fariin ama jaraa'id; (3) dadka cadayn ka sita dhakhtarkooda taas oo sharaxaysa xaaladooda caafimaad oo ay ka mid tahay suunkooda badbaadadu; iyo (4) dadka wata baabuur la soo saaray wixii ka horeeyay 1966. Dadka ku qalabaysan baagaga hawada kama reebana sharciga badbaadada suunka.

Ku xadgudub sharciga suunka badbaadada maaha xadgudub dhaqaaq mana laha wax dhibco ah oo lagu samaynayo diiwaankaaga darawalnimda rasmiga ah.

XAKAMAYNTA ILMAHA

Dhallaanka iyo carruurta ee ka yar 4 jir isla markaana miisaankoodu ka yar yahay 40 rodol waa in si fiican loogu xajiyaa kursiga badbaadada carruurta marka laga wado gaadhiga. Kuraasta carruurta ee aad dooranaysaa waa inay ku qoran tahay buuxinta heerarka laga filayo badbaadsanaanta fedaraalka oo loogu talagalay inuu daboolo baahiyaha gaarka ah ee gaadhigaaga.

Ku xadgudubka sharciga badbaadada kursiga ayaa ah dambi hore. Sharcigu wuxuu qabanayaa dhammaan darawallada dhammaan baabuurta la leeyahay ama la kiraystay ama haddii kale ku hoos jira maamulka hay'addooda si loo isticmaalo kursi baabuur marka carruurta la qaadayo. Sharcigu wuxuu sidoo kale khuseeyaa dadka curyaamiinta ah iyo carruurta caafimaad ahaan nugul. KA DHAAFITAANNADA: Ammaanka Dadweynaha gawaarida, tagsiyada iyo gaadiidka kale ee u sharcigu uga baahnayn inay qalab ahaan u lahaadaan suunka badbaadada wakhtigii warshadda lagu sameeyay.

Ganaaxyada loogu talagaly xadgudubtada sharciga kursiga badbada ilmaha ayaa ah: $25-$100 dambiga ugu horreeya, (dambiga sahlan); $250 ugu badnaan dambiga labaad ama kuwa ku xiga (dambiga sahlan ee heerka afraad); iyo/ama xabsi aan ka badnayn 30 maalmood.

Waaxda Caafimaadka Ohio ayaa leh taleefan lambar bilaash ah, 1-800-755-GROW, looguna talagalay macluumaadka badbaadada ilmaha rakaabka ah iyo sharciga Qaniimaad kale ayaa laga heli karaa barta internetka ee Waaxda Caafimaadka Ohio, www.odh.ohio.gov.

Da'da 4 iyo 40 Rodol illaa Da'da 8

Markuu ilmo kasta oo ugu yaraan ah 4 jir ah laakiin ka yar 8 ssano lagu qaado gaadiid motor leh, wadaha gaadiidku ayaa ah inuu in ilmaha sida habboon ugu xakameeyo kursiga kor-u-qaadka ah (kursiga buusterka) haddii u ilmuhu yahay 4'9" ama ka dheer yahay mooyee.

KA DHAAFITAANNADA: Gaaadiidka badbaadada dadweynaha, tagsiyada iyo gaadiidka kale ee u sharcigu uga baahnayn inay qalab ahaan u lahaadaan suunka badbaadada wakhtigii warshadda lagu sameeyay.

Ka yar Da'da 15 jir

Markuu ilmo kasta oo ka yar d'ada 4 sano laakiin aan ka weynayn da'da 15 shano lagu qaado gaadiid motor leh, wadaha gaadiidka ayaa ah inuu ilmaha sida habboon u xakameeyo iyada oo raacaysa tilmaamaha warshadeeyaha qalabka nidaamka xakamaynta la kulnta heerarka ay ka fileyso dowladda federaalku ee badbaadada gaadiidka moortka leh ama aald xakamayn rakaad sida lagu sida lagu qeexay qaybta 4513.263 ee xeerka dib loogu noqday. Ku xadgudubka qaybtan ayaa ah dambi labaad, oo wadan doonta ganaaxa la midka ah ka xadgudubyada kursiga badbaadada ilmaha. KA DHAAFITAANNADA: Gaaadiidka badbaadada dadweynaha, tagsiyada iyo gaadiidka kale ee u sharcigu uga baahnayn inay qalab ahaan u lahaadaan suunka badbaadada wakhtigii warshadda lagu sameeyay.

ARAG ISKU GUDUBKA

Sharciga Ohio wuxuu madnuucayaa in baabuurta la rar dhaafiyo rakaab ama agab taas oo isku gudbaysa araga dirawalka.

ISKA LAADLAADINTA DHINACA GAADHIGA

Qofna waa in aanu iska laadlaadin ama fuulin dhinaca gaadhi socda. Waa inaan dirawal gaadhi wayn, ama is-jiid aanu si badheedh ah ugu oggolaan qof ka yar 16 jir inuu fuulo qaybta kaargo ee dusha banana ama aan shiraacnayn ee gaadhiga haddii uu u socdo xawaare ka dheeraynaya 25 mph, haddii arimahan soo socda midkood aanu jirin:

1. Qaybta alaabada ee baabuurka uu ku qalabaysan yaahy kursi amaan ah iyo suunka gaadhiga oo waafaqsan halbeega federaalka ee qalabka xajinta.
2. Ay jirto xaalad degdeg ah taas oo halis ku ah nolosha dirawalka ama qofka saran buudhiga gaadiga, ama is-jiidka.
3. Rakaabku yihiin shaqaale wadada ka qabanaya haw lama dhisme iyagoo awood ka haysta masuuliyiinta hay'addooda.

KAXAYNTA GAADHI MARKA AAN MAANKAAGU FAYOOBAYN

Da'da ugu yare e cabista alkahoolka ee Ohio waa 21 jir. Kaxaynta gaadhi iyadoo la cabsan yahay waxay ka soo hor jeedaa sharciga Ohio. Cadaynta in alkahool la cabsanaa markii la waday gaadhigu waxay ku salaysan tahay cadayn jidheed oo uu soo ururiyey sarkaalka xadhiga sameeyay iyo natiijada baadhis lagu sameeyay dhiig , balaasmada , neefsiga iyo kaadida. Waa sharci daro in la wado gaadhi haddii ribanaanta alkahoolka ee dhiigu (BAC) ay tahay 0.08 boqolkiiba ama ka badan tahay.

Haddii aad diido inaad soo gudbiso baadhis alkahool, ama haddii natiijada baadhis la sameeyay laba saacadood gudahood ay ka soo baxdo ribanaan (BAC) ah 0.08 boqolkiiba ama ka badan, sarkaalka xadhiga soo sameeyay wuxu ka qaadi doonaa ruqsadaada.

Waxaa laga yaabaa inaad codsato dhegaysi dacwadeed. Si laalistan maamul loo qaado, waa inaad codsataa arimahan soo socda:

1. Sarkaalku inaa aanu hayn cadayn macquul ah oo in aad alkahool cabsanayd (OVI);
2. Sarkaalku aanu codsan inaan baadhis dhiig lagugu sameeyo;
3. Sarkaalku aanu kuu sheegin natiijada diidista ama ku guul daraysashada baadhista; ama
4. Aanad diidin ama ku guul daraysan baadhista.

Laalista/Diidmada Ruqsada Maamul

Haddii lagugu soo xidhay inaad alkahool cabsanayd markii aad waday gaadhiga ama isticmaalka daroogo kasta oo kale, ama labadoodaba, ama maamulka gaadhiga xili aad cabsanayd, waxaa lagaa codsan doonaa inaad baadhis kimiko marto si aad go'aan ugu gaadho xadiga alkahoolka ee dhiigaaga

ku jirta. Waxaad sidoo kale xaq u leedahay in qof aqoon leh oo adigu adigu aad dooratay maamulo baadhista mar kale mar haddii markii hore amarka sarkaalka booliiska ah baadhista lagu sameyay, waa haddii baadhista labaad lagu sameeyay laba saacadood gudahood markii lagu xidhay.

Haddii aad gudbisay baadhista oo laguu joojiyey inaad cabsanayd maandooriye oo aad natiijadu ka sarayso xadiga sharciga ah, qoraal dhaar ah ayaa loo dirayaa Diiwaangeliyaha Baabuurta kaas marka dambe laali doona ruqsadaada mudo 90 ilaa saddex sanadood ah.

Haddii aad diidoo inaad marto baadhista, qoraal dhaar ah oo arintaa khuseeya ayaa loo diri doonaa diiwaangeliyaha Baabuurta. Kadibna diiwaangeliyaha waxaa looga baahan yaahy inuu laalo liisankaaga mudo hal ilaa shan shan sano ah oo loo diidayo inuu gali imtixaan, xataa haddii marka dambe lagugu waayo dambiga cabsanaanta alkahoolka (OVI)

Haddii aanad haysan ruqsad darawalnimo, waxaa laguu diidi doonaa xuquuqdaada codsashada isla mudadaaa marka laga yimaad ciqaabaha kale ee ah kaxaynta gaadhi ruqsada la'aan.

Ciqaabta

Laalista ruqsada maamul ee ay keentay diidmada baadhista ribnaanta alkahoolka dhiigu (BAC) waxay ku dhammaan doontaa min hal ilaa shan sano, taas oo ku xidhan inta goor ee aad diiday lix sano gudahood. Kuu guul daraysasho baadhiseed, laalista ruqsad maamul waxay ku dhammaan doontaa min 90 maalmood ilaa saddex sano, taas oo ku xidhan inta goor ee hore ee lagugu helay inaad gaadhi waday adigoo cabsan (OVI) lix sano gudahood.

Kuwa lagu helay xadgudub cabid alkahool kadibna gaadhi kaxayn ama OVI waxaa qabanaya ciqaabta in mar la dhigo jeel, in amar maxkamadeed ruqsada lagaga laalo, iyo ugu yaraan $375 ilaa takhsiir dhan $10,500. Ciqaabtu waxay ku xidhan tahay inta goor isticmaal alkahool lagu helay mudo lix sanadood ah.

Dambiga u horeeya - Ugu yaraan 72 saacadood oo isku xiga oo jeel ah iyo laalis ruqsad oo ka bilaambaysa lix bilood ilaa saddex sanno.

Dambiga Labaad - Ugu yaraan 10 maalmood oo jeelka ah iyo ruqsad laalis min hal ilaa shan sano.

Dambiga Saddexaad - Ugu yaran 30 maalmood oo isku xiga oo jeel ah iyo ruqsad laalis maxkamadeed oo min hal sano ilaa 10 sano ah.

Dambiga Afraad - Ugu yaraan 60 maalmood oo isku xiga iyo ruqsad laalis maxkamadeed oo ka bilaabanta min saddex sano ilaa soo celin la'aan rasmi ah.

Dambiga shanaad ama dambiga ka dambeeya ee cabbista alkahoolka ee dhaca Sebteembar 30, 2008 waxa lagu qori doonaa "Diiwaanka Dambiilaha Ohio ee Caadaystay OVI/OMVI". Diiwaankan ayay dadweynuhu marin u heli doonaan, iyada oo loo maro internetka.

Dadka lagu helo laba ama ka badan oo ah dambi wadis baabuur adigoo alkahool cabsan waxaa laga fadhiisan doonaa gaadhigooda. Afar iyo wax ka badan oo dambigaas ahi waa gef culus.

Haddii lagugu helo cabsanaan alkahool oo ribanaanteeda dhiigu tahay boqolkiiba ama BAC tahay .17 ama ka badan, waxaad la kulmi doontaa ciqaab daran. Ciqaabtu haddii aad diido inaad soo gudbiso baadhis kimiko, hore laguugu helay wadis baabuur adoo cabsan 20 sanadood ee u dambeeyay, kadibna lagugu helayn dambigaas sidoo kale way darnaan doontaa.

Si aad dib ugu hesho liisan la laalay dhammaan dambiilayaasha ALS ama/iyo OVI waa inay bixiyaan $475 oo dib ula soo noqosho oo aad keento cadayn caymis ama dayn aad dawlada ku leedahay (bond).

Wadayaasha lagu helo dil gaadhi oo la ogaado inay cabsanayeen ama daroogooyin markii dambigu dhacay waxaa laga qaadi doonaa talaabo si rasmi ah ay ku waayayaan xuquuqdooda baabuur wadiseed.

Cabis alkahool oo xadigeedu dhan yahay (BAC) .02 ee dirawalada ka yar 21 jir

Sharcigu wuxuu booliiska u oggolaanayaa inay fayl gareeyaan dacwado dhan ka dirawalada ka yar 21 ee ribanaanta dhiiga alkahoolka (BAC) ee ugu yaran .02 boqolkiiba laakiin ka yar .08 boqolkiiba.

Dambiga waxaa loo yaqaan " Kaxayn Baabuur Kadib Ilmo yar oo Cabsan." Ciqaabta waxaa ka mid ah laalista liisan waxaan ka yarayn 60 maalmood laakiinse aan ka badnayn labo sano, sidoo kala qaadashada kooras wadis baabuur iyo imtixaan ruqsada darawal oo dhamaystiran si dib laguugu soo celiyo ruqsadaada wadisata iyo afar dhibcood oo la siinayo ruqsadaada. Sidoo kale waxaa jiri doona kharash soo celin ruqsadeed waxaanan lagaaga baahan doonaa inaad keento cadayn inaad caymis ku jirto ama inaad dawlada ku leedahay dayn (bond).

DAROOGO

Sharciga Ohio wuxuu sidoo kale madnuucayaa wadista baabuurka iyadoo la daroogaysan yahay, ama isku jir daroogo iyo alkahool. Xataa dawooyinka dhakhtarku qoray waxay yeelan saamayn ku yeelan karaan awooda wadista.

RUQSAD BAABUUR OO BEEN ABUUR AH

Qofna ma isticmaali karo ruqsad la been abuuray ama mid la badalay ama mid uu leeyahay qof kale si loo iibsado cabitaano alkahool ah. Ciqaabta sharcigani waa hal sano oo laalis xuquuqda wadiseed ah.

Sharcigu wuxuu sidoo kale siinayaa qofka ergisaya ama si badheedh ah ilmo yar uga oggolaanaya inuu isticmaalo ruqsad uu ku iibsado alkahool waxaa lagu xukumi karaa lix bilood oo jeel ah iyo takhsiir ah ilaa $1,000.

SHARCIGA DHIBCAHA

Darawal kasta oo Ohio oo lagu helo xadgudub taraafiga waxaa lagu qiimayn doonaad dhowr dhibcood oo dambi iyadoo loo eegayo nooca xadgudubka. Haddii dirawalkaa lagu helo dambi labaad mudo laba sanadood ah gudahooda kadib

xadgudubka, qiimaynta dhibcuhu ee xadgudubka cusubi waxaa lagu dari doona wadartii hore. Tirada dhibcaha gefka ee la siiyo gefaha waxa qiimeeya nidaamka maxkamadda. Waxa soo socda jadwalka dhibcaha qiimaynta ee gefaf gaar ah:

Xadgudubka Lixda Dhibcood

1. Dilka baabuurta
2. Kaxaynta baabuur marka aad cabsan tahay alkahool ama/iyo isticmaalka daroogada
3. Ku guul daraysi inaad joojiso oo aad sheegto aqoonsiga meel isku dhac ka jiray
4. Si badheedh ah uga fakado ama baxsado sarkaal sharci fulineed
5. Tartanka
6. Kaxaynta baabuur adigoo oo aan oggolaansho ka haysan mulkiilaha
7. U isticmaalid baabuur fal dambiyeed, ama geysashada dambi kasta oo ciqaab ku leh sharciga baabuurta ee Ohio

Xadgudubka Afarta Dhibcood

Tixgelin la'aan badbaadsanaanta shaqsiyaadka ama guryaha.

Xad-gudubka Labadda Dhibcood

1. Dhammaan xadgudubyda dhaqaajinta iyo dambiyada xawaaraha qaar
2. Kaxaynta baabuur iyadoo la jebinayo xanibaad uu soo rogay Diiwaangeliyaha Xafiiska Gaadiidku

Xadgudubka Xawaaraha

Xadgudubka Xawaaruhu waxaa laga yaabaa inuu keenu afar dhibcood, laba dhibcood ama bilaa dhibco taas oo ku xidhan heerka xawaaraha ee jira iyo inta mayl ee saacadiiba (mph) ee heerka xawaaraha la kor maray:

- Dhaafida heer kasta oo xawaare 30 mph ama ka badan waxay keenaysaa afar dhibcood.
- Haddii heerka xawaaruhu yahay 55 mph ama ka badan, oo aad dhaafteen heerka in ka badan 10 laakiin ka yar 30 mph waxay keenaysaa laba dhibcood.
- Haddii heerka xawaarahu ka badan yahay 55 mph, oo aad heerka dhaafto waxa ka badan shan balse ka yar 30 mph waxay keenaysaa laba dhibacood.
- Exceeding any speed limit in an amount less than stated above results in no points.

Ciqaab

Heerka Xawaaraha	1-5 mph ka badan	6-10 mph ka badan	11-29 mph ka badan	30 mph ama ka badan
Ka hooseeya 55 mph	Bilaa dhibco	Laba dhibcood	Laba dhibcood	Afar dhibcood
55 mph ama ka badan	Bilaa dhibco	Bilaa dhibco	Laba dhibcood	Afar dhibcood

Dirawalka ay isku gaadhaan lix dhibcood muddo laba sano gudahood ah wuxuu waraaq ka heli doonaa Diiwaangeliyaha Gaadiidka taas oo uga digaysa in sharcigu ku qaadayo ciqaabahan soo socda dirawalka gaadha 12 dhibcood ama ka badan muddo laba sanadood ah gudahood:

1. Xuquuqda wadista waxaa la laali doonaa lix bilood.
2. Caddayn masuuliyad lacageed (fiiri cutubka) waa in lagu fayl gareeyaa Xafiiska Gaadiidka oo la hayaa min saddex sano ilaa shan sanno.
3. Kadib marka laalistu dhamaato, kooras wadis baabuur oo uu ansixiyey agaasimaha Waaxda Badbaadada Dadwaynaha Ohio waa in la qaataa. Koorasku waa in ugu yaraan 25 boqolkiiba saacadaha casharka lagu qaataa aragtida dirawalka.
4. Waa inaad gashaa imtixaanka dirawalnimada oo dhamaystiran.
5. Aad bixisaa kharashka $40 ee dib u soo ceshashada.

TUHUN KU WADISTA BAABUURKA

Kaxaynta baabuur marka ruqsadaada uu tuhun ku jiro waa dambi heer koowaad ah, haddii lagugu helana, waxaa lagaa qaadayaa takhsiir ilaa $1,000 ah. Waxaa sidoo kale laga yaabaa in lagugu xukumo hal sano oo ruqsada baabuurka lagaa laalo.

Darajada Laba Dhibcood

Qofka gaadha ugu yaraan laba laakiin aan ka badnayn 11 dhibcood oo xadgudub baabuur ah waxaa laga yaabaa inuu diiwaankiisa wadista baabuurka loogu daro darajo laba dhibcood ah isagoo dhamaynaya kooras darawalnimo. Magacyada dugsiyada bixinay kooras noocan oo kale ee degaankaaga si aad u ogaato, waxaad booqataa www.drivertraining.ohio.gov waxaanad gujisaa " Dugisyada la ansixiyey (Approved Schools)"

OGOW: Darajada labada dhibcood ee barnaamijkan macnaheedu maaha in dambi kasta oo lagugu helay laga masaxayo diiwaankaaga dirawalni-mada ama in aan shirkada caymisku tirinayn wixii hore ee lagugu helay oo dhan marka ay dajinaysa lacagta caymiska lagaa qaadayo. Dhammaan wixii lagugu helay oo dhan waxay ku qornaanayaan diiwaankaga, laakiin dhibcaha 12-ka dhibcood ah loo baahan yahay si ruqsada loo laalo waxaa lagu kordhiyey laba. Qaraarkii aqalka odayaasha ee lambarkiisu ahaa 123, ee dhaqan galay Jeenawari 1, 2004 wuxuu u oggolaanayaa inay is qoraan xiisado baabuur wadiseed si ay u helaan darajo laba dhibcood ah, ilaa shan dhibcood waligeedba, hal mar saddex-dii sannaba.

MASUULIYADDA MAALIYADEED

Mulkiilayaasha iyo wadayaasha baabuurta Ohio gudaheeda waa inay ugu yaraan wataan caymis daboolaya khasaaraha ay geystaan si sharci ahaan ama loogu oggolaado inay baabuur wadaan.

Marka aad codsatay taarikada ruqsada Ohio ee ta cusub, dib u cusboonaysiinta ama ruqsada darawalka, waxaad u baahan doontaa inaad keento dokumentiyo la

aqbali karo (fiiri bogga 3aad iyo 4aad), oo saxeex qoraal dhaar ah oo sheegaya inaadan wadi doonin gawaari adiga oo aan haysan xilka caymiska ah ama nooc kale oo xil lacageed ah oo dhaqan gala.

Darawal reer Ohio ahaan, waa inaad awoodaa inaad keento cadayn masuuliyad maaliyadeed xili kasta oo aad hesho xadgudub dhaqaaq baabuur, marka lagugu helo xadgudub dhaqaaq baabuur kaas oo u baahan fayl garaynta warbixin shil oo waafaqsan qaybta 4509.06 ee Xeerka Dib loo Eegay, ama marka aad si nasiib ah u hesho cadayn boos ahaan.

Caddayn waa in sidoo kale la keenaa marka baabuur aad leedahay, laakiin cid kale wadaa, uu galo xadgudub taraafiga ama isku dhac taraafig oo la soo warin karo.

Si aad u raacdo sharciga, caymis daymeed oo dhan 12,500-$25,000 ee dhaawacyada gaarka ah ama dhimashada iyo $7,500 oo ah waxyeelada guryaha ayaa loo baahan yahay. Waxaa laga yaabaa inaad isticmaasho, bedel ahaan, qoraal cadayn dayn kaa maqan si aad ugu daboosho dayn heerkaas ah, inaad keento waraaqda dhigashada qasnada Gobolka $30,000 , ama waraaqda is cayminta marka aad leedahay in ka badan 25 gaadhi.

Ciqaabta ku guul daraysashada masuuliyada maaliyadeed waxaa ka mid ah la wareegida baabuura iyo taarikada oo ay la wareegto maxkamad BMV, laalista ruqsadaada dirawalnimo ee 90 maalmood dambiga u horeeya, hal sanno dambiga labaad, iyo laba sano dambiyada soo raaca iyo kharashka maxkamada. (Maxkamadu waxaa laga yaabaa inay xadidido xuquuqda wadista ee dambiga u horeeya iyo ka labaad ee raacid waaga oo kaliya). Sidoo kale waxaa laga yaabaa in dirawalada baabuurtooda la xayiro. Waxaa jira lacag ah dib ula soo noqoshada xuquuqda wadista iyo ku guul daraysiga dhiibista taarikada, ruqsada iyo diiwaangelinta taburac ah.

Waxaa soo raaca, xuquuqda wadista dib loo soo celin maay ilaa cadayn maaliyadeed la keeno. Cadaynta waa in lagu fayl gareeyaa BMV oo la hayaa mudo saddex ilaa shan sano ah.

Saraakaal kasta oo sharci fulineed waa hay'ad BMV sababo la xidhiidha fulinta sharcigan. Mid kastaa wuxuu awood u leeyahay inuu xayiro ruqsada, taarikada iyo diiwaangelinta dirawal kasta oo reer Ohio oo imika ruqsadu ka laalan tahay ama lagala wareegay.

Xaaladaha u Baahan Cadayn Masuuliyad Maaliyadeed oo BMV

BMV waxay u baahan tahay cadayn masuuliyda maaliyadeed waa in sidoo kale la fayl gareeyaa min saddex ilaa shan sano marka qof gaadho 12 dhibcood ama ka badan muddo laba sanadood ah gudahood. Haddii aanad iibsan caymis , gobolkuu wuxuu laali doonaa xuquuqdaada wadiseed. Shuruudaha faylka waxay sidoo kale khuseeyaan mulkiilaha ama/iyo wadaha ku lugta leh isku dhac baabuur ee aan keeni karin cadayn masuuliyad maaliyadeed xiliga isku dhaca.

LAALISTA RUQSADA TIJAABADA KU JIRTA
(Ka yar 18 jir)

Diiwaangeliyaha gaadiidku wuxuu si badheedh ah u laali doonaa 90 maalmood liisanka darawalnimada ee qof kasta oo lagu helo dambi laba dambi oo dhaqaaq la xidhiidha. Dhammaan xuquuqaha waa loo diidi doonaa hal sano saddex xadgudub. Waxaa laga yaabaa inaad arji u qoroto maxkamada dambigii u dambeeyay kugu heshay. Ka hor inta aan laguu soo celin xuquuqdaada darawalnimo, waa inaad raacdaaa dhammaan shuruudaha dib u soo celinta (Bixi lacagta dib u soo celinta, kooraska darawalnimada caruurta, iibsashada kaadhka TIPIC, iyo galista imtixaanka ruqsada).

7 - CALAAMADAHA, SIGNALADA IYO XARIIQYADA WADOOYINKA

Aqoon loo yeesho calaamaha, signalada iyo xariiqyada wadooyinka ayaa lagama maarmaan u ah si badbaadsan u wadista gaadhiga. Si aad uga gudubto imtixaankaaga kaxaynta baabuurka oo aad iskugu diyaariso socdaalka wadada, waa inaad ogaataa oo aad awoodi kartaa inaad sharixi karto macnaha iyo isticmaalka calaamadahan, signaladan iyo xariiqyadan wadooyinka.

CALAAMADAHA MACLUUMAADKA GAARKA AH

Ohio waxaa ka jira sharci u baahan in darawalada iyo rakaabka kursiga hore fadhiya ee inta badan baabuur yaryar iyo kuwa waawayn khuseeya oo ah xidhashada suunka gaadhiga mar kasta oo ay marayaan wadooyinka Ohio. Calaamadan macluumaadka gaarka ah waa xasuusin wadayaasha la xasuusinayo inay sharciga gacantooda ku qaataan oo ay suunka xidhaan.

SHARCIGA GOBOLKA

XIDHO SUUNKA
BADBAADSANAANTA
SHARCIGA GOBOLKA

Waxaad soo gaadhay qayb wadada ka mid aha oo la rabo inaad xawaaraha dhinto.



XAWAARAHA YAREE
AYAA KAA HORAYSA

XAWAARAHA YAREE
AYAA KAA HORAYSA

AAG XAWAARE AYAA
KAA HOREEYA

CALAAMADAHA DIGNIINTA

Calaamadaha ku dhow wadudu waxay ku baraarujinayaan gaadiidleyda xaalado halis badan. Inta badan calaamadahin waxa leeyihiin midabkoodii lagu yaqaanay ee huruuda ahaa iyo qaabkoodii dheemanta ahaa, laakiin inta badan calaamadaha, kalmadaha waxaa lagu badalay calaamadahan hoos lagu sharaxay. Goobadda waxaa loo daayay calaamadda tallowga wadada tareenka.

Waxaad ku dhawdahay laab midigta ah kadibna bidixda.

Is-goys tareen ayaa kaa horeeya.

Waxaad ku dhowdahay dalcad. Oo laga yaabo in lay la socoto " Baabuurtu ha Isticmaalaan Geer Hoose."

Waxaad ku dhawdaha laab bidixda ah kadibna midigta.

Bidix u wadda leexasho ayaa kaa horeeya

Midig u wadda leexasho ayaa kaa horeeya

Bidix u wadda leexasho kadibna midig.

Midig u wadda leexasho kadibna bidix

Is-goys ayaa kaa horeeya.
(isgoys)

Waddo kale ayaa midigta kaga soo darsamaysa

Waddo kale ayaa bidixda kaga soo darsamaysa

Waxaad ku dhowdahay goollad. U leexo midig ama bidix

Waddadu waxay u kala leex-anaysaa bidix iyo midig.

Waxaad ku dhowdahay dhowr qalooc oo isku xiga. Qunyar, si taxadar leh u soco.

Si taxadar leh hore ugu soco. Gaadhiga Biriishka ugu dhow ayaa waddada iska leh.

Waddada kaa horaysaa waa lagu silbanayaa wayna qoyan tahay

Maritaan xaddidan (Biriish, tallow la maro, iwm).

Baabuurtu waxay u socdaan labada dhi-nacba.



Dhammaan signalada cas ee baxaya mac-nahoodu waxa weeyi in baabuurta oo dhan istaagto ka hor inta aanay galin goolada. Laydhka huruuda ah macnaheedu waxa weeyi in dhammaan baabuurtu inay goollada uga gudbaan si feejigan.

HA DHAAFIN

Laydhka rasmiga ah ee " Aaga ha dhaafin" waxaa lagu kabi karaa calaamada sharciga ah ee " Ha Dhaafin".

AAGA DHAAFID LA'AANTA

TALLOWGA AMA GUDBIDDA

Calaamado dhowr ah ayaa tilmaama goobaha wadooyinka ee dadka, xayawaanka ama baaskiiladuhun inta badan ka gudbaan waddada.

Calaamda Digniin ah oo Horumarsan

Gudbidda Baaskiil

Gudbidda Deerada

Calaamadaha lagu Taagay Meelaha Tallowga

Tallowga dadka

Tallowga dadka curyaamiinta ah

DUGSIYADA

Waxaa muhiimad gaar ah la siiyay iskuulada iyo calaamadaha tallowga iskuulada iyadoo la adeegsanayo shaxan shan geesle ah. Calaamada iskuulku waxay gaadiidleyda uga digaysaa in ay u dhow yihiin aag iskuul ku yaal, halka calmaada tallowga dugsigu sheegayso meelaha caruurtu waddada ka gudbayaan.

Waxaad ku dhawdahay Iskuul

Tallowga iskuulka

WADADA ISKU DARSAN, QAYBSAN

Muhiimada isku darsanka iyo calaamada wadada talowga waa in baabuurta looga digaada isbedelka ku dhacaya qaabka taraafiga iyadoo la isticmaalayo falaadho.

Waddo labo haad ayaa dhamaatay; Waxaa bilaabmay waddo qaybsan.

Waddo qaybsan ayaa dhamaa-tay; Waxaa bilaabmay waddo labo haad ah.

Gaadiid baa kaga soo darsamaysa midigta.

Bidixda raac; haadkii midigtu wuu dhammaanayaa.

GAAR AH

Calaamaddan waxaa loogu talogalay isticmaalka baabuurta qunyarka socota oo kaliya, oo ay ku jiraan gaadiidka beeruhu. Waa saddex xagal midabkeeduna waa liimi ku xadaysan casaan. Kooxaha diineed ee Old-order Amish-ka, ee diintu ka mamnuucday inay muujiyaan midabada cad, waxay isticmaali karaan waxyaabo u badala oo soo celin leh kana mid yihiin cawlaan, cadaan, madow ama silfar waana inay daboolaan aag dhan 72 hiish oo isku wareeg ah. Calaamadda gaadhiga qunyarka socda waxay sheegayaan in taxadar gaar ah la yeesho marka wadada lala wadaagayo gaadhi noocan ah. Dulqaad dheeraad ah waa in la yeeshaa marka aad wadada dhaafayso gaadhi qunyar socda.

Waxaad ku dhowdahay gaadhi qunyar socda. Si taxadar leh u soco; u dhaaf si feejigan.

DHISMAHA

Calaamadaha digniinta ee dhismaha waxay leeyihiin midab liimi ah oo ka dambeeya. Marka gaadiidleydu ay arkaan calaamad liimi ah, waa inay feejignaadaan, ay yareeyaan xawaaraha, oo ay iska eeegaan shaqaale iyo qalab wadada ku jira. Wadooyinka la xidhay si looga dhiso ama dib loogu hagaajiyo ee calaamadihii ku haboonaa lagu dhajiyey, waa in aan darawalku hore ugu socon ama ka gudbin.

KA LEEXO

DHISME WADDO AYAA KAA HOREEYA KA LEEXO

SHAQO WADDO AYAA HOREYSA

CALAAMADAHA TILMAANTA

Iyadoo ay ku xidhan tahay nooca fariinta, calaamadahani waxaa laga yaabaa inay cagaar ama cadaan yihiin, cawl ama cadaan, ama buluug iyo cadaan. Waddo tusayaalka cagaarka iyo cadaanka ah iyo calaamadah fogaanta ayaa ku hagaya. Calaamadaha adeegu waa cadaan buluug ku yaal waxaanay tilmaan kaa siinayaan meelaha adeega sida meelaha nasashada, cisbitaalada iyo kaamamka. Calaamadaha u tilmaamay gaadiidleya meelaha baarkinka ah iyo goobaha ciyaarahu waxay leeyihiin midab cawl ah.

CISBITAAL

WADDO BAASKIIL

KAAM

GAADIIDKA

Calaamadaha kaantarolka taraafiga waxaa loogu talo galay maamulida, digniinta ama hagida socodka dadka iyo baabuurta.

Joogso

Ka dhamaadka baabuurta ee isgoyska

Soco

Joogso

Ka dhamaadka baabuurta ee isgoyska

Leexo

Joogso

Ka dhamaadka baabuurta ee isgoyska

Hore u soco Kaliya

Bidix Keliya

Joogso

Ka dhamaadka baabuurta ee isgoyska

Hore u soco Kaliya

Midig Keliya

DADKA WADADA KA TALAABAYA

Laydh iftiimaya oo ah HA LUGAYN ama gacan joogso ah ayaa dadka dadka hore ugu jiray wadada u oggolaanaysa inay dhameystaan gudbidda. Dadka cidhifku waa in aanay gelin isgoyska marka laydhku iftiimayo.

Calaamad HA LUGAYN ah ama gcan joogso tilmaamaysa ayaa uga digaysa lugeeyaasha inay sharci daro tahy inay is goyska galaan. Aclamada galista lugeeyaha iyo laydhka gacanta joogsashada ayaa si is daba joog ah loo isticmaalaya sida hoos ka muuqata.

CALAAMADAHA MAAMULKA

Calaamadahani waxay maamulayaan dhaqdhaqaaqa taraafigga. Calamadda Ha Gelin ayaa lagu rakibay is-goyska wadooyinka dhinaca kaliya ah iyo meelaha ka bixista waddooyinka.

Dhammaan baabuurta haadkani waa in ay joogsadaan ka hor inta aanay sii amba qaadin socoka.

Baabuurta oo dhami waa inay eegaan heerka xawaaraha lagu dhajiyey aag iskuulada agtooda saacadaha xanibnaanta.

Joogso kaliya haddii baabuurta kale la saameeyay; u bane dhammaan baabuurta soo socota.

Waxaa loo isticmaalaa wadooyinka haadka kaliya ah iyo meelaha bixista wadooyinka.

Baarkinka curyaamiinta oo kaliya Baabuurtu waa in ay leeyihiin taarikada curyaamiinta ama boodh ay ku isticmaalayaan meel gaar ah.

CALAAMADAHA MADNUUCA

Calaamadda cas iyo xariiqda gudban waxay u taagan yihiin dhammaan calaamadaha madnuuca waxaanay ka dhigan yihiin kalmada “maya”. Mar kasta oo calaamadani ka muuqato calaamad, talaabada muuqata waa la mamnuucay.

Lama oggola bidix u leexasho.

Dib u laabid lama oggola.

Lama oggola midig u leexasho.

Baaskiiladaha lama oggola.

XARIIQYADA WADOOYINKA

A-Xariiqa huruudda ahi wuxuu tilmaamayaa kala qaybsanaanta qulqulka baabuurta iska soo horjeeda; sidaas darted, xariiqyada dhibcaha ah ee wadada kaliya, ee haadka kaliya ahi waa huruud. Xariiqyada huruuda ah ee kala go’ani tilmaamayaan dhaafida, halka xariiqa huruuda ahi wali sheegayaan in dhaafista aan la oggolayn.

B-Wadooyinka haadadka badan, ee labada dhinacba ah, ee badhtanka ku leh haad khaas u ah bidix u leexashada iyo calaamdaha wadooyinka dusha iyo dhinaca,waxaa inta badan lagu isticmaalaa meelaha magaalooyinka ah. Haadka badhtanka ee bidix u leexashada waxaa ku calaamadsan calaamado dusha ah iyo kuwa dhinaca ah. Haadka waa in aan loo isticmaalin dhaafista. Waxaa laga yaabaa in la gali si loo leexdo oo kaliya. Baabuurta labada dhinac ka socotaa waxaa laga yaabaa inay haadka si dhakhso ah u isticmaalan ka hor inta aanay bidix u leexan.

Xariiqyda huruuda ah waxaa sidoo kale loo isticmaalaa xariiqyada dhinaca bidix ee wadooyinka dhinaca kaliya ah. Xariiqyada cadcad waxaa loo isticmaala xariiqyada wadooyinka iyo in lagu calaamadiyo kala qaybsanaaanta qulqulka baabuurtaa dhinaca u wada jeeda. Xariiqyada buuran ee cadaanka ah waxaa loo isticmaalaa xariiqa haadka ee meelaha aanay fiicnayn in haadka la badalo, tusaale ahaan, kanaalada iyo biriishyda baladhkoodu xaniban yahay, meelaha is waydaarka ee badalida haadku dhexgalayso socodka baabuurta iyo meelaha ka soo horeeya gooladahalane.

A.



B.



Khad laba-jid oo bidix-leexad keliya ah.

8 - SHURUUDAHA WARBIXINTA ISKU DHACA BAABUURTA

WAXAAD SAMAYNAYSO HADDII ISKU DHAC YIMAAD

1. Joogso.
2. Qaad talaabo degdeg ah oo aad ugu digayso baabuurta soo socota.
3. Caawi dadka dhaawacan. Ha dhaqaajin, laakiin diiri.
4. Ogeysii mas'uuliyiinta arrinta ku habboon, midkoodba Ilaalada Waddooyinka Gobolka Ohio, Shariifka ama booliiska degaanka.
5. Magacaaga iyo ciwaankaaga sii qof kasta oo ku dhaawacmaya ama mulkiilaha, wadaha, ama dadka la socda baabuurka (baabuurta).
6. Ururi macluumaadkan soo socda ee lagu aqoonsanayo dirawal kale oo kasta oo qayb ka ahaa isku dhaca dhacdadaas. Inta badan waa in sharciyan lagu qoraa warbixinta isku dhaca waxaanay wax ka taraysaa xallinta arrimaha la xidhiidha isku dhaca.
    - Magacyada, cinwaanada iyo taariikhda dhalashooyinka dhinacyada ku lugta leh arinta
    - Lamabaraka taarikooyinka
    - Lambarada ruqsadaha darawalnimada
    - Magaca iyo cinwaanada mulkiilayaasha baabuurka, ee aan ka ahayn dirawalka
    - Duruufta shilka sida cimilada, xaalada waddada iyo kaantaroolka waddada
    - Sanadka, cida samaysay iyo moodeelka baabuurta ku lugta leh
    - Magaca iyo cinwaanka shirkada caymiska ee ku lugta leh
7. Ka jawaab dhammaan su'aalaha sarkaalka baadhista, laakiin shilka ha kala sheekaysan dadka kale.
8. Kala sheekayso dirawal kale xaqiiqda shilka, balse ha la soo hadal qaadin qaladka ama caymiska.
9. Haddii shilka uu ka mid yahay gaadhi aan cidi saarnayn, waa inaad u warisaa shilka booliiska ama aad ka tagtaa macluumaadka lagama maarmaanka u ah muuqaalka.
10. Wadaha baabuurka iyo waxa la midka ah ee shil baabuur baabuur gala ayaa ku xerayn kara foomka BMV 3303 – Warbixinta Shilka BMV (lagana heli karo www.ohiobmv.com) lix bilood gudaheeda kadib shilka haddii ay labaduba kuwa soo socda ay khuseeyaan: (1) Uu waxyeeladu ka waynayd $400, iyo (2) qofka wadaha ah ama iska leh baabuurka iwm. Oo aan lahayn caymis amase hoos imaad mas'uuliyad lacageed oo kale marka u shilku dhacay.
11. Shirkadaada caymiska u ogaysii sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah.

WAXAAD SAMAYNAYSO HADDII AAD JIIDHO DEERO

Haddii aad jiidho deero oo aad disho, sharciyan waxaa laga yaabaa inaad deerada qaadato, waa haddii aad u soo sheegto jiidhista ilaaliyaha ama sarkaal kale oo sharci fulineed muddo 24 saacadood ah gudahooda. Ilaaliyuhu ama sarkaalku wuxuu baadhi doonaa shilka waxaanu kuu samayn doonaa shahaado.

9 - XAALADAHA GAARKA AH

WADISTA BAABUURKA EE HABEENKII

Marka aad baabuurka wado habeenkii, waxaad ku kaxaysaa xawaare aad ka taxadirtay oo macquul ah. Marka aad ku kaxayso xawaare macquul ah, waxaa kuu suurtagalaysa inaad joogsato fogaanta laydhkaaga hore hayo.

Marka aad aad ugu dhawaato gaadhi kale ee adigana mid kale ku soo gaadhayo, hubso inaad naaqusto laydhkaaga hore. Isticmaal laydhka fog kaliya marka aad marayso wado magaalada ka baxsan oo halkaaga horena ay banaan tahay.

Haddii gaadhi ku soo waajaho iyadoo laydhka hore ee cad u shidan yahay, ha eegin laydhka. Raac cidhifka ka baxsan wadada si aad uga hortagto indho la'aan muddo kooban.

Dadka maraya wadada dhinaceeda ama ka talaabaya waddadu ma rumaysna in aan darawaladu arki karin. Hubso inaad iska eegto dadka wadada ag maraya.

Daaqadahaaga nadiifi. Indho daraandarka uu keenay iftiinka ku dhacay muraayad usgag waxay yareynayaan araga habeenkii.

Daalka, oo yareeya araga iyo waqtiga jawaabta, waa qodob muhim u ah isku dhaca habeenkii. Hubso inaad ka baxdo waddada oo aad nasato haddii aad daalan tahay.

Laydhka

Laydhka waa in la shidaa:

1. Inta u dhaxays cadceed dhaca iyo cadceed soo baxa.
2. Xili kasta oo roob da'ayo, baraf, ama xaalad cimilo oo kale oo aan haboonayn - iyada oo aan loo eegayn xiliga maalinta.
3. Xili kasta oo kale oo xaaladaha laydhka dabiiciga aanay suurtogal ka dhigayn in la arko waxyaabaha 1,000 fuudh kaa horeeya.
4. Waqti kasta oo la isticmaalo masaxaadaha muraayadaha (windshield wipers).

WADISTA BAABUURKA JIILAALKII

Marka wadooyinku u daboolo barafku, yaree xawaarahaag. Kaxaynta baabuurku aad bay uga duwan tahay kaxaynta baabuurka xili kasta oo kale oo sanadka ah. Cimiladay doonto ha ahaatee, aayar kaxaynta gaadhigu waxay daruuri u tahay badbaadsanaanta baabuurkaaga.

Waxaad hubsataa in gaadhigaagu uu ku jiro xaalad fiican oo shaqaynaysa. Laydhka, biriiga, baraf dhalaaliyaha, shucaac bixiyaha iyo qaybaha kale ee gaadhigu waa inay si fiican u shaqaynayaan, khaasatan xiliga jiilaalka. Taayirada barafku waa digniin fiican. Silsiladaha taayirku waxay noqon karaan caawin fiican xiliyada barafka .

Daaqad xoogaa fur. Tani waxay kaa caawinaysaa in gaadhiga muraayadiisu waadix ka ahaato baraf iyo inay ka hor tagayso samaysanka kaarboon mono-oksaydh.

Xasuusnow

Meelaha hadhka leh ee wadadu waxay hayn doonaan barafka iyadoo qaybaha kale ee wadadu ay engagin yihiin. Sidaas oo kale waxa noqon kara biriishyada, oo hayn dooona barafka marka wadada inteed kale badbaadsan tahay. Xiliga jiilaalka, waxaa had iyo goor lagama maarmaan ah in si kadis ah loo joogsado. Si aad uga hortago silbasho ama taraarax, si qunyar ah u qabo biriiga (Sistamka biriigyada aan si qufulin uma baahna garaacid). Ficilkan garaacida ah wuxuu yarayn doonaa socodka iyadoo aanad qaban kari wayayn iyo xidhid la'aan biriiga ah. Haddii gaadhigaagu silban waayo, lugtaadka ka qaad leewarka ooleexi isteerinka adigoo u jeeda dhinaca silbashada. Waligaaa biriiga ha qaban marka aad silbato.

Markaa aad dhaqaajinayso gaadhi ku baarkin garaysan baraf dushii, waxaad u socotaa si qumaati ah. Taayiradu waxay yeelan doonaan fursad wanaagsan oo ay isku qabtaan haddii si qumaati ah loo leexiyo. Bilaabida geer labaad ama geer hoose ayaa sidoo kale ku caawin karta. Aad uga fogaw gaadhiga. Tani waa lagama maarmaan maxaa yeelay baabuurtu waxay u baahan yihiin meel fog oo ay

Sida looga leexdo silbashada



WADISTA BAABUURKA EE BARAFKA

Barafku waa xaalada ugu halisan ee darawalku ku socon karo. Madaama inta badan darawaladu qumaati u socdaan barafka , waxaa dhaca isku dhacyo yar. Si kastaba ha ahaatee, marka isku dhacu yimaad, had iyo jeer waxaa jira silsilada isku dhacyo ah wadada taas oo keenta dhimasho iyo dhaawacyo halis ah.

Marka aad Baabuurka Waddo Baraf

Qumaati u soco! Waxaa laga yaabaa inaad joogsato xili walba. Haddii fogaanta joogsiga ee xawaaraha aad ku socotaa uu ka fog yahay fogaanta aad arki karto hortaada, ma awoodi doontid haddii xanibaadi wadada jirto (fiiri "Fogaanta Joogsiga," Cutubka 3aad".

- Isticmaal laydhkaaga fog, ha isticmaalin kuwa cadcad.
- La dhaqaaq qulqulka baabuurta. Fogaan joogto ah ka dambee gaadhiga kaa horeeya si gaadhiga kaa dambeeya ay sidaa u sameeyaan.
- Haddii isku dhac aad ku lug leedahay, gaadhigaaga wadada ka saar sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah. Haddii gaadhigaaga aanad dhaqaajin karin, shid bidh bidhayaashaad iyo laydhkaaga oo holac shid hadaad haysato. Gaadhiga ha dhex fadhiisan oo ha sugin caawimo. Si taxadar leh aad uga fogow wadada.
- Kaxee baabuurka daqada oo kuu furan.
- Ha ku dhaygagin halkii aad ka eegi lahayd.

WADISTA BAABUURKA WADDO BANAAN

Soogalida Jidka Weyn

Haddii aad ka war qabto inaad bidix u leexan doonto oo aad ku leexanayso kadinka sagaxda tallowga, ha sugin ilaa ilbidhiqsiga u dambeeya ee aad bidix ugu leexanayso haadka bidixda. Ku dhaqaaq haadka leexashada dhowr bolok hortood.

Marka aad gasho sagxada dusheeda, leewarka sii. Haddii gaadhigaaga xawaarihiisu yahay 30 mayl daqiiqadiiba, waxay noqon doontaa mid aan aad suurtogal u ahan inaad ku biirto baabuur xawaarahoodu yahay laban laab. Marka aad gaadho dhamaadka wado banaan sagxad dusheeda, sagxada iyo cimiladu oggol yihiin, waxaad ku dhaqaaqaysaa meel aad ugu dhow xawaaraha baabuurta.

Had iyo goor isticmaal signalkaaga leexashada si aad ugu oggolaato wadayaasha kale inay ogaadhaan inaad qorshaynayso inaad kala goynayso baabuurtu durduraysa. Marka aad gaadho dhamaadka sagxada, gaadhiga xagiisa hore aad u eeg, oo isticmaal muraayada gaadhiga si aad meel banaan u aragto. Dirawalka wadada galaya ahaan, waxay xaq u leeyihiin baabuurta kale in loo baneeyo. Si kastaba ha ahaatee haddii aad ku dhaqaaqayso ama aad ku dhawdahay xawaaraha baabuurta kugu wareegsn, way fududaanaysaa inaad ku biirto qulqulka baabuurta.

Dhaqaaqa Baabuurta

Marka aad haad ku jirto, ku ekow. Marna ha galin marna ha ka bixin haadka. Fiiri calaamadaha oo adeec. Ku dhaqaaqida xawaare sare macnaheedu wuxuu yahay inaad u baahan doonto meel banaan oo dhaxaysa adiga iyo gaadhiga kaa horeeya haddii xaalad degdeg ahi dhacdo. Ha uga dhawaan meel gaadhi kale gali karo mar kasta oo xawaarahaagu gaadho 10 mayle; xusuusnow xeerkii saddexda ilbidhiqsi.

Ku ilaali heerka xawaaraha la xadiday ama meel ka hoosaysa. Ku dhaqaaqida xawaare aad uga hooseeya baabuurka kale wuxuu keeni karaa dhibaato. Fiiri calaamadaha ka hadlaya badalka xawaaraha, khaasatan marka aad soo gaadho meel dhisme ama meel aad u dad badan.

Si aad uga Dgto Waddada Xawaaraha Sare

Eeg calaamadaha, rido signalka leexashada haboon, waxaadna u dhaqaaqda haadka ka bixista haboon. Isticmaal signalkaaga leexashada si aad u tilmaanto

goorta iyo meesha aad ka baxayso. Ku joog xawaaraha baabuurta ilaa aad gaadho sagxada ka bixista, kadibna dhin xawaaraha. Hore u soco si aad yarayso oo joogso haddii loo baahan yahay ka hor inta aanad gelin ka tallowga waddada ama jidka. Haddii aad seegto bixistaada, qaado ta ku xigta. Waa sharci daro inaad joogsato, inaad dib u baxdo ama inaad dhexda u dhaqaaqdo, ama aad ka gudubto wadada gobollada u dhaxaysa.

HADDII AAD DAAL DAREENTO MARKA AAD GAADHIGA WADDO

Iska ilaali daalka wadada. Sida hore loo sheegay, tabcaanimadu waa qodob keena shilalka wadooyink. Raac tilmaamahan fudud ee soo socda si aad iskaga ilaaliso daalka:

- Shid raadiyooga.
- Haasaawe fudud gal.
- Marmar joogso si aad u kala bixiso lugahaaga oo aad u cabsto koob bun ah.
- Ha sii wadin gaadhiga haddii aad u daasho. Wadada ka bax oo naso.

MARKA AAD ISTICMAALAYSO LAYDHKA

Laydhka waa in la shitaa cadceed dhaca iyo cadceed soo baxa iyo xili kasta oo u da'ayo roob, baraf, qabow ama cimilo kale oo aan fiicnayn iyadoo oo aan loo eegin xiliga maalinta. Laydhadku sidoo kale waxay u baahan yihiin in la isticmaalo xaalado kasta oo dabiici ahi ay oggolaan waayaan inaad aragto shay kuu jira 1,000 fuudh oo kaa horeeya.

DHIBAATOOYINKA GAADIIDKA

Haddii taayir qarxo

Qaraxu rka aad ku socoto xawaare aad u sareeya waa halis, gaar ahaan haddii dirawalku aanu ogayn. Raac tilmaamahan si aad uga soo doogto si nabadqabta:

- Ha sasin.
- Cagtaada ka qaad leewarka, sii daa gaadhigu ilaa inta uu istagayo.
- Marka qaruxu yahay taayir hore, biriiga oo si kadis ah loo qabtaa waxay gundhinaysaa xaga dambe, taas oo ay adag tahay in la xukumo.

Haddii taayiradu waddada ka baxaan

Waa suurtogal in mar ama mar kale, ay taayiradaadu ka bixi doonaan waddada. Haddii tani dhacdo, waxaad raacdaa talaabooyinkan si aad wadada ugu noqota si badbaadsan:

- Ha isku dayin inaad waddada markiiba ku soo celiso taayirada si dhakhso ah.
- Jooji leewar siinta; u oggolow gaadhigu inuu xawaare hoose ku soo noqdo.
- Marka gaadhigu qaboobo, si qumaati ah ugu soo celi wadada.
- Isla marka afarta taayir ku soo noqdaan wadada, toosi taayirada hore oo hore u sii soco.

WADISTA BAABUURKA EE DIFAACA AH

Baro inaad noqoto dirawal difaac ah. Fiiri qaladaadka darawalada kale. Akhrinta buugani waxay si taxadar leh kaaga caawinaysaa inaad ogaato waxyaabaha aad fiirinayso, laakiin tani had iyo goor kuguma filna. Dad badan oo waawayn ayaa ka faa'iiday qaadashada Kooraska Wadista Baabuurta ee Difaaca ah (DDC), ee uu maalgaliyo Golaha Badbaadada Qaranku, shaqada ama iyagoo soo maraya golaha degaanka ee badbaadada. Haddii aad xiisaynayso inaad qaadato DDC, waxaad la xidhiidhaa golahaaga degaanka ee badbaadada.

WADAAGISTA AAGA BILAA BAABUURTA

Baabuurtu had iyo goor waxay leeyihiin goldaloolo marka ay noqoto dhaqaaqa, fogaanta joogsiga iyo goobaha indho la'aanta. Guud ahaan, mar kasta oo ay sii waynaadan:

- Waxaa sii waynaada goobahooda indhola'aanta.
- Waxaa sii bata baahidooda meel ay ku dhaqaaqaan.
- Waxaa sii dheeraada waqtiga ay ku joogsanayaan.
- Waxaa sii dheeraada waqtiga lagu dhaafayo.

Badanaa isku dhacyada ku lugta leh baabuurta waawyn waa la iska ilaalin karaa haddii dirawaladu xasuustaan gol daloolooyinka baabuurka. Ka fogow xaaladaha halista ah ee baabuurta waawayn ku lugta leh.

BAABUURTA FARIIMAHA QAADA

Marka aad ka dambayso baabuurta qaada boostada, dhammaan sharciyada taraafikada khuseeya joogsiga iyo dhaafiddu way qabanayaan (fiiri Cutubka 6, Joogsiga iyo Dhaafida, Cutubka 6).

SIGNALADA TARAAFIGGA EE AAN SHAQAYNAYN

Mararka qaar, bakhtiga dabka ayaa keeni kara signal taraafig oo aan shaqaynayn. Xaaladani waxay noqon kartaa mid aad u halis badan, gaar ahaan marka sarkaal sharci fulin ah oo kala haga baabuurtu aanu joogin meesha laydhka taraafigu xumaaday. Sharciyan, marka laga reebo marka sarkaal sharci fulin ahi joogo, darawaladu waa in signalka taraafiga ee xumaaday u tixgeliyaan waddo afar ah oo la istago. Kadib marka ay joogsadaan, waa in taxadar wayn la sameeyaa ka hore inta aan hore loogu sii socon isgoyska, maxaa yeelay dirawalada kale ayaa laga yaabaa inay is moodsiiyaan laydhka aan shaqaynayn inuu yahay socosho aan joogsi lahayn.

10 - BAASKIILADAHA

SHARCIGA TARAAFIKADA

- Baaskiiladlaydu waa inay raacaan, oo aanay ka horimaan, gaadiidka kale ee socda. Keliya marka uu baakiiladluhu lugaynayo oo qudha ayaa loo oggol yahay inuu ka hor yimaaddo gaadiidka socda.
- Baaskiiladlayda waxa laga rabaa inay u hogaansamaan dhammaan calaamadaha taraafikada, seenyaalada iyo waxyaabaha ku qoran jidka.
- Baaskiiladlaydu waa inay adeegsadaan calaamadaha gacanta ee habboon kahor intaanay leexan ama joogsan.
- Baaskiiladlaydu waa inay xagga midigta isku badiyaan jidka, iyaga oo u oggolaanaya gaadiidka dheeraynaya inuu si ammaan ah u dhaafo. Baaskiiladlaydu waxay ku socon karaa khadka dhexe haddii ay xawaare la siman ku socdaan gaadiidka kale ama uu khadku uu cidhiidhi yahay oo aanu si ammaan ah ula wadaagi karin baabuurta.
- Baaskiiladlaydu waa in aanay gaadiidka kale ku dhaafin meel dalcad ah ama is-goys ah.
- Baaskiiladlaydu waa inay joogsadaan meel lab ah si ay ugu oggolaadaan inay dhaafaan gaadiidka xaaladaha degdegga ah.
- Baaskiiladlaydu waa inay la socdaan jiidda dugsiyada ee xawaaraha xaddidan iyo guud ahaanba xawaaraha xaddidan.
- Sharciga gobolka ayaa u oggolaanaya dawladaha hoose inay maamulaan hawlaha baaskiiladaha, sida ruqsadda baaskiiladda iyo diiwaangelinta. Baaskiiladlaydu waa inay bartaan nidaamyada iyo xeerarka degaanka si ay si habboon ugu bartaan dhammaan sharciyada saamaynaya.

SHARCIYADA BAASKIILADAHA

- Baaskiiladlaydu waa inay marnaba fuulin jidka weyn, ama isku xidhin baabuurta kale ee isticmaalaysa jidka.
- Baaskiiladlaydu waa inay fuulaan keliya kursiga rasmiga ah eek u xidhan baaskiiladda.
- Rakaab waa inaan la saarin iyada oo loogu talogalay mooyaane, oo ugu yaraan hal gacan uu ku qabsan karo isteerinka wakhti kasta.
- Baaskiiladlaydu waa in aanay laba baaskiiladood wax ka badan khad isku barbar socon karin, marka laga reebo jidadka gaar ahaan loogu talogalay isticmaalka baaskiiladlayda.
- Baaskiilad kasta oo habeenkii socota waa in lagu xidho laydh cad ooh ore, mid gaduud ah xagga danbe, iyo mid dhalaalo xagga danbe-.
- Baaskiilad socon kartaa ma jirto haddii aanu ku xidhnayn jalas ama hoon laga maqli karo ugu yaraan 100 fuudh (talaabo).
- Baaskiilad kastaa waa inay yeelato biirig ku filan.

LA-WADAAGGA JIDKA BAASKIILADLAYDA

Qofka baabuurka wataa waa inuu:

- La wadaagaa jidka baaskiiladaha. Baaskiiladlaydu waxay leeyihiin xuquuqda isticmaalka jidka oo la mid ah darawaliinta kale, marka laga reebo jidka weyn. (4511.52)
- U ilaaliyaa masaafad ammaan ah oo ah ilaa saddex fuudh u dhaxaysa baabuurka iyo baaskiiladda.
- Dhaafaa baaskiiladlaha keliya marka ay ammaan tahay dhaafitaanku.
- Ka tagaa masaafad marka uu midig u leexanayo ee uu dhaafo baaskiiladle si baaskiiladlaha aan loo horjarin marka uu qaboojiyo baabuurku.

11 - LUGEEYAYAASHA

Sida uu sheegayo sharciga gaadiidka ee Ohio, lugeeyayaasha waxay leeyihiin xuquuq iyo xilal iyo mas'uuliyada gaar ah xagga gaadiidka. Aqoonta sharciga taraafikadu waa difaaca ugu fiican ee lugeeyayaasha ee dhimashada iyo dhaawac shilalka.

CALAAMADAHA & SIGNALADA

Lugeeyayaasha, iyo darawaliinta baabuurta, waxa qabanaya xakamaynta calaamadaha iyo signalada taraafigga. Tusaale ahaan, waa lugayn karaa laydha cagaaran xagga jihada taraafigga ee ay xaqa u leeyihiin. Markay ka talaabayaan jidadka, lugeeyayaashu waa inay iska fiiriyaan darawaliinta ku leexanaysa laydhka guduudka ah.

SIGNALADA KONTOROOLA LUGEEYAYAASHA

Mar alla marka ay signalada kontoroola lugeeyayaasha ama qalbka kale ee kontoroola gaadiidka ay muujiyaan erayada lugee,, hqa lugayn, ama sug, lugeeyayaasha waa in lagu hagaa sedan soo socota:

LUGEE - lugeeyayaasha u jeeda signalka waa ka talaabi karaa jidka xagga jihada signalka oo darawalada dhammaan baabuurta kale xaq ayey siinayanaan.

HA LUGAYN/SUG - lugeeyayaasha ma bilaabi karaan ka talaabista jidka.

FIIRI LABADA JIHABA

Lugeeyayaasha waa in aanay gelin jidka dadweynaha ama jidka weyn iyaga oo aan iska fiirin labada jihaba si ay u arkaan wixii baabuur ku soo dhaw. Waa in aanay ka bixin jidka dhinaciisa ama meel ammaan ah oo aanay lugayn ama ordin dariiqa baabuurka soo dhaw ee halista gelin kara.

ISTICMAAL MEELAHA LAGA TALAABO

Lugeeyuhu waa in aanu ka talaabin jidka ku yaal degmo meel aan ahayn meesha laga talaabo, calamd iyo calamad la'aanba. Marka aan laga talaabayn, lugeeyuhu waa inuu siiyaa xaqa haadka baauurta.

BARBAR LUGAYNTA JIDKA

Marka dariiqyada la lugeeyaa ama marinade la siman yihiin jidka ama jidka weyn, lugeeyayaashu waa in aanay dhex lugayn, barbar lugayn qaybta jidka ee baabuurtu marayso. Markaanu jirin dariiq la lugeeyaa, lugeeyayaasha waxa looga baahan yahay in ay lugeeyaan dhinaca jidka ama darifka haddii ay suurtagal tahay. Marka aanay taasi suurtagal ahayn, waa inay lugeeyaan meel u dhaw darifka jidka, oo eegaya baabuurta ka horimaanaysa. Rabitaanadani waxa kale oo ay saameeyaan kuwa orda ama lugeeya.

LUGEEYAYAASHA LOOMA OggolA JIDKA WEYN

Lugeeyaha looma oggola jiidda xadka jidka weyn, marka laga reebo meelaha lagu nasto, qabashada shaqada dadweynaha, ama natiijo ku timid xaalad degdeg ah ama baabuur jabay.

KAABADAHA (BIIRIIJYADA) LAABMA & JIDKA TAREENKA

Lugeeyayaasha looma oggola kaabadaha laabma kadib marka la bixiyo signalka hawsha biriijka. Sidoo kal, dadka lugaynaya waa ka mamnuuc ka talaabista jidka tareenka marka ay birtu hoos u taal iyo/ama laydhadhku bilig laynayaan.

GACAN HAADINTA

Shaxaadka darawalka inuu qaado jid dhexdiis meel ka baxsan meel aan ammaan ahayn waa mamnuuc. Istaagista jid weyn ganacsi ama deeq iyana waa mamnuuc.

BAABUURTA BADBAADADA DADWEYNAHA

Dadka lugaynaya waa inay siiyaan haadka baabuurta babaadada dadweynaha (ambalaanska, booliiska, baabuurta dabka iwm.) marka ay soo dhawaadaan ee dhawaaqa bixinayaan ama laydhku bilig laynayo.

LUGEEYAYAASHA INDHAHA LA'

Dadka indhaha la' waa lugeeyayaasha keliya ee sharciyan fasax u haysta inay qaataan usha cad (ama usha cad ee afka hore gaduudan). Sharciga ayaa siinaya indhoolaha inuu qaato usha noocaas ah, iyo weliba ayda wax hagta, waa in uu darawl kastaa siiyo xaqa haadka.

KHAMRIGA IYO DAROOGADA

Dadka khamri ama daroogo ku sakhraansan ama labadaba waa ka mamnuuc inay lugeeyaan jidka weyn.

DHARKA DHALAALA

Marka aad habeenkii la lugaynayo, lugeeyayaashu waxa lagula talinayaa inay xidhaan dhar dhalaala si ay darawaliintu u arkaan.

WAX KU TUURISTA AMA KU SII DAYNTA WALAX JIDKA WEYN DHEXDIISA

Waa mamnuuc sharciga Ohio wax lagu tuuro ama sii daayo jidka ama jidka weyn dhexdiisa. Qofka si kama' ah walax ugu tuura jidka weyn waa inuu isla markiiba ka qaado.

Sharcigu wuxu saarayaa ganaax adag si ulakas ah qofka walax ugu tuura jidka weyn dhexdiisa, oo haddii dhaawac ama dhimasho ka timaad, qofkaas ayaa khaladka lagu soo oogi dil ama waxyeelayn ah.

12 - SHARCIYADA QASHINKA

Sharciga Ohio, gudaafadu waa xashiish kasta oo la tuuro, daadiyo ama uu ku sii daayo qof meel dadweyne, hanti gaar ah oo aanu qofkaasi lahayn, ama biyo mareenada Ohio. Sharciga Dib-loogu Noqday ee Ohio wuxu mamnuucayaa gudaafadda, ha ahaato ulakas ama ayey ahaane. Gudaafad qubistu waa denbi ba'an, oo ciqaabtiisa ganaaxu gaadho ilaa $1,000 iyo/ama lix bilood oo xadhig jeel gudihiis ah. Dawladaha hoose waxay adeegsan karaan sharciyada gudaha taas dheeri ku ah kuwan hoos lagu taxay.

GUDAAFAD KA TUURISTA BAABUURKA

Gudaafad ka tuurista baabuurku waa gef sharciga gobolka. Darawaliinta waxa lagu oogi gudaafad tuuris, sida denbiyada kale ee taraafikada, oo waxa kale oo ay mas'uul ka noqon karaan gudaafada kale ee rakaabku qubay.

RAR AAN SUGNAYN

Baabuurna lama kaxayn karo ama laguma dhaqaajin karo jidka weyn haddii aan sidaas loo dhisin, rarin ama daboolin si looga ilaaliyo inay wax ka dhacaan, siibtaan, daadaan ama kaba fakadaan ba. Ciida ama walxaha kale ee loo daadiyey ujeeddo ah jid hagaajinta; biyo ama wax kale oo lagu qubay jidka si loo nadiifiyo ama hagaajiyo. Waxa kale ee ka reebani sharcigan waxa ku jira baabuurta beeraha ee qaada xumaalka dalaga iyo baabuurta qashinka eek u jira hawsha qaaditaanka rarkooda.

GUDAAFAD QUBISTA & TUURISTA AAN SHARCIGA AHAYN

Ka tegista qashin ama tuurista walax meel dadweyne ama dhul gaar loo leeyahay ama biyo mareen waxay dhalin kartaa ganaax ama xadhig. Sharciga gobolku wuxu kale oo mamnuucayaa dhigitaanka qashinka qof kale qashinkiisa ruqsad la'aan aanad ka haysan hatiilahaas, haddii aanay hawshu ahayn mid loo adeegsanayo dan dadweyne, ama qashinka aan laga soo qaadin meeshaas la dhigayo.

WASAKHAYNTA DHULKA GOBOLKA AMA BIYAHA

Gudaafad ku qubitaanka dhulka gobolka, ama meel jeexjeexa, tog, webi, biyoxidh, lag ama marin biyood akel, oo qoyb ka ah sagaxad sare ama nidaam

biyaha dhulka ah waa mamnuuc. Ciqaab ayaa iman karta haddii gudaafada al qubay ay u dhawdahay meel biyo yaalaan daad laga soo qaaday.

KU TUURITAANKA XASHIISHKA, SALIID AMA WASAKH KALE TOGGA AMA BULAACADDA

Ku qubitaanka, hadhaaka dhuxusha (coal), batroolka ama waxyaabaha batroolka laga sameeyo biyo mareen dadweyne waa ku gef sharciga gobolka.

WALAX KA SOO QUBIS DOONI DUSHEED

Qubitaanka ama ka soo tuurista ama ka soo riditaanka gudaafad ee ka soo dhacda doonida waa mamnuuc.

BAABUURTA LAGA TAGAY

Ka tegitaanka baabuur khariban dhul gaar loo leeyahay ruqsad la'aan qofka hantiilaha ah muddo ka badan 72 saacdood waa gef sharciga gobolka ah.

QLAAB LAGA TAGAY

Sharciga gobolku wuxuu rabaa qaaditaanka waxyaaba birta ama qadhabida leh ama qalabka adag meel hawo xidhan ama ku dhaw sanduuqa xidhan meel ay gaadhi karaan ama ka ag dhaw carruur.

LIFAAQA A - XARUMAHAHA IMTIXAANKA RUQSADDA DARAWALNIMO

FIIRO GAAR AH: Lambarrada taleefanka qaarkood, cinwaannada iyo maalmaha iyo wakhtiyada jadwalka ku jira ayaa laga yaabaa inay isbeddelaan goob ka-guur awgeed. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, fadlan la xiriir rugta Roonddada Waddooyinka Gobolka Ohio ee deegaankaaga.

SI AAD U BALANSATO IMTIXAANKA WADDADA, BOOQO www.ohiodrivingtest.com

Degmada	Cinwaanka	Ballanka Maalmaha	Ay Furan Yihiin
Allen	419 N. Elizabeth St., Suite C Lima	(419) 225-5786	Tal. - Sabt.
Ashland	1652 Eagle Way Ashland	(419) 281-8681	Tal. - Sabt.
Ashtabula	77 N. Chestnut St. Jefferson	(440) 576-0200	Tal. - Sabt.
Athens	184 W. Union St. Athens	(740) 593-7111	Tal. - Sabt.
Auglaize	15472 Wapakoneta-Fisher Rd. Wapakoneta	(419) 738-2707	Tal. - Arb.
Belmont	320 Hall St. Bridgeport	(740) 609-0170	Tal. - Sabt.
Butler	1720-B S. Erie Hwy. Building C Hamilton	(513) 893-8361	Tal. - Sabt.
Carroll	155 W. Main St. Carrollton	(330) 627-5444	Kham. - Jim.
Champaign	1512 South U.S. 68 Urbana	(937) 653-5797	Tal. - Arb.
Clark	Park Shopping Center 1139 Bechtle Ave. Springfield	(937) 325-4554	Tal. - Sabt.
Clermont	457 W. Main St. Batavia	(513) 732-7665	Tal. - Sabt.
Clinton	State Highway Patrol 950 Rombach Ave. Wilmington	(937) 383-4519	Kham. - Sabt.
Columbiana	7735-C State Route 45 Lisbon	(330) 424-5185	Tal. - Sabt.
Coshocton	706 S. 7th St. Coshocton	(740) 623-8584	Tal. - Arb.

Degmada	Cinwaanka	Ballanka Maalmaha	Ay Furan Yihiin
Crawford	1653 Marion Rd. Bucyrus	(419) 562-3929	Tal. - Sabt.
Cuyahoga	14000 Broadway Ave. Garfield Heights	(216) 787-5880	Tal. - Sabt.
Cuyahoga	6420 Mayfield Rd. Mayfield Heights	(216) 787-5880	Tal. - Sabt.
Cuyahoga	12000 Snow Rd. Parma	(216) 787-5880	Tal. - Sabt.
Darke	641 Wagner Ave., Suite B Greenville	(937) 548-4240	Tal. - Sabt.
Defiance	999 Procom St., Suite 104 Defiance	(419) 784-1026	Tal. - Sabt.
Delaware	2079 N. U.S. Highway 23 Delaware	(740) 369-3477	Tal. - Sabt.
Fairfield	980 Liberty Dr., Suite 200 Lancaster	(740) 654-7947	Tal. - Sabt.
Fayette	105 E. East St. Washington Court House	(740) 636-8857	Tal. - Arb.
Franklin	1970 W. Broad St. Columbus	(614) 995-5353	Isn. - Jimc.
Franklin	4738 Cemetery Rd. Hilliard	(614) 921-8946	Tal. - Sabt.
Fulton	152 S. Fulton St. Wauseon	(866) 401-3926	Kham. - Jim.
Gallia	499 Jackson Pike Gallipolis	(877) 599-8378	Tal. - Arb.
Geauga	602 South St., Suite B6 Chardon	(440) 286-9530	Tal. - Sabt.
Greene	601 Ledbetter Rd., Suite C Xenia	(937) 372-6850	Tal. - Sabt.
Guernsey	224 Dewey Ave. Cambridge	(740) 432-2545	Tal. - Sabt.
Hamilton	11177 Reading Rd., Suite 201-202 Cincinnati (Sharonville)	(513) 769-3047	Tal. - Sabt.
Hamilton	Seven Hills Plaza 10940 Hamilton Ave. Cincinnati (Seven Hills)	(513) 674-7830	Tal. - Sabt.
Hancock	8210 Co. Road 140, Suite C Findlay	(419) 423-2381	Tal. - Sabt.

Degmada	Cinwaanka	Ballanka Maalmaha	Ay Furan Yihiin
Huron	142 Cleveland Rd. Norwalk	(419) 668-7413	Tal. - Sabt.
Jackson	301 Huron St. Jackson	(740) 286-4245	Arb. - Sabt.
Jefferson	125 Fernwood Rd. Wintersville	(740) 264-6111	Tal. - Sabt.
Knox	671 N. Sandusky St. Mt. Vernon	(740) 392-1846	Arb. - Sabt.
Lake	2736 N. Ridge Rd., Unit #7 Painesville	(440) 354-9606	Tal. - Sabt.
Lawrence	2717 S. Third St., Suite B Ironton	(740) 532-6793	Tal. - Sabt.
Licking	873 E. Main St. Newark	(740) 345-1335	Tal. - Sabt.
Logan	1365 CR 32, Suite #1 Bellefontaine	(937) 592-7911	Kham. - Sabt.
Lorain	657 Chestnut Commons Dr. Elyria	(440) 323-9466	Tal. - Sabt.
Lucas	4460 Heatherdowns Blvd. Toledo	(419) 385-6479	Tal. - Sabt.
Madison	294 Lafayette St. London	(614) 921-8946	Jim. - Sabt.
Mahoning	490 S. Broad St. Canfield	(330) 702-0948	Tal. - Sabt.
Marion	222 W. Center St. Room 1127 Marion	(740) 223-1448	Tal. - Sabt.
Medina	970 N. Court St. Medina	(330) 725-3014	Tal. - Sabt.
Mercer	330 Portland St., Suite 1 Celina	(419) 586-3912	Kham. - Sabt.
Miami	1275 Experiment Farm Rd. Troy	(937) 335-1057	Tal. - Sabt.
Montgomery	6134 Chambersburg Rd. Huber Heights	(937) 236-1763	Tal. - Sabt.
Muskingum	255 Sunrise Ctr. Zanesville	(740) 453-8147	Tal. - Sabt.
Pickaway	141 W. Main St., Suite. 600 Circleville	(614) 921-8946	Tal. - Arb.
Portage	444 S. Meridian St. Ravenna	(330) 296-4160	Tal. - Sabt.

Degmada	Cinwaanka	Ballanka Maalmaha	Ay Furan Yihiin
Preble	530 Junction Village Mall Eaton	(937) 456-1266	Tal. - Sabt.
Richland	1157 Park Ave. W Mansfield	(419) 529-2231	Tal. - Sabt.
Ross	475 Western Ave., Suite L Chillicothe	(740) 775-1377	Tal. - Sabt.
Sandusky	500 W. State St., Suite E Fremont	(419) 334-2012	Tal. - Sabt.
Scioto	3980 Rhodes Ave. New Boston	(740) 456-0135	Tal. - Sabt.
Seneca	451 E. Market St., S.R. 101 Tiffin	(419) 448-4030	Tal. - Sabt.
Shelby	1000 Milligan Ct., #102 Sidney	(937) 498-4779	Tal. - Sabt.
Stark	3195 Whitewood St. N.W. North Canton	(330) 433-9214	Tal. - Sabt.
Summit	650 Graham Rd. Suite 100A Cuyahoga Falls	(330) 923-9721	Tal. - Sabt.
Summit	21 5th St S.E. Barberton	(330) 753-2000	Tal. - Sabt.
Trumbull	5555 Youngstown-Warren Rd. #203 Niles	(330) 544-5404	Tal. - Sabt.
Tuscarawas	1260 Monroe Ave. NW Suite 9E New Philadelphia	(330) 602-7810	Tal. - Sabt.
Union	940 London Ave., Suite 1300 Marysville	(937) 642-2431	Tal. - Arb.
Van Wert	10234 Van Wert-Decatur Rd. Van Wert	(866) 401-3926	Jim. - Sabt.
Vinton	301 W. High St. McArthur	(877) 599-8378	Arb.
Warren	19 Dave Ave. Unit C Lebanon	(513) 932-5825	Tal. - Sabt.
Washington	148 A Gross St. Marietta	(740) 373-3679	Tal. - Sabt.
Wayne	340 S. Market St. Wooster	(330) 264-7342	Tal. - Sabt.
Williams	13065-A County Rd. D50 Bryan	(866) 401-3926	Tal. - Arb.
Wood	1616 Wooster St. Bowling Green	(419) 353-5920	Tal. - Sabt.

LIFAAQA B - MACLUUMAADKA XUBIN DEEQ-BIXIYAHA

WAKAALADAHA MAARAYNTA BIXINTA XUBINAHA JIDHKA EE OHIO

WAKAALADAHA MAARAYNTA BIXINTA XUBINAHA JIDHKA EE OHIO
BADHTAMAHA IYO KOONFURTA OHIO
Lifeline of Ohio Organ Procurement (LOOP)
(614) 291-5667

GALBEED-DHEXE IYO WOQOOYI-GALBEED OHIO
Life Connection of Ohio
937) 223-8223 (Jiidda Dayton)
(419) 893-4891 (Jiidda Toledo)

WOQOOYI-BARI OHIO
LifeBanc
(216) 752-LIFE

KOONFUR-GALBEED OHIO
Ohio Valley Life Center
(513) 558-6442

LIFAAQA C - SU'AALAHA IMTIXAANKA NAMUUNADDA AH EE LA SOO QAATAY IMTIXAANKA DARAJADA AQOONTA (CLASS D)

1. Waa maxay farsamada darawalnimo ee ugu fiican ee la iskaga ilaalin karo shilka marka la dul socdo meel baraf leh ama xaalado baraf leh?

   A. Culays dheeraad ah saar baabuurka si uu dhulka u qabsado
   B. Sida ugu dhakhso badan uga bax waddada weyn
   C. Geli geerka afarta taaryirba ku socodsiiya baabuurka
   D. Dhin xawaaraha oo kordhi inta aad u jirto gaadiidka kale

2. Laydhka taraafik guduud ah oo bilig-bilig leh meel is-goys ah waxay u dhigantaa waxyaabaha soo socda oo kale?

   A. Calaamad qaboojin ah
   B. Calaamad jidka ayaa lagaa leeyahay ah
   C. Calaamad joogso ah
   D. Calaamad is-goys ah

3. Codsiga ruqsadda wadaha waa inuu saxiixaa waalidka ama wakiilka codsadaha haddii uu ka yar yahay da'da?

   A. 16
   B. 20
   C. 21
   D. 18

4. Haddii aan lagu soo dhejin wax kale, xawaaraha xaddidan ee lagu socon karo meel xaafado ah waa:

   A. 25 mayl saacddii
   B. 20 mayl saacddii
   C. 35 mayl saacddii
   D. 15 mayl saacddii

5. Kursiga xakameeya ilmaha waxa looga baahan yahay midkee kuwa soo socda?

   A. Dhammaan ilmaha ka yar da'da afar iyo ilmaha culayskoodu ka yar yahay 40 bownd.
   B. Dhammaan ilmaha uu dhalay ama wakiilka wadaha baabuurka
   C. Dhammaan ilmaha fadhiya kursiga hore
   D. Dhammaan ilmaha da'da ka yar lix haddii aanay jirin hanta hawadu

6. Markaad socoto dariiq weyn oo afar khad ah, waa kuwee baabuurta loo baahan yahay inay iska taagaan baska ilmaha u joogsaday inuu dejiyo carruur?

   A. Keliya baabuurta ka imaanaysa xagga danbe ee baska ee dhinaca baska u socota
   B. Dhammaan baabuurta kaga imanaysa baska labada jiho miduun
   C. Midna loogama baahna haddii aanay carruurtu muuqan
   D. Dhammaan baabuurtu waa dhaafi karaan baska marka ay ridaan cod la maqli karo

7. Marka laba baauur isugu yimaadaan is-goys isla wakhti qudha, kee xaq u leh jidka haddii calaamdo ama astaamo qeexayn nidaamka?

   A. Baabuurka ka soo imanaya midigta ayaa leh xaqa jidka
   B. Baabuurka ka soo imanaya bidixda ayaa leh xaqa jidka
   C. Baabuurka hoonka dhawaajintiisa ugu horreeya ayaa leh xaqa jidka
   D. Baabuurka ugu dheeraynaya ayaa leh xaqa jidka

8. Hadd qof cabbay sharaab alkolo leh, siduu qofku isaga saari karaa saamaynta cabbitaankaas?

   A. Casiir tamaandho iyo liin ah
   B. Qaxwe kulul
   C. Hawo daray ah
   D. Wakhtiga

9. Goorma ayaa wadaha loo oggol yahay inuu mid uga leexda laydh taraafig oo guduuddan?

   A. Marka waduhu joogsado ee hubiyo in leexadku aanu farogelinayn gaadiidka talaabaya
   B. Marka ay jiraan caalamado si cad u muujinayaan in laga leexan karo laydh guduud ah
   C. Keliya marka uu amro sarkaal booliis ah
   D. Kadib qaboojin hore iyo hubinta in leexadku aanu farogelinayn gaadiidka kale iyo dadka lugaynaya

10. Goorma ay joogsi loo baahan yahay is-goyska marka aany jirin wax caalamad muujinaysa khad la joogsado ama meel laga talabo, meeshee ay haboon in lagu sameeyo joogsiga?

    A. Wadaha looma baahna inuu joogsado
    B. Wadaha wax looga baahan yahay inuu qaboojiyo si uu u hubiyo gaadiidka is-waydaaranayaa inay banaan tahay
    C. Keliya meesha uu waduhu ka arki karo ugu yaraan 200 oo fuudh dhinac kasta iyada oo aan la tixgelin dariiqa jaraya
    D. Meesha ugu dhaw jidka jaraya meesha uu waduhu ka arki karo gaadiidka ka soo socda jidka jaraya kahor intaanay soo gelin waddada

JAWAABO

1)	D	6)	A
2)	C	7)	A
3)	D	8)	D
4)	A	9)	A
5)	A	10)	D

OHIO DEPARTMENT
OF PUBLIC SAFETY
EDUCATION · SERVICE · PROTECTION

WWW.PUBLICSAFETY.OHIO.GOV

HSY 7608 11/11